



**XAFIISKA  
HANTIDHOWRKA GUUD**  
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



# WARBIXINTA SANNADLAHA EE BAARISTA U HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Diseembar 2022



TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Joon 2023



Horumarinta hannaanka isla xisaabtanka  
iyo daah-furnaanta maamulka, si loo  
gaaro Soomaaliya isku filan.



# EREYADA LA SOO GAABIYEY

---

<b>SFMIS</b>	Somalia Financial Management Information System
<b>INTOSAI</b>	International Organization of Supreme Audit Institutions
<b>AFROASAI</b>	African Organization of Supreme Audit Institutions
<b>AG</b>	Auditor General
<b>GSH</b>	Golaha Shacabka
<b>AFROSAI-E</b>	African Organization Supreme Audit Institutions of English-speaking
<b>XM</b>	Xafiiska Madaxweynaha
<b>FGS</b>	Federal Government of Somalia
<b>XRW</b>	Xafiiska Ra'iisulwasaaraha
<b>ARABOSAI</b>	Arab Organization of Supreme Audit Institutions
<b>STA</b>	Single Treasury Account
<b>ISSAI</b>	International Standards of Supreme Audit Institutions
<b>MoF</b>	Ministry of Finance
<b>CBS</b>	Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya
<b>CAS</b>	Ciidanka Asluubta Soomaaliya
<b>WTKHB</b>	Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha
<b>JUS</b>	Jaamacadda Ummadda
<b>NISA</b>	National Intelligent Security and Agency
<b>OAGS</b>	Office of the Auditor General of Somalia
<b>PFM</b>	Public Financial Management
<b>BdFS</b>	Baarlamaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya
<b>DXDF</b>	Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka
<b>WB</b>	World Bank
<b>Tr.</b>	Tirsi
<b>Lr.</b>	Lambar
<b>TCC</b>	Tax Compliance Certificate
<b>DG</b>	Director General
<b>TIN</b>	Tax Identification Number
<b>DFS</b>	Dowladda Federaalka Soomaaliya
<b>XHGQ</b>	Xafiiska Hantidhawrka guud ee Qaranka

---

## TUSMADA

EREYADA LA SOO GAABIYEEY.....	i
GOGOLDHIG .....	iii
DULMAR GUUD .....	v
HORDHAC.....	viii
WALXAHA LA BAARAY.....	ix
UJEEDDOOYINKA IYO BAAXADDA BAARISTA.....	ix
<b>I. HAY'DAHA MAAMULKA.....</b>	<b>1</b>
1. XAFIISKA MADAXWEYNAHA (XM) .....	2
2. GOLAHA SHACABKA (GSH) .....	9
3. XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA (XRW).....	23
4. WASAARADDA MAALIYADDA (WM).....	33
5. WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIB U HESHIISIINTA.....	44
6. WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB-U-DHISKA IYO GURYEYNTA.....	52
<b>II. HAY'DAHA AMNIGA .....</b>	<b>61</b>
7. HAY'ADDA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA .....	62
8. CIIDANKA BOOLISKA SOOMAALIYEED (CBS).....	68
9. CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA (CXDS) .....	77
10. CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYEED (CAS) .....	84
<b>III. HAY'DAHA DHAQAALAHA .....</b>	<b>91</b>
11. WASAARADDA TAMARTA IYO KHEYRAADKA BIYAHA (WTKHB) .....	92
12. HAY'ADDA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED .....	101
<b>IV. HAY'DAHA ARRIMAHA BULSHADA.....</b>	<b>107</b>
13. JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED (JUS).....	108
14. HAY'ADDA TIRAKOOBKA QARANKA.....	113
15. WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO ADEEGGA AADANAHA.....	120
GUNAANAD.....	127





Tix.: XHG/HG-229/2023

Tr.: 30/06/2023

Xafiiska Madaxweynaha  
Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya,  
Madaxtooyada Soomaaliya,  
Muqdisho, Soomaaliya

### Mudane Madaxweyne,

Waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo Warbixinta Baarista Sannadlaha ee U Hoggaansanaanta Sharciga taas oo aan ku sameeyay (15) hay'adood ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sannadkii dhammaaday 31<sup>da</sup> December 2022. Xafiiska Hantidhawrka Guud Qaranka ayaa mudnaanta siiyay 15 hay'adood kuwaas oo aan u soo xushay in aan baaro ka dib markii aan tixgaliyay qiimaynta khataraha la xariira iyo ahmiyadda ay dadweynaha u leeyihiin.

Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga waxa aan u sameeyay si waafaqsan Heerka Baarista Hay'adaha Hantidhawrista Guud ee Caalamiga ah (ISSAIs). Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka (XHGQ) waxaa uu xubin ka yahay Hay'adaha Hantidhawrada Guud ee Caalamiga ah (INTOSAI), Hay'adaha Hantidhawrada Guud ee Qaaradda Afrika (AFROSAI), Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Afrika kuwooda ku hadla luuqadda Ingiriiska (AFROSAI-E) iyo Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Dalalka Carabta (ARABOSAI).

Warbixintaan waxa aan ku caddeeyay khaladdaadka aan ku soo ogaaday Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga kuwaas oo isugu jira cilado ka jira dhinacyo kala duwan sida; hannaanka maamulka iibka agabka, adeegga, iyo hawlaha, hannaanka maamulka hantida, qaar ka mid ah deeqaha dibadda oo aan lagu darin Miisaaniyadda Qaranka sidoo kalena aan la marsiin Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud (SFMIS), iyo khaladdaad kale.

Warbixintan waxaa kale oo hay'ad kasta warbixinteeda gadaal kaga lifaaqan qeyb u gaar ah dabagalka khaladdaadka baaristii sannadkii hore (audit follow-up) ee 2021. Waxaa kale oo xusid mudan intii baaristan aan waday in aan ogaaday in talooyin badan oo ku aadan khaladdaadkii sannad baariseedkii hore in aan la fulin waliba dabagal iyo isku day badan oo aan sameeyay kadib, taas oo u baahan waxqabad deg-deg ah.

Haddaba, waxa aan aad ugu rajo waynahay in wax laga qaban doono cilladaha aan tilmaamay ee ka jira hay'adaha aan baaray, iyada oo mas'uuliyiinta u xilsaaran maamulka hay'adahaas aan ka filayno in ay fuliyaan talooyinka aan la wadaagay si ay u saxaan maamulka hantida, maaliyadda iyo isla-xisaabtanka.

Mudane Madaxwayne, waxa aan u mahad celinayaa adiga, mas'uuliyiinta Wasaaradaha iyo dhammaan hay'adaha kale ee dowladda ee aan baarista ku sameeyay oo garab igu siiyay gudashada waajibaadkeyga dastuuriga. waxa aan si gaar ah ugu mahad celinayaa shaqaalaha kala duwan ee hay'adaha DFS oo illa wadaagay macluumaadkii aan baarista uga baahnaa intii aan baarista waday.

Qadarin,



**Avv. Axmed Ciise Guutaale**  
**Hantidhawraha Guud, JFS**

**OG:** Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya,  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka, BJFS,  
Guddoomiyaha Aqalka Sare, BJFS



## Farriinta

Hantidhowraha Guud, JFS

Dhammaan saraakiisha iyo howlwadeenada ka howlgalla illaha Dakhliga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah in ay Dakhliga Dowladda u qabtaan u xisaabiyaan uguna xareeyeen khasnadda dhexe ee dowladda si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka.

U hoggaansanaanta Sharcigu waxa ay noo horseedi kartaa hagaajinta howlaha hey'adaha dowladda iyo hirgelinta dowlad wanaagga.

## DULMAR GUUD

Intii baaristu socotay, waxa aan xariirro wadashaqeyn hufan la sameeyay maamullada hay'adaha aan baaray, si aan fursad ugu siiyo in ay saxaan khaladdaadka aan baaristu ogaaday. Qeyb ka mid ah xariirradan waxa aan ku muujiyay warqadaha maamulka (management letters) iyo weydiimihii intii baaristu socotay (audit queries) kuwaas oo aan la wadaagayay dhammaan maamullada hay'adaha aan baaray.

Warbixintan baarista sannadlaha ee U Hoggaansanaanta Sharciga, waxaay ka kooban tahay shan iyo toban (15) hay'adood kuwaas oo aan baarista ku sameeyay sannad maaliyadeedka dhammaaday 31<sup>da</sup> December 2022. Baaristan waxa aan diiradda ku saaray U Hoggaansanaanta shuruucda, xeerarka iyo hannaanka la isku-waafaqsan yahay (best practice) ee waxyaabaha aan baaray (subject matters):

- 1) Hannaanka maamulka iibka agabka, adeegga, iyo hawlaha;
- 2) Hannaanka maamulka hantida;
- 3) Isticmaalka Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud (SFMS) ee ku aadan lacagaha deeqaha dibedda; iyo
- 4) Arrimaha kale ee ahmiyadda leh (Other audit matters).

Khaladdaadka aan warbixintan ku soo bandhigay waa waxyaabihii aan xalka loo helin intii baaristu socotay. Warbixintan waxay ka kooban tahay Talo soojeedino baarista la xariirra kuwaas oo aan ugu talagalay si wax looga saxo khaladdaadka baarista aan ku ogaaday.

Qeybta hoose waxaa lagu soo koobay khaladdaadka ugu waaweyn ee baalmarsan shuruucda, xeerarka iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay:



## 1. Hannaanka maamulka iibka agabka, adeegga, iyo hawlaha

### Khaladdaadka

waxa aan baarista ku ogaaday in 15<sup>ka</sup> hay'adood ee aan baaray ay sameeyeen wax soo iibsasho dhan US **\$60,111,781.26**, iyadoo aan sameynin qorshe iib sannadle ah oo la ansixiyay taasoo si taban u saameyn karta daahfurnaanta iyo in si waxtar leh loo qoondeeyo hantida dowladda. Intaa waxaa dheer, hay'adaha aan baaray ma aysan abuurin waaxda iibka iyo guddiga qiimeynta, taasoo sare u qaadeysa tuhun ku yimaada daahfurnaanta hannaanka iibka. Sidoo kale, dhammaan maamulka hay'adaha la baaray waxay sameeyeen wax soo iibsi iyadoo aan diyaarin liis xulasho hordhac ah, taasoo hoos u dhigeysa tayada iyo kalsoonida alaabta iyo adeegga.

### Talo soojeedin

- Sida uu dhigayo Sharciga Iibka, dhammaan hay'aduhu waa in ay si degdeg ah u sameeyaan; qorshe iib 2023 iyo sannadaha xiga, oo la ansixiyay, ay dhisaan waaxda iibka, guddiga qiimeynta iyo in ay diyaariyaan liis xulasho hordhac ah ee qandaraasleyaasha. Fulinta tillaabooyinka kaliya kuma koobna u hoggaansanaanta sharciga iibka balse waxay sidoo kale kor u qaadeysaa daahfurnaanta, sinaanta iyo beeqaaminta hannaanka iibka.

## 2. Hannaanka maamulka hantida

### Khaladdaadka

- waxa aan baarista ku ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu aysan dhaqan galin xeerka iyo habraaca maamulka hantida DFS oo la ansixiyay iyo in aanay sameeyn diiwaanka middeysan ee hantida oo wax-ku-ool ah, si loogu maamulo hantida qaranka.
- Hay'adaha aan baaray ayaan ogaaday in diiwaanka hantidooda uu ahaa mid aan dhammeystirneyn, sidoo kalana aan si joogta ah loo cusboneysiin, taasoo caqabad ku ah maamulka iyo dabagalka hantida. waxa aan sidoo kale ogaaday, qeyb ka mid ah hay'adaha la baaray in aanay ku diiwaangelin gaadiidkooda magaca hay'adda, taasoo dayac ku keeni karta maamulka hantida iyo isla-xisaabtanka.
- Intaas waxaa dheer, walaac la xariira dhulal iyo dhismayaal dowladeed oo tiradoodu tahay **436**, kuwaas oo ku jira gacmo gaar ah. Hay'adaha la baaray ma heystaan dukumiintiga lahaanshiyaha hantida, taasoo su'aal gelin karta sharciyadda iyo xakameynta hantida.

### Talo soojeedin

- Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa in uu diiradda saarrra hirgalinta xeerka iyo habraaca maamulka hantida DFS oo wax-ku-ool ah. Sidoo kale, waa in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu uu dhaqangeliyaa nidaamka keydka (database system) ee diiwaanka middeysan ee dhammaan hantida Dowladda, inta lagu gudajiro sannadka 2023.
- Waa in hay'adaha la baaray ay ku diiwaangeliyaan gaadiidkooda magaca hay'adda iyo in ay u diyaariyaan habka ku habboon baarista marka loo baahdo sannadka 2024 iyo sannadaha xiga.
- Sidoo kale, waa in hay'adaha DFS ay ku dadaallaan dib-u-soo celinta gaadiidka, dhismayaasha iyo dhulalka ay leeyihiin ee ka maqan gacanta maamulkooda iyadoo xaqiijinaya dib-u-hanashada ama abuurista dukumiintiga lahaanshiyaha.

### 3. Isticmaalka Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

#### Khaladdaadka

- Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in todobo (7) hay'adood oo kamid ah shan iyo tobanka (15) hay'adood ee la baaray ay heleen taageero dibadeed oo dhan US **\$38,767,688.21**, si ay ugu fuliyaan mashruucyo. Si kastaba ha ahaatee, deeqdan lacageed ayaan lagu darin miisaaniyadda qaranka ee la ansixiyay, laguna maamulin khasnadda dhexe ee dowladda.
- Heshiisyada deeqaha ee u dhexeyay ha'adaha dowladda iyo deeq bixiyayaasha ayaan Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu daraf ka sixiixin, taasoo lid ku ah sida uu qabo Qodobka 38(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019.
- Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in shan (5) kamid ah hay'adaha la baaray ay fureen ayna howlgaliyeen koontooyin bangi gaar loo leeyahay kana baxsan qasanadda dhexe ee dowladda iya-goon wax oggolaansha ah ka heysan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, taasoo lid ku ah Qodobbada 9 (7) iyo 42 (3) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019.

#### Talo soojeedin

- Waa in dhammaan deeqaha dibedda ee ay helaan hay'adaha dowladda lagu daraa miisaaniyadda DFS iyadoo la soo marinayo Khasnadda Dhexe ee Dowladda (TSA) lana isticmaallo Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud. Sidoo kale, waa in Wasaaradda Maaliyadda lagu wargaliyo lacagaha ku harsan kontooyinka ka baxsan Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud.
- Waa in maamulka hay'adaha kala duwan ay xaqiijiyaan in heshiisyada lacagaha deeqaha dibedda uu dhinac ka saxiixay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan Qodobka 38(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.
- Waa in maamullada hay'adaha dowladdu ay oggolaansho iyo ansixin ka haystaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aysan furin koonto bangi gaar loo leeyahay. Waana in dhammaan koontooyinka la furay habraac sharci la'aanneed bid loo waafajiyaa habraaca Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

### 4. Arrimaha kale ee ahmiyadda leh (Other audit matters)

#### Khaladdaadka

- waxa aan baarista ku ogaaday, sagaal (9) hay'adood oo kamid ah shan iyo tobanka (15) hay'adood ee aan baaray sannad maaliyadeedka dhammaaday 31<sup>da</sup> Diseembar 2022 in aysan sameeyn waaxda baarista gudaha sida uu farayo sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Sharci L.r 17. Taasina waxay sababtay islaxisaabtan la'aan iyo in aan la soo saarin warbixita baaraha gudaha oo waqtiyeysan.
- In aan la dhisin waaxda baarista gudaha oo wax-ku-ool ah waxay sababaysaa in hay'aduhu dowladdu u nuglaadaan wax-isdabamarin, musuq-maasuq iyo khaladdaad aan lagu baraarugsaneyn taasoo dhaawaci karta sumcadda maamulka hay'adaha DFS.

## Talo soojeedin

- Waxaan talo ku bixinayaa in hay'adaha la baaray iyo maamulka Wasaaradda Maaliyaddu ay si dhow u wada-shaqeeyaan si loo saxo hannaanka wax soo iibsiga, maamulka hantida iyo maareynta deeqaha dibedda.

## HORDHAC

Mas'uuliyadaha Wasiirka Maaliyadda, Xisaabiyaha Guud, Saraakiisha Idman iyo Hantidhawraha Guud ee la xariirta maamulka hantida Dowladda, ka warbixinta iyo isla-xisaabtanka waxay ku xusan yihiin Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda. Sidoo kale, sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud ayaa dhigaya, Hantidhawraha Guud waxaa uu mas'uul ka yahay baarista dhammaan Hantida Dowladda iyo in uu ka soo saaro warbixin.

Qodobbada 6, 7, 8, 9, 13 iyo 17 ee Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud (Sharci Lr. 34) waxa uu sharciyad buuxda u siinayaa Xafiiska Hantidhawrka Guud in uu baaris ku sameeyo hantida iyo hawlaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, buuggaagta, xisaabaha iyo macluumaadka kale ee dhammaan Wasaaradaha, Xafiisyada, Guddiyada iyo hay'adaha Dowladda ee kale. Arrinkan ayaa si faahfaahsan loogu qeexay sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

Warbixintan Baarista sannadlaha ee U Hoggaansanaanta sharciga ayaa ku saabsan shan iyo toban (15) hay'adood oo aan baaray macluumaadkooda sannad maaliyadeedka dhammaaday 31 December 2022 gaar ahaan waxyaabaha aan ka baaray (Subject Matters) baaristaas oo aan fuliyay sannadkan 2023 una fuliyay si waafaqsan Heerka Baarista Hay'adaha Hantidhawrista Guud ee Caalamiga ah (ISSAIs), Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud iyo shuruucda kale ee dalka. Baaristan aan ku sameeyay qeyb ka mid ah hay'adaha DFS waxa aan ku xushay anigoo tixgalinaya ahmiyadda ay u leeyihiin dalka iyo qiimayn hordhac ah oo aan ku sameeyay khataraha la xariira.

## WALXAHA LA BAARAY

Baaristan waxaa la fuliyay iyada oo la tixgalinayo waxyaabaha la baaraay sida hoos ku xusan:

- 1) Hannaanka maamulka iibka;
- 2) Hannaanka maamulka hantida;
- 3) Isticmaalka nidaamka maareynta maaliyadda guud (SFMIS) ee ku aadan lacagaha deeqaha dibedda; iyo
- 4) Arrimaha kale ee ahmiyadda leh (Other audit matters)

## UJEEDDOOYINKA IYO BAAXADDA BAARISTA

Ujeeddada ugu muhiimsan ee baaristan waxay tahay in aan helo caddeymo baariseed ku habboon kuna filan si aan u soo saaro warbixin leh hubanti macquul ah (reasonable assurance) taas oo ku saabsan in hay'adaha la xushay ay u hoggaansameen shuruucda iyada oo la tixraacayo waxyaabaha la baaray (subject matters) ee sannad maaliyadeedka dhammaaday 31<sup>da</sup> Diseembar 2022.

Si aan u gaaro ujeeddooyinka aan ku ogaanayo khaladdaad ahmiyad leh, ayaa waxa aan maray dhammaan tijaaboyinka hubinnada iyo hannaanka ku habboon baarista.

Baaxadda baaristan waxay tahay shan iyo toban (15) hay'adood, gaar ahaan waxyaabaha aan ka baaray (subject matters) iyo muddada laga soo billaabo 1da Janaayo 2022 ilaa iyo 31<sup>da</sup> Diseembar 2022. Sidoo kale, baaristan U Hoggaansanaanta sharciga waxa aan ku eegay meelmarinta Talo soojeedinnadii Hantidhawrku soo saaray afartii (4) sano ee la soo dhaafay.



## Dulmar Kooban

Warbixinta U Hoggaansanaanta Sharciga

Waxaa la baaray sanadkan:

**15** HAY'AD

**22%**

ka ah tirada guud ee hay'adaha DFS

**58%**

ka ah miisaaniyadda guud ee DFS oo dhan

**944M**




## Dulmarka Taloooyinka 2022

Xafiiska Hantidhawrka Guud Qaranka



## Dulmarka Taloooyinka 2022

Xafiiska Hantidhawrka Guud Qaranka



Si waxqabadka hey'adaha Dowladdu u yeesho waxtar horseeda dhismaha kalsoonida dadweynaha iyo hagaajinta xil-gudashada xukuumadda waa in hey'adaha baaristani quseyso ay fuliyaan dhammaan taloooyinka XHGQ, sidoo kalana waxa aan ka codsanayaa Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Baarlamaanka in uu guto waajibkiisa korjoogteynta iyo dabagalka fulinta taloooyinka Hantidhowrka.

- Avv. Axmed Ciise Guutaale  
Hantidhawraha Guud, JFS



# I. HAY'DAHA MAAMULKA

# 1. XAFIISKA MADAXWEYNAHA (XM)

## 1.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 1.1.1. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) & (2) ee Sharciga libka Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidan:

69(1) Qandaraaska libka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qayb-gal furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qayb-gal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah.

69(2) Heshiisyada Qandaraasyada libka lama kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Sharcigan.

## Khaladka

### A. Kala qaybin iib qiimihiisu dhan yahay US \$1,828,236.43

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Xafiiska Madaxweynuhu ay kala qeybiyeen alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$1,828,236.43**, iyadoo ujeedku yahay in laga leexo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan. Taas oo lid ku ah hannaanka looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay xaddiga lacageed ee lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Qodobka 69 (1 & 2) ee Sharci Lr 22. Faahfaahinta kala qeybinta iibka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Bilaha	Faahfaahin	Caddadka US \$
GG-001	2225	Jan - Dec	Dayactir iyo Hagaajin	\$218,058.00
GG-002	2223	Jan - Dec	Shidaal iyo Saliid	\$388,464.00
GG-001	2221	Jan - Dec	Hawlo guud	\$203,304.00
GG-004	2211	Feb, May, Oct, Dec	Sahay Safar	\$104,400.00
GG-005	2211	December	Sahay Safar	\$252,558.43
GG-006	2261	July - Dec	Raashin	\$199,800.00
GG-007	2261	Jan - June	Raashin	\$199,800.00
GG-001	2261	Jan - Dec	Agab xafiis	\$261,852.00
<b>Wadarta</b>				<b>\$1,828,236.43</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Madaxweynuhu waa inuusan kala qaybin caddadka wax soo iibsiga iyadoo ujeedku yahay in laga leexo xayeysiinta ka qaybgalka tartan furan ee sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga, waa in ay u hoggaansamaan Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016 Qodobka 69aad (1) & (2).

## Jawaabta maamulka

Xafiiska madaxweynaha waxa uu leeyahy budget line ku asteysan charts of accounts, waxa aan jeclaa laheyn lacagtaan aad isku geyseen ee cadadkeeda ah \$1,828,236.43 inaad u kale saartaan madax ahaan ama charts of accounts.

Xadiga ka bilaawdo 2001-50,000 waa in la tartansiiya 3 supplier waana raacnay sharcigaas. XMJS ma bixin qandaraas ka badan US \$50,000 halkii bilba, taas oo micnaheeda yahay shirkad kasto waxeey heystaa hal bil qandaras iyo cusbooneysiin hadii loo baahdo, madaxa aan kale qeybinay waa madaxa 2261

Dhamaan madaxyada xafiiska madaxweynaha weey waafaqsan yihiin habka xakameynta marka laga reebo madaxa 2261 sababta aan u kale qeybinay madaxaan waa sida soo socota:

Madaxa 2261 oo aan u kale jabinay kharashadka kale & Raashin xadiga thresldka oo RQf waa dhafay waa in la xayaysiiyo waxa aan a u kala jabinay \_\_.

Shirkada Light Travel wax heshiisa oo an la galnay sanadki tagay ma jiraa so waa inad noo cadaysan, Madaxyada an siinay shirkada true way madax kasta bishii waa 19kun iyo xogaa marka xaysiin ma noqonayso sas owgeed waxan marsiinay RQF Process.

## Jawaabta XHG

Sida uu qabo Qodobka 5(2) (i), ee Sharci Lr. 22, soo iibsiga adeegga guud sida qalab xafiiseedka, looma sameyn karo cudurdaar amni. Si kastaba hanoqotee, maamulku waa ku mahadsanyahay jaawab celinta.

### 1.1.2. Sharciga

Qodobka 19 (1) iyo (2) Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

19 (1) Habraacyada xulashada horudhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- a) Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- b) Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran

19 (2) Casumaadda xulidda horudhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiyaa Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4aad, xadka qaddarka ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaysa ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.



## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo baahin la'aanta adeeg bixiyayaasha laga soo iibiyay alaabaha iyo adeegga

Intii baaristu socotay waxa aan ogaaday in maamulka Xafiiska Madaxweynuhu uu sameeyay wax soo iibsi xaddigiisu (thresholds) ka sarreeyo \$2,001 kana hooseeyo \$50,000, kaasoo 15 adeeg bixiyayaal loo oggolaaday in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$2,003,467.23** iyadoo aan la sameyn xulasho hordhac ah (Prequalification) sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg inta aan loo dirin warqadda qiimeynta ee adeeg bixiyayaasha. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Bilaha	Caddadka US \$	Faahfaahin
GG-001	June – Dec. 2022	\$218,058.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-002	June – Dec. 2022	\$388,464.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-008	June – Dec. 2022	\$12,616.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-001	June – Dec. 2022	\$203,304.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-004	Feb. to May, Oct. ilaa Dec. 2022	\$104,400.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-005	December 2022	\$252,558.43	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-009	December 2022	\$36,446.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-010	December 2022	\$18,244.80	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-011	December 2022	\$19,978.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-012	Jan. – June 2022	\$23,340.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-013	June – Dec. 2022	\$35,910.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-013	July – Dec. 2022	\$199,800.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-012	Jan – June 2022	\$199,800.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-001	June – Dec. 2022	\$261,852.00	Malahan Xulasho hordhac ah
GG-014	June – Dec. 2022	\$28,696.00	Malahan Xulasho hordhac ah
<b>Wadarta</b>		<b>\$2,003,467.23</b>	

## Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Madaxweynuhu waa in ay sameeyaan xulasho hordhac ah (Prequalification) ee iib kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023.

Waa in la xayeesiiyaa iibka alaabaha, adeegga iyo hawlaha lana sameeyo liiska xulashada hordhaca ah si waafaqsan Qodobka 19aad (1), (2) iyo in la baahiyo liiska sida uu qabo sharciga lana fuliyaa sannadyada xiga.

## Jawaabta maamulka

*In la isticmaalo pre-qualification ama pre-bid waa qeyb ka mid ah diyaarinta bid documents iyadoo lays-ka hubinaayo shirkada qandaraaska la siinayo awood u ma leedahay howshaan loo igmanaayo technical ahaan iyo financial ahaan*

Pre-qualification waxaa loo isticmaala qandars balaaran oo waqti qaadanayo ama qiima ahaan sareeyo taas oo ka dhigan in aan la qeexi Karin si fudud technical ahaan iyo financial ahaan. Sidaas darted xafiiska madaxweynaha ma bixin wax qandraas baaxad weyn qiima ahaan iyo technical ahaan, hadii aad fiirisid qandaraasyada uu bixiyay xafiiska MJFS waa qandaraasyo quseeyo service iyo goods oo si sahlan loo qeexi karo technical iyo financial ahaan sidaas dareted uma baahan wax pre-qualification ama site visit ah xafiiska MJFS Maadaama aan la xayaysiin Karin adeega uu u baahanyahay xafiiska madxwaynaha sababo amini owgeed waxan isticmaalnay RQF process Mahadsanidiin.

## Jawaabta XHG

Sida uu qabo Qodobka 5(2) (i), ee Sharci Lr. 22, soo iibsiga adeegga guud sida qalab xafiiseedka, looma sameyn karo cudurdaar amni. Si kastaba hanoqotee, maamulku waa ku mahadsanyahay jaawab celinta.

### 1.1.3. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiye aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

## Khaladka

### A. Adeeg bixiye la siiyay in ka badan labo madax-xige oo qiimahoodu dhan yahay US \$683,214.00

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Xafiiska Madaxweynuhu uu siiyay hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige oo qiimahoodu dhan yahay US **\$683,214.00** taasoo lid ku ah Habraaca xakameynta (Commitment control) shardiga 2<sup>aad</sup> ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta labada adeeg bixiye ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Caddadka US \$
GG-001	2261	\$261,852.00
GG-001	2225	\$218,058.00
GG-001	2221	\$203,304.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$683,214.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Madaxweynuhu waa in uusan u oggolaan hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige, waana in ay raacaan xeerka iyo habraaca xakameynta inta lagu guda jiro xulashada adeeg bixiyaha sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

Sharciga iibka qaranka waxa uu qabaa in xaaladaha qaar aan la mistimaali Karin sharciga sida emergency ga ama security issue, waa sabata aan jabinay sharcigan sidaas tahay kuma sii socon doono waa saxi doona

Sababta an u siinay waa sababo amni owegeed, Waan qaadanay Talo soojeedinta waxa aan samaynayaa in-aan ogalaan in adeeg bixiye aan la siin labo madax xigeyaal waana la marin doonaa habraaca xakamaynta.

## 1.1.4. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badanyahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

### Khaladka

#### A. Wasaaradda Maaliyadda oo aan loo wareejin iib qiimihiisu ka badan yahay ama la'eg yahay \$50,000

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Xafiiska Madaxweynuhu uu sameeyay wax soo iibsasho alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$1,438,291.00** taas oo aan loo wareejin Wasaaradda Maaliyadda maadaama qiimuhu ka badan yahay xaddiga uu dajiyay Habraaca Xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Billaha	Caddadka US \$
GG-015	2225	May 2022	\$108,055.00
GG-004	2211	May 2022	\$110,000.00
GG-016	2211	July 2022	\$100,765.00
GG-016	2211	Oct.2022	\$59,000.00
GG-016	2211	Dec. 2022	\$130,000.00
GG-017	3112	Nov. 2022	\$930,471.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$1,438,291.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Madaxweynuhu waa in uu u wareejiyaa wax soo iibsiga Wasaaradda Maaliyadda marka ay gaarto xaddi ka badan ama la'eg US \$50,000, inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka 2023 iyo sanadaha xiga.

### Jawaabta maamulka

*Sida sharciga uu qabo lacagahii ka badan US \$50,000 waa in loo wareejiyo wasaarada maaliyada, sida aad ka dheehan karto lixda qodod aad soo qaadatay:*

- 1. Mid ka mid ah waa sahay safar xafiiska madaxweynaha JFS, safarad madaxweynaha JFS qofna ma sii ogaan karo xiliga uu baxaayo iyo Meesha uu aadayo sidaas darteed waxa aan ku qasbanahay inaan isticmaalo emergency method taas oo ka dhegyso meeshii looga tartami lahaay in aan loo tartamin sababtaas awgeed.*
- 2. Sharciga iibka qaranka waxuu qabaa hadii timaado xaalad dag dag ah in la isticmaalo noncompetitive metod.*
- 3. Mid ka mid ah waa dhismaha guriga madaxweynaha taas oo loo isticmaalay restrictive method oo ah in la doortay hal supplier laguna doortay conditions qaas ah oo eey ugu weyn in la ilaaliyo xogta guryaha madaxweynaha JFS.*
- 4. Kharshka dayactirka ee \$108,055.00 waxa uu ahaa kharash contingency fund isla markaana an mar-siinay habraaca procurmentiga iyadoo an labo u kla jabinay si commentmenty control usan u dhaafin Mahadsanidiin*

## 1.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 1.2.1. Hannaanka la isku-waafaqsan yahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aaddan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa.

### Khaladka

#### A. Maamulka gaadiidka oo liita

Waxaan baarista ku ogaaday in sagaal (9) gaari oo uu leeyahay Xafiiska Madaxweynuhu, afar (4) kamid ah aanay laheyn dukumiintiga lahaanshaha, halka shan (5) kamid ahna aan la soo bandhigin xilligii baaristu socotay, si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo. Sida ka muuqata faahfaahinta shaxda hoose:

Nooca gaadiidka	Meesha uu ka yimid	Caqaayad lambar	Faahfaahin
HIACE MINI BUS	DFS	KDH205-0016690	Malahan dukumiintiga lahaanshaha
LANDCRUISER PRADO	DFS	LJ150L-GKMEE5L-E	Malahan dukumiintiga lahaanshaha
SUZUKI	DFS	TK521-P299	Malahan dukumiintiga lahaanshaha
TOYOTA LANDCRUISER V8 BULLET PROOF	DFS	JTMHVO1J0H4232436	Malahan dukumiintiga lahaanshaha
TOYOTA LANDCRUISER	DFS	UZJ100-0138144	Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo
TOYOTA HILUX PICK UP	DFS	4MROHX8CD6J1384214	Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo
LANDCRUISER V8	DFS	JTMHVO1J4261329	Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo
LANDCRUISER V8	DFS	JTMHVO1JXJ5040179	Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo
LANDCRUISER V8	DFS	JTMHV01J4H4223013	Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo

### Talo soojeedin

Waa in maamulka Xafiiska Madaxweynuhu uu baarayaasha XHG la wadaago gaadiidka hay'adda si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo sannad baariseedka soo aaddan.

Waa in dhammaan gaadiidka Xafiiska Madaxweynaha loo sameeyo dukumiintiga lahaanshiyaha gaadiidka.

### Jawaabta maamulka

*Waan qaadanay talada, waana loo sameynayaa (Title deeds)-ka. (4) Gaari ee aan laheyn dukumiintiga lahaanshiyaha waa loo samaynayaa howshoodana waa la bilaabay, (5) Gaari ee aan lasoo bandhigin waxaa qaatay Madaxweynihii hore, waana la xariiray jawaab ayaan ka sugaynaa.*

## 1.3. KHALADKA BAARISTA SANNADKII HORE

### 1.3.1. Khaladdaadka baarista sannadkii hore ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Xafiiska Madaxweynaha in la fuliyay, qeyb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

Khaladdaadka	Marxaladda
1.2.0 Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha	Lama fulin
1.2.0 Waaxda libka oo aan la dhisin	Lama fulin
1.1.0 Hubinta Gudaha	Waa la fuliyay

## 2. GOLAHA SHACABKA (GSH)

### 2.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

#### 2.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4), ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxy-aabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$4,096,044.78** iyadoon laheyn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah sida uu qabo Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharciga libka Qaranka iyo Qandaraasyada ee 2016.

#### Talo soojeedin

Maamulku waa in uu diyaariyo oo ansixiyaa qorshe sannadeedka wax soo iibsigaa oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee Golaha Shacabka. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaan siiyaa hawlaha ugu muhiimsan ee adeeg bixinta hufan ee sannadka 2023.

#### Jawaabta maamulka

*Maadaama isbadal lagu sameeyay Xafiiska Golaha Shacabka iyo hoggaanka Golaha Shacabka xafiiska Golaha waxa ka go'an in uu sameeyo qorshaha iibka 2023 iyada oo laraacayo Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee sharciga iibka Qaranka 2016.*

#### 2.1.2. Sharciga

Qodobka 58 (1) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa dhigaya in hay'ad kasta wax soo iibsanaysa abuurto Guddi lib Qandaraas oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood iyada oo guddigaas uu dhisayo Sarkaalka Idmansida soo socota:

- Hal (1) sarkaalka sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiga; iyo
- Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda.

61 (1) Hay'ad kasta oo libin waa in ay dhistaa Waax lib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

61 (2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska libka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska libka.

## Khaladka

### A. Waaxda iibka iyo guddiga qiimeynta oo aan dhisneyn

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu sameeyay wax soo iibsasho alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$4,096,044.78**, iyadoo aan dhisin waaxda iibka taas oo ka mas'uul ah in ay sameeyso iibka hay'adda, waxayna arrintaasi lid ku tahay Qodobka 58 (1).

Intaa waxaa dheer, in Sarkaalka Idman uusan dhisin guddiga Qiimeynta Iibka iyo Qandaraasyada; sida uu sharcigu qabo si ay u qiimeeyaan hawlaha iibka ee Golaha Shacabka.

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabka waa in uu dhisaa waaxda iibka sannad maaliyadeedka 2023, magacaabana guddiga qiimeynta si ay u gutaan waajibaadkooda si waafaqsan sharciga.

## Jawaabta maamulka

---

*Waa Lafulin doonaa talo soojeedinta ku aadan (dhisadda waaxda iibka sannad maaliyadeedka 2023, magacaabana guddiga qiimeynta). Wallow ay haddaba gooni u taagan tahay Qaybta Iibka, waxaa kale oo aan ku dadaalaynaa inaan fulino talooyinka Hantidhowrka Qaranka, annagoo ilaalinaynaa ku dhqanka shuruucda dalka.*

---

### 2.1.3. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) & (2) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidan:

69(1) Qandaraaska Iibka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.

69(2) Heshiisyada Qandaraasyada Iibka lama la kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexdo xayeynsinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeernidaamiyaha Sharcigan.

Sidoo kale Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qaddarka ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

## Khaladka

### A. Kala qaybin iib qiimihiisu dhan yahay US \$2,539,698.87

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku ay kala qeybiyeen alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$2,539,698.87** iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xayeynsinta ka qaybgalka tartanka furan. Taas oo lid ku ah Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) & (2) habraac heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay xaddiga lacageed ee lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo ee Sharci Lr 22. Faahfaahinta kala qeybinta iibka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Bilaha	Faahfaahin	Caddadka US \$
GG-018	2225	Jan. - Dec. 2022	Dayactir iyo Hagaajin	\$162,335.00
GG-019	2225	Oct. 2022	Dayactir iyo Hagaajin	\$52,315.52
GG-020	2223	Jan. - Dec. 2022	Shidaal iyo Saliid	\$465,532.00
GG-021	2223	Jan. - Dec. 2022	Shidaal iyo Saliid	\$80,000.00
GG-022	2224	Jan. - Dec. 2022	Agab xafiiseed	\$119,628.00
GG-023	2211	Jan. Feb. Sep. & Oct. 2022	Sahay safar	\$140,547.35
GG-024	2261	Jan. - Nov. 2022	Raashin	\$596,160.00
GG-025	2261	Jan. - Dec. 2022	Raashin	\$603,126.00
GG-026	2261	May, Sep., Oct., Nov. & Dec. 2022	Biyo	\$63,960.00
GG-024	2231	Jan - June	Kiro	\$121,800.00
GG-027	2231	July - Aug. 2022	Kiro	\$134,295.00
<b>Wadarta</b>				<b>\$2,539,698.87</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabku waa inuu u hoggaansamo xaddiga (Thresholds) sida uu sharcigu dhigayo, waana in aysan kala qeybin caddadka wax soo iibsiga ee sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga. Sidaa darteed, waa in mamulka hay'addu u wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda marka ay gaarto xaddiga loogu tala galay.

## Jawaabta maamulka

*Waa Lafulinayaa Talo soojeedinta xaddiga (Thresholds) sannad miisaaniyadka 2023.*

### 2.1.4. Sharciga

Qodobka 19 (1), (a & b) iyo (2) Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

(1) Habraacyada xulashada horudhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- a) Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- b) Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran

(2) Casumaadda xulidda horudhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiya Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaysa ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.



## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo baahin la'aanta adeeg bixiyayaasha laga soo iibiyaa alaabaha iyo adeegga

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu sameeyay wax soo iibsasho xaddigeedu (thresholds) ka sarreeyo \$2,001 kana hooseeyo \$50,000, kaasoo 11 adeeg bixiyayaal loogu oggolaaday in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$2,539,698.87**, iyada oo aan la sameyn xulasho hordhac ah (prequalification); sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg inta aan loo dirin warqadda qiimeynta ee adeeg bixiyayaasha, taasoo lid ku ah Qodobka 19 (1) iyo (2) Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca adeeg bixiyaha	Bilaha	Caddadka US \$	Faahfaahin
GG-018	Jan. - Dec. 2022	\$162,335.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-019	Oct. 2022	\$52,315.52	Maqan xulasho hordhac ah
GG-020	Jan. - Dec. 2022	\$465,532.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-021	Jan. - Dec. 2022	\$80,000.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-022	Jan. - Dec. 2022	\$119,628.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-023	Jan., Feb., Sep. & Oct. 2022	\$140,547.35	Maqan xulasho hordhac ah
GG-024	Jan. - Nov. 2022	\$596,160.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-025	Jan. - Dec. 2022	\$603,126.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-026	May, Sep., Oct., Nov. & Dec. 2022	\$63,960.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-024	Jan. - June 2022	\$121,800.00	Maqan xulasho hordhac ah
GG-027	July - Aug. 2022	\$134,295.00	Maqan xulasho hordhac ah
<b>Wadarta</b>		<b>\$2,539,698.87</b>	

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabku waa in uu sameeyo xulasho hordhac ah (Prequalification) ee adeeg bixiyaha kasta, kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sannad maaliyadeedka 2023.

Waa in la xayeesiiyaa iibka alaabaha, adeegga iyo hawlaha lana sameeyo liiska xulashada hordhaca ah si waafaqsan Qodobka 19aad (1) iyo (2) iyo in la baahiyo liiska sida uu qabo sharciga lana fuliyaa sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Waa lafulin doonaa Talo soojeedintan sannad miisaaniyadka 2023.*

### 2.1.5. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiyaha aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

## Khaladka

### A. Labo adeeg bixiye ayaa la siiyay in ka badan labo madax-xige - US \$2,222,856.43

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu siiyay labo adeeg bixiye midkiiba in ka badan labo madax-xige wadarta qiimahoodu yahay US **\$2,222,856.43** taas oo lid ku ah Habraaca Xakameynta (Commitment Control) shardiga 2<sup>aad</sup> ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta labada adeeg bixiye ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca adeeg bixiyaha	Madax-xige	Caddadka US \$
GG-019	2261	\$448,644.00
GG-019	2225	\$358,763.43
GG-019	2244	\$140,000.00
GG-019	2313	\$419,964.00
GG-024	2261	\$596,160.00
GG-024	2221	\$15,725.00
GG-024	2231	\$243,600.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$2,222,856.43</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabku waa in aanu u oggolaan hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige, waana in ay raacaan Habraaca Xakameynta inta lagu guda jiro xulashada adeeg bixiyaha sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Waa lafulin doonaa Talo soojeedintan sannad miisaaniyadeedka 2023*

### 2.1.6. Sharciga

Habraaca Xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xaddigiisu ka badanyahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

## Khaladka

### A. Wasaaradda Maaliyadda oo aan loo wareejin iib qiimahiisu ka badan yahay ama la egyahay \$50,000.00

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu sameeyay wax soo iibsasho agab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$1,451,930.91** taas oo aan loo wareejin Wasaaradda Maaliyadda maadaama qiimuhu ka badan yahay xaddiga uu dajiyay Habraaca Xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Sidaa darteed, waxa ay xadgudub ku tahay Habraaca Xakameynta. Faahfaahinta ayaa ku xusan jaantuska hoose:

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Bilaha	Caddadka US \$
GG-019	2225	Oct. 2022	\$306,447.91

Magaca Adeeg bixiyaha	Madax-xige	Bilaha	Caddadka US \$
GG-028	2211	Nov. 2022	\$64,000.00
GG-019	2261	May & Oct. 2022	\$448,644.00
GG-024	2231	Oct. 2022	\$121,800.00
GG-019	2313	Dec. 2022	\$419,964.00
GG-029	2313	Nov. 2022	\$91,075.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$1,451,930.91</b>

## Talo soojeedin

Sida uu qabo habraaca xakamaynta (Commitment Control) waa in dhammaan qandaraasyada Golaha Shacabka ee ka badan ama la eg US \$50,000 loo wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

## Jawaabta maamulka

*Waxaan fulinaynaa taladaa aad soo jeediseen annaga oo kaashanayna madaxda Sare ee Golaha Shacabka.*

*Waxaan codsanaynaa in Xafiiska sharafta leh ee hantidhowrka uu gacan naga siiyo fulinta dhaqangelinta Talo soojeedinta, oo haddii loo baahdo la sameeyo in la fiiro habka aan ku bilaownay sddexdii bilood ee la soo dhaafay ee Jan- Feb- iyo march 2023.*

*Ugu danbeyn waxa aan aad ugu mahadcelinaynaa kooxdii baariista ee sameynaysay baariistii Sannadkii tegay ee 2022, sida wanaagsan ee ay shaqadooda u guteen iyo waqtigoodaba.*

## 2.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIGA

### 2.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup> (1) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci L.r 17, 2019 oo sheegaya in dhammaan deeqaha ay Hay'ad Dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka.

## Khaladka

### A. Deeq dhan US \$97,278.00 ayaan lagu darin miisaaniyadda qaranka

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu fuliyay hal (1) mashruuc oo qiimihiisu dhan yahay US \$97,278.00. Sarkaalka Idman ee Golaha Shacabka ma qaadin tillaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in deeqdaas lagu daro miisaaniyadda iyo khasnadda dhexe ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Taasoo liod ku ah sida uu qabo Qodobka 38aad ee sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka. Faahfaahinta ayaa ku xusan shaxda hoose:

Magaca Mashruuca	Magaca de- eqbixiyaha	Ujeeddada mashruuca	Muddada mashruuca	Ku talagalka lacageed US \$	Ku talagalka lacageed US \$	Caddadka lacageed ee la isticmaalay US \$
Mashruuca Taageerada Baarlamanka	UNDP	Xoojinta awoodaha Baarlamanka si ay u sii wadaan geedi-socod- ka dhismaha Dowladnimada	GSH	Ma cadda	\$97,278.00	\$97,278.00
<b>Wadarta</b>					<b>\$97,278.00</b>	<b>\$97,278.00</b>

## Talo soojeedin

Waa in Maamulka Golaha Shacabka uu dhammaan deeqaha hay'addu hesho ku daraa miisaaniyadda DFS laguna maamulo Khasnadda Dhexe ee Dowladda (TSA).

Haddii ay jiraan waxyaabo si gaar ah loogula heshiiyay Hay'adaha Qaramada Midoobay waa in miisaaniyadda DFS lagu caddeeya.

## Jawaabta maamulka

*Fullinta Talo soojeedintan waxay u baahan doontaa in wadahal lagala yeesho deeqbixiyaha sida ugu macquulsan laysu waafajiyo Maamulka maaliyadda Dowladda iyo sharuudaha deeqbixiyaha.*

### 2.2.2. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci L.r 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

(2) Looma ogola hay'ad Dawladeed iyo mid Sharikad/Wakaalad Dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

## Khaladka

### A. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyadda ee heshiis deeq oo dhan US \$97,278.00

Waxaan baarista ku ogaaday in Wasiirka Maaliyaddu aanu daraf ka saxiixin (Co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha taas oo lid ku ah Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

## Talo soojeedin

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee hay'addu gasho uu dhinac ka saxiixo (Co-sign) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Fullinta Talo soojeedintan waxay ubaahan doontaa in wadahadal lagala yeesho deeqbixiyaha sida ugu macqullsan laysu waafajiyo Maamulka maaliyadda Dowladda iyo sharuudaha deeqbixiyaha.*

### 2.2.3. Sharciga

Qodobbada 9aad (7) iyo 42<sup>aad</sup> (3) ee sharci Lr. 17 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019waxa uusheegayaa sida soo socota:

9 (7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

42 (3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.

## Khaladka

### A. Koontooyin bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho iyo ansixin loo haysan

Inta baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Golaha Shacabka uu koonto bangi ka furtay Bangiga Amal koonto lambar (1014710354), iyada oo aan oggolaansho qoraal ah looga haysan Xisaabiyaha Guud sidoo kalena uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Faahfaahinnada koontada ayaa ka muuqda shaxda hoose:

Magaca Bangiga	Koonto Lambar	Lacagta la dhigay US \$	Haraa US \$	Dib loogu celiyay UNDP US \$
GG-030	1014710354	\$80,000.00	\$49,992.00	\$49,992.00

## Talo soojeedin

Waa in maamulka hay'addu uu oggolaansho iyo ansixin ka helo Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangi ee sare ku xusan.

Furitaanka koonto bangi ee sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga waa in lagu sameeyo kaliya markii loo helo oggolaansho iyo ansixin.

## Jawaabta maamulka

*Maamulka hay'addu ma sameyn jawaab qoraal ah.*

## 2.3. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 2.3.1. Sharciga

Dastuurka ku-meel gaarka Cutubka 3<sup>aad</sup> Qodobka 43(2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh.

### 2.3.2. Khaladka

#### A. Dhulka iyo dhismooyinka uu leeyahay Golaha shacabka oo aan lahayn dukumiinti lahaanshiyo ahna mid burbursan

Waxaan baarista ku ogaaday in hal (1) dhul iyo labo (2) dhismo kuwaas oo la sheegay in uu leeyahay Golaha Shacabka balse aan loo hayn warqadaha lahaanshiyaha, halka dhismaha Golaha shacabka uu yahay mid burbursan oo u baahan dayactir, taasoo ka dhigan in aan loo maamulin si wax tar leh. Faafa-hinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Goobta	Meesha uu ka yimid	Nuuca	Faahfaahin
Baarlamaankii hore iyo Beerta Xoriyadda	DFS	Dhul	Malahan dukumentiga Lahaansha
Villa Hargeisa	DFS	Dhismo	Malahan dukumentiga Lahaansha
Xarunta Golaha Shacabka	DFS	Dhismo	Malahan dukumentiga, una baahan

#### Talo soo jeedi

Dhulka iyo dhismaha Golaha Shacabka waa in maamulku u sameeyo dukumiintiyada lahaanshiyaha loona isticmaalaa, si waxtar leh inta lagu guda jiro sannadka 2023.

#### Jawaabta maamulka

*Maamulka Golaha Shacabku isaga oo latashanayo Guddoonka GSH waxa uu diyaar u yahay raadinta-documentiyada lahaanshaha Dhulka, iyo in dib-u-dhis iyo dayactir lagu sameeyo Golaha Shacabka.*

### 2.3.3. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Hannaanka la isku waafaqsan yahay ayaa jidaynaya in hay'adaha dowladdu ay diiwaangaliyaan hantida si waqtiyaysanna u cusbooneysiyaan, iyada oo la diiwaangalinayo macluumaadka sida tariikhda la soo iibiyay, nooca, xaaladda, qiimaha, goobta lagu isticmaalo iyo cidda isticmaasha ama leh.

#### Khaladka

#### A. Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo cusboonaysiin

Maamulka Golaha Shacabka ayaan cusboonaysiin diiwaanka hantida. Waxaa intaas dheer, hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in dhammaan hantida aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number).

#### Talo soo jeedin

Sarkaalka Idman waa in uu sameeyaa diiwaanka hantida loona cusbooneysiya si waqtiyaysan.

Waa in dhammaan hantida ay lahaataa lambarka aqoonsiga hantida (Tag Number) laga billaabo sannadka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta

*Waa Lafulin doona Talo soojeedintan.*

### 2.3.4. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aaddan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihisa.

## Khaladka

### A. Maamulka gaadiidka oo liita

Muddadii baaristu socotay, ayaa waxaa baarayaasha lala wadaagay liiska 3 gaari oo la sheegay in uu leeyahay Golaha Shacabka, in kastoo gaadiidkaas aysan lahayn dukumiintiyada lahaanshiyaha Golaha Shacabka.

Intaa waxaa dheer, in Seddexda gaari aan fursad naloo siin in aan muuqaal ahaan u xaqiijino. Liiska gaadiidka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nooca gaadiidka	Meesha uu ka yimid	Caqaayad nambar	Faahfaahin
TOYOTA LANDCRUISER	DFS	JTMHX01J9M4228504	Gaarigan muuqaal ahaan looma xaqiijin sidoo kalena nalama wadaagin dukumiintiga lahaanshiyahana
TOYOTA LANDCRUISER	DFS	JTMHX01J8M4230020	Gaarigan muuqaal ahaan looma xaqiijin sidoo kalena nalama wadaagin dukumiintiga lahaanshiyahana
TOYOTA LANDCRUISER	DFS	JTMHX01J2L5103059	Gaarigan muuqaal ahaan looma xaqiijin sidoo kalena nalama wadaagin dukumiintiga lahaanshiyahana

## Talo soojeedin

Waa in maamulka Golaha Shacabku uu baaraayasha XHG la wadaagaa gaadiidka hay'adda si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo sannadka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Xafiiska Golaha Shacabku waxa uu u hogaansamayaa habraaca baarista hanti dhawaraha guud sida sharcigu qabo isaga oo lawadaagaya cadadka iyo muuqaalka hantida.*

## 2.4. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

### 2.4.1. Sharciga

Qodobka 42<sup>aad</sup> (4), Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Sharci Lr.17 ayaa dhigaya

(4) Dhammaan dakhliga Dowladda waa in lagu soo xareeyo Xisaabta Khasnadda Mideysan (Consolidated Treasury Account) ee Bangiga Dhexe ugu badnaan hal maalin shaqo gudaheed, marka la soo uruuriyaba.

Qodobka 27<sup>aad</sup> (6) Dhammaan macaamilada ku saabsan qabashada dakhliga iyo bixinta kharashka waa in la mariyaa nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMS) isna waafaqaan warbixin xisaabeedka Bangiga (Bank statement) ee ka timid Bangiga Dhexe.

### Khaladka

#### A. Dakhli la uruuriyay oo dhan US \$315,200.00 ayaa dib loo isticmaalay

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu uruuriyay dakhli dhan US **\$315,200.00** taasoo ka soo xarootay diiwaan-gelinta musharixiinta guddoonka Golaha Shacabka. Lacagtaas oo aan lagu shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda (TSA) ee DFS waxaana loo isticmaalay kharash ahaan, taas oo lid ku ah sida ay dhigayaan Qodobbada 42 (4) iyo 27 (6) ee Sharcig Maareynta Maaliyadda Guud Lr.17. Sida ku cad shaxda hoose:

Taariikhda Lacagta la bixiyay	Cidda la siiyay	Lacagta US \$
21 April, 2022	Guddoonka Baarlamaanka	\$200,000.00
21 April, 2022	Madax-qeybeedka Maamulka iyo Maaliyadda	\$50,000.00
30 April, 2022	Madax-qeybeedka Maamulka iyo Maaliyadda	\$65,200.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$315,200.00</b>

### Talo soojeedin

Waa in maamulka Golaha Shacabka ay ku shubaan dakhliga ay uruuriyaan Xisaabta Khasnadda Mideysan (Consolidated Treasury Account) ee Bangiga Dhexe ugu badnaan hal maalin shaqo gudaheed, markasta oo lacag la uruuriyo.

### Jawaabta maamulka

*iyada oo la ogsoonayahay in Golaha shacabku uu san ku jirin hay'addaha Dhaqaalaha Dowladda uu yahay hay'ad maamul Xafiiska Golaha shacabka waxa uu adeegsanayaa qasnadda midaysan ee dowladda wixii dakhli ah ee soo gala sannad miisaaniyadeedka 2023.*

### 2.4.2. Sharciga

Qodobka 23 (2, C) ee Sharci Lr. 17, Maareynta Maaliyadda Guud, 25 December 2019, ayaa dhigaya in:

(2) Wasiirku waa inuu u gudbiyo Baarlamaanka qabyo qoraalka kabka miisaaniyadda marka;

C) La aburo qondo cusub oo aan horay ugu jirin Miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah ama in la bedelo ujeedada qoondada ee Miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah.



## Khaladka

### A. Bedelidda ujeeddada qoondada ee Miisaaniyadda Qaranka ee asalka ah

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uu isticmaalay lacag dhan US **\$200,000.00** oo ku jirtey madax-xigaha 2261 iyada oo la beddelay ujeeddada qoondada miisaaniyada oo loo beddelay kharashaadka doorashada iyo taageerada abaaraha, kuwaas oo lagu wareejiyay koontooyin gaar ah. Arrintaas oo xad-gudub ku ah Qodobka 23 (2, C) ee Sharci Lr. 17. Intaa waxaa dheer, maamulka ayaa si sharci darro ah u wareejiyay lacag dhan US **\$500,000.00**. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay jaantuska hoose:

Madax-xigaha	faahfaahin	Koonto	Lacagta US \$
2261	Gunnada Guddiga Doorashada	Koonto Bangiga Dhexe. Koonto Lr. 923; kadibna waxaa loo diray Premier Bangi koonto Lr. 05021416001	\$500,000.00
2261	Gunnada Guddiga Doorashada	Koonto Bangiga Dhexe. Koonto Lr. 923	\$100,000.00
2261	Abaaraha	Koonto Bangiga Dhexe. Koonto Lr. 2117-1483	\$100,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$700,000.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabku waa in uu u hoggaansamaa qoondada miisaaniyada asalka ah, oo haddii loo baahdo wax ka bedel lala tashado Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si sifo sax ah loogu wareejiyo qoondada miisaaniyadda meeshii ay lagama maarmaan noqoto.

## Jawaabta maamulka

*Xafiiska Golaha Shacabka waxaa u hogaansamaa habraac maamulka Maaliyadda iyo sida uu qabo sharciga maaliyadda ee dalka, laga bilaabo sannad miisaaniyadeedka 2023.*

### 2.4.3. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adhooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo

- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

## Khaladka

### A. waxa aan la sameyn/dhisin baarista gudaha (internal audit)

Waxaa baarista ku ogaaday in maamulka Golaha Shacabku uusan sameyn baaraha gudaha iyo shaqada baarista gudaha oo waqtiyaysan si dib-u-eegis loogu sameeyo waxqabadka hay'adda gaar ahaan maamulka maaliyadda iyo guud ahaan waxtarka hawlaha hay'adda. Taasoo lid ku ah Qodobka 46 (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Lr. 17.

## Talo soojeedin

Maamulka Golaha Shacabka waa in ay dhisaan waaxda baaraha gudaha si ay u hirgeliyaan hubinta gudaha oo wax-ku-ool ah inta lagu guda-jiro sannad maaliyadeedka 2023.

## Jawaabta maamulka

---

*Waa la tixgelin doonaa Talo soojeedinta*

---

## 2.5. KHALADKA BAARISTA SANNADKII HORE

### 2.5.1. Khaladka baarista sannadkii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Golaaha Shacabka in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin:

Khaladdaadka	Marxaladda
2.1.1. Hubinta Gudaha	Lama fulin
2.1.2. waxa aan la dhisin waaxda baarista gudaha	Lama fulin
2.2.1. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha 2021	Lama fulin
2.3.1. Koonto bangi la furay iyada oo aan oggolaansho iyo ansixin loo haysan	Lama fulin

## 3. XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA (XRW)

### 3.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

#### 3.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4), ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka XRW uu sameeyay wax soo iibsi dhan US **\$10,220,913.70**, iyagoon diyaarin oo aan ansixin qorshe sannadeedka iibka, taasoo lid ku ah Qodobka 27. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyey shaxda hoose:

Madax-xige	Faahfaahin	Lacagta US \$
2261	Kharashaadka guud ee kale ee agabka iyo adeegga	\$4,901,437.77
2225	Hagaajin iyo dayactir	\$437,190.00
2224	Alaabta xafiiska iyo agabyada kale	\$194,236.00
2231	Kiro	\$74,580.00
2223	Saliid iyo shidaal	\$558,600.00
2211	Sahay safar	\$1,865,683.00
2242	Kharash ka latalinta iyo xirfadaha	\$600,000.00
2221	Hawlaha guud	\$214,692.08
3113	Hantida kale ee maguurtada ah	\$1,374,494.85
<b>Wadarta</b>		<b>\$10,220,913.70</b>

#### Talo soojeedin

Sida uu dhigayo Sharciga libka iyo Qandaraasyada qaranka, maamulka hey'addu waa in uu diyaariyaa uuna ansixiyaa qorshe sannadeedka wax soo iibsi oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee Xafiiska.

## Jawaabta maamulka

Sida aan ku wada hadalnay teamka baarista horaantii gudagalka baaritaanka, waxaanu isla fahanay in miisaaniyadda 2022 du ay ka soo daahday bilowga sanadka maadaama wadanka uu ku jiray Doorasho baarlamaani iyo midda madaxwaynaha qaranka.

Sidaas oo ay tahay waxaanu diyaarinay islamarkaana aanu la wadaagnay teamka hanti dhowrka qorsha sanadeedka iibka ee 2022.

Dhamman kharashaadka ka baxsan qorshe howleedka aan idinla wadaagnay waxey ahaayeen kuwa deg deg ah (Emergency) Maadaama XRW uu maamulayay Dooroshoyinka Dalka.

## Jawaabta XHG

Ma jiro qorshe iib saxiixan oo lala wadaagay baarayaasha XHG.

### 3.1.2. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiye aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

## Khaladka

### A. Labo adeeg bixiye ayaa la siiyay in ka badan labo madax-xige qiimahooduna dhan yahay US \$2,500,722.08

Waxaan baarista ku ogaaday in labo qandaraasle midkiiba loo oggolaaday iib ka badan labo (2) madax-xige oo dhan US **\$2,500,722.08**, taasoo xad-gudub ku ah habraaca xakamaynta Xisaabiyaha Guud (Commitment Control) ee xilli maaliyadeedka 2022. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyey jaantuska hoose:

Shirkadda	Ujeeddada heshiiska	Madax-xige & caddadka lacagta la xariirta US \$			Wadarta US \$
GG-031	Agab xafiiseed iyo adeega nadaafadda.	2261	2224	2221	
		\$764,385.00	\$194,236.00	\$14,500.00	\$973,121.00
GG-031	Cunnada iyo adeeg maqaaxi	2261	2225	2241	2221
		\$882,619.00	\$287,190.00	\$200,000.00	\$157,792.00
<b>Wadarta</b>					<b>\$2,500,722.08</b>

## Talo soojeedin

Maamulka XRW waa in uu iibka u fuliyaa si waafaqsan habraaca xakamaynta (Commitment Control) ee Xisaabiyaha Guud inta lagu guda jiro sannadka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

Xafiiska Ra'isul wasaaraha waxaa uu xilweyn iska saaraa dhowrista nidaamka xakamaynta (commitment control), sababaha keenay in hal shirkad in qandaraas ka qaadato wax ka badan labo madax waxaa kamid ah:

1. Shirkadaha oo heysta ruqsad Adeega Guud ah (General Trading Service), taas oo ogalaaneysa in ay qaban karaan adeegyo kala duwan.
2. Maadaama XRW uu leeyahay xasaasiyad amni isla markaana loo baahanyahay feejignaan dheeri ah, shirkadaha aad soo xusteen waxaa loogu maarmi wayay khibrada ay u leeyihiin wada la shaeynta XRW iyo kalsoonida ay ka heystaan.
3. Hadaba XRW waxuu markale ku celinayaa inuu dhowri doono ilaalinta habraacyada xakamaynta (Commitment Control) ka, taasoo ka ilaalin doonto in khalad noocaas ah uu soo noqdo sanadka 2023.

### 3.1.3. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badan yahay qiimo ahaan US \$50,000.00 ama la'eg waa in lagala tashado qeybta iibka ee Wasaaradda Maaliyadda si ay u marsiiso habraaca iibka.

## Khaladka

### A. Wasaaradda Maaliyadda oo aan loo wareejin iib qimihisu ka badan yahay ama la'eg yahay \$50,000

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Xafiiska Ra'iisulwasaaraha uu sameeyay wax soo iibsasho alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$1,989,158.00** taas oo aan loo wareejin Wasaaradda Maaliyadda maadaama qiimuhu ka badan yahay xaddiga uu dajiyay Habraaca Xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Sidaa darteed, arrintaas waxa ay xadgudub ku tahay Habraaca Xakameynta. Faahfaahinta ayaa ku xusan jaantuska hoose:

Madax-xige	Magaca qandaraaslaha	Lacagta US \$
2261	GG-033	\$57,750.00
	GG-033	\$80,493.00
	GG-034	\$50,400.00
	GG-034	\$53,200.00
	GG-035	\$223,975.00
	GG-036	\$54,000.00
	GG-036	\$58,000.00
	GG-037	\$157,500.00
	GG-038	\$300,000.00
	GG-039	\$57,750.00
	GG-040	\$86,090.00
	GG-031	\$60,000.00
	<b>Wadar dhexe</b>	

Madax-xige	Magaca qandaraaslaha	Lacagta US \$
2241	GG-034	\$50,000.00
	GG-034	\$50,000.00
	GG-034	\$50,000.00
	GG-034	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
	GG-035	\$50,000.00
<b>Wadar dhexe</b>		<b>\$600,000.00</b>
2225	GG-036	\$150,000.00
<b>Wadarta Guud</b>		<b>\$1,989,158.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Ra'iisulwasaaruhu waa in uu raaco habraaca xakamaynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, sidaas darteed, dhammaan qandaraasyada XRW ee ka badan ama la eg US \$50,000, waa in loo wareejiyo ama lagala tashado Wasaaradda Maaliyadda sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Xafiiska Ra'isul Wasaarahawaxa uucaddeynayaa dhamaan habraaca aan u marnay kharashaadkaas uu ogolaa nsho ka helay waaxda iibka (Procurement Directorate) ee wasaarada maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud, Dhamaan hay'adaha howsha qabtay waxay soo buuxiyeen shuruudaha ugu hooseeya (Minimum requirements) oo u ka doonayeen commitment controlka.*

*Madaama lagu jirey xili doorasho oo kala guur ah, sidoo kale Ra'isulwasaaraha uu ku soo saaray wareegto habraac ku xadidnaa fududaynta bixinta kharashyada doorashada xiliga kala guurka. (Procurement Waiver).*

*Hadaba, Kharashaadka aan ku bixin duruufaha aan soo sheegnay, waxa uu xafiisku maray habraac saxda ah ee iibka qaranka.*

*Xoghayaha Joogtada Xafiiska Ra'isul wasaaraha waxaa uu dib u qaabayn ku sameeyey waaxda iibka (Procurement).*

*Xoghayaha waxaa uu siiyey tilmaamo cadcad taasoo lagula xisaabtamayo Maamulka waaxda iibka in aan la baalmarin sharciga xakamaynta (Commitment Control).*

### 3.1.4. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) & (2) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidan:

69(1) Qandaraaska Iibka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal

furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.

69(2) Heshiisyada Qandaraasyada libka lama la kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexdo xayeyinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan

## Khaladka

### A. Kala qaybin iib qiimihiisu dhan yahay US \$4,288,538.38

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka XRW ay kala qeybiyeen alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US \$4,288,532.35 iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xayeyinta ka qaybgalka tartanka furan. Taas oo lid ku ah hannaanka looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay xaddiga (US \$ 50,000) lacageed ee lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Qodobka 69aad (1 & 2) ee Sharci Lr 22. Faahfaahinta kala qeybinta iibka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xige	Magaca qandaraaslaha	Wadarta la kala qeybiyay US \$
2261	GG-037, GG-038, GG-038, GG-040, GG-031, GG-041, GG-010, GG-042, GG-037 and GG-043	\$2,019,981.27
2225	GG-032	\$287,190.00
2224	GG-031	\$194,236.00
2211	GG-032, GG-044 and GG-031	\$939,253.00
2231	GG-045, GG-046, Shaqsi-001& Shaqsi-002	\$74,580.00
2223	GG-039 & GG-021	\$558,600.00
2221	GG-047, GG-048, GG-049, GG-050, & GG-051	\$214,692.08
<b>Wadarta</b>		<b>\$4,288,532.35</b>

## Talo soojeedin

Maamulka XRW waa inuu u hoggaansamo xaddiga (Thresholds) sida uu sharcigu dhigayo, waana in aysan kala qeybin caddadka wax soo iibsiga ee sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga, iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xayeyinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay xaddiga (US \$ 50,000).

## Jawaabta maamulka

*Waxaanu cadeynaynaa in dhamaan shaxda kor ku xusan ay mareen hannaanka xakamaynta (Commitment Control).*

*Maadaama Sanadkii 2022 uu ahaa sanad Doorosho oo uu Xafiiska RW Masuul ka ahaa Qabashada Dooroshada dalka ka dhaceysay Waxa uu Xafiiska RW uu ka dalbi jiray Wasaaradda Maaliyadda Dalabka Kowaad Ee Kharashk Foomka Kharash bixinta (F.16), Kadibna marka la gaaro Payment Voucher (F.3) Shirkadaha Heshiiska kula jiray Qabashada Doorshada sida ay kharashka ay u kala leeyihiin ayaa loo siin jiray mana jirin wax jajabin lacageed shirkad walba kharashka ay laheyd.*

*Hadaba, waxaanu ku dadaali doonaa inta lagu gudo jiro sanadkaan 2023 aysan dhicin wax u eg baalmarid. Adinkoo ku mahadsan Talo soojeedinta baraarujinta inoo ah.*



## 3.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIGA

### 3.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup>(1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci Lr 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

Qodobka 38<sup>aad</sup> (1). Dhammaan deeqaha ay Hay'ad Dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka.

Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) Looma oggola hay'ad Dawladeed iyo mid Sharikad/Wakaalad Dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

### Khaladka

#### A. Wadar lacageed oo dhan US \$2,417,531.00 ayaan lagu darin miisaaniyadda

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in XRW uu helay sannadihii 2022 deeq lacageed oo dhan US \$2,417,531.00. Si kastaba ha ahaatee, Sarkaalka Idman ayaan qaadin tilaabbooyinkii ku habboona ee lagu hubinayo in deeqaha lagu daro miisaaniyadda iyo khasnadda dhexe ee Dowladda Federaalka ah ee Somaaliya. Faahfaahinnadda ayaa ka muuqda shaxda hoose:

Magaca Mashruuca	Magaca deeq bixiyaha	Muddada heshiiska	Miisaaniyadda la helay US \$	Wadarta la isticmaalay US \$
Security Sector Reform Initiation Plan (SSR-IP)	UNDP	Jan. - June 2022	\$102,840.00	\$102,840.00
Supporting the Political Transition in Somalia (SPTS)	UNDP	Jan. - Dec. 2022	\$1,085,840.00	\$1,085,840.00
Elections in the Federal Republic of Somalia	UNDP	Jan. - April 2022	\$929,351.00	\$929,351.00
Social Sector	UNICEF	Jan. - Dec. 2022	\$299,500.00	\$194,700.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$2,417,531.00</b>	<b>\$2,312,731.00</b>

#### B. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyada ee heshiis deeq

Waxaan baarista ku ogaaday in Wasiirka Maaliyaddu aanu dhinac ka saxiixin (Co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha taas oo lid ku ah Qodobka 38aad (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Sharci Lr.17.

### Talo soojeedin

Waa in maamulka XRW uu dhammaan deeqaha xafiiska helo ku daro miisaaniyadda DFS laguna maamullo Khasnadda Middaysan (TSA).

Hadii ay jiraan waxyaabo si gaar ah loogula heshiiday hay'adaha Hay'adaha Qaramada Midoobay waa in dukumiintiyada heshiisyada iyo miisaaniyadda DFS lagu caddeeyo.

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee hay'addu gasho uu dhinac (Co-sign) ka saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Dhammaan taageerada ka timaada Hey'adaha UN ka ma isticmaalaan nidaamka maaliyadeed ee dalka. Wasaaradda Maaliyadda iyo UN ka ayaa waxaa u socda wada hadal in laga gaaro heshiis sidii dhammaan deeqaha UN ka loo marsiin lahaa sanad xisaabeedka misaaniyadda dalka. Sidaas awgeed, Xafiiska RW iyo UN ka waxaa ay kala saxiixdaan LoA, waxaana UN ka ay sameeyaan baaris mashruuc (Project Audit).*

*Xafiiska RW waa uu kala hadlay UN KA in ay isticmaalaan miisaaniyadda dalka, balse kuma qasbi karno illaa la helo heshiis la fuliyo ee labada dhinac. Tani ayaa ka mid ah caqabadaha guud uu wajahayo dalka ee dhanka hannaanka maaliyadda.*

### 3.2.2. Sharciga

Qodobadda Sharci 9 (7) iyo 42 (3) ee sharci L.r 17 Maamulka iyo Maareynta 2019 waxa uu sheegayaa sida soo socota:

9 (7), Wasiirka Maaliyaddawaxa uuansaxi doonaa furitaanka xisaab bangi ee hay'addaha dowladda  
42 (3), Looma furi doono Xisaab bangi ha ahaato mid dalka gudahiisa ah ama dibeddiisa Hay'adaha Dowladda iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud.

## Khaladka

### A. Koonto xisaab bangi oo la furey, ansixin iyo oggolaansho la'aan

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka XRW ay fureen oo ay howlgaliyeen Seddex (3) koonto xisaab, oo laga kala furay International Bank of Somalia (IBS), iyo Dahabshiil Bank International (DBI) iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Sida ka muuqata shaxda hoose:

Magaca bangiga	Koonto Lr.	Lacagta la dhigay US \$	Haraaga xiisaabta US \$
IBS	0040015010301840025	\$10,900.00	\$0.63
IBS	0040015010301840011	\$11,319.00	\$23.00
DBI	104109386	\$194,700.00	\$30.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$216,919.00</b>	<b>\$53.63</b>

## Talo soojeedin

Sannadka 2023 iyo sannadaha xiga, Sarkaalka Idman ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waa in uu oggolaanshiyo ka helo Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda si uu u furo koonto xisaab bangi.

## Jawaabta maamulka

*Sidaan hore idiin la wadaagnay dhamman Xisaabaadka Bankiga dahabshil waa la xiray.*

*Xisaabaadka Bankiga IBS Bank Lama Xiri Karo sababtoo ah waxaa jira duruufo gooni ah sida wax iibsiga online ka ah ee Xafiiska sida (Media & Digital Online subscriptions) Waxaana la wargeliyaa Xisaabiyaha Guud Ee Qaranka.*

### 3.3. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

#### 3.3.1. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aadan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa.

#### Khaladka

##### A. Maamulka gaadiidka oo liita

Muddadii lagu gudajiray baarista ayaa waxaa kooxda baarayaasha lala wadaagay liiska gaadiid la sheegay in uu leeyahay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha (XRW), in kastoo gaadiidkaas aysan wadan dukumiintyo ka soo baxay nootaayo oo muujinaya kala wareejinta lahaanshiyaha ee iibiyaha iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo iibsadaha ahaa.

Intaa waxaa dheer, afar (4) gaari ayaa lagu diiwaangaliyay magaca Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha kuwaas oo ka maqan xafiiska, lamana keenin si muuqaal ahaan loo xaqiijiyo. Faafaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nooca Gaadiidka	Cidda gaday	Taargo Lr.	Lr. Caqaayadda	Faahfaahin
TOYOTA V8	FGS	N/A	JTMHV01JOJ4262770	Gaadiidkan ma lahayn Taargo Lr. iyo Buuga Lahaanshiyaha oo ku diiwangashan Magaca Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.
TOYOTA V8	FGS	N/A	JTMHX01JOL5103383	
TOYOTA V8	FGS	N/A	JTMHX01JXM4224560	
TOYOTA Hilux Proof	FGS	N/A	MROBX8CDXN2774285	
Toyota Hilux	FGS	0245 GD	MROFR22G3E0723906	
Toyota Surf	FGS	AI 5644	TRN2-15-0004993	
Toyota Surf	FGS	AH5375	TRN2-15-0018880	
Toyota Hilux Proof	FGS	0248 GD	MROHX8CD2G0895367	Gaadiidkan lama xaqiijin muuqaal ahaan jiritaankooda intii lagu guda jirey baarista
Toyota Hilux Proof	FGS	0244 GD	MROKX8CD8J1903981	
Toyota Hilux	FGS	0183 GD	MROHX8CD0L0937741	

#### Talo soojeedin

Dhamaan gaadiidka waa in loo sameeyaa buugga lahaanshiyaha laguna diiwaan galiyo magaca Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Maamulka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waa in uu soo celiyaa dhamaan gaadiidka maqan inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka 2023.

## Jawaabta Maamulka

*Gaadiidkan aan laheyn Taargo Lr. iyo Buuga Lahaanshiyaha oo ku diiwangashan Magaca Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, waxaana socda hanaanki loogu sameyn lahaa taarkada iyo Buuga Lahaanshaha Gaariga.*

*Dhamman Gaadiidka kale ee aad soo xusteena, shaqsiyaadka wato oo xafiiska ka maqnaa awgeed ayaa loo arki wayay inta baaristu socotay balse waa la heli karaa xili kasta oo loo baahdo.*

### 3.4. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

#### HUBINTA GUDAHA

##### 3.4.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adhooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyaasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

#### Khaladka

##### A. hubinta gudaha oo liidata

Intii lagu gudda jiro baarista, waxa aan ogaaday in hubinta gudaha ee XRW ay liidato maadaama aysan Waaxda Baarista Gudaha sameyn baarista gudaha soona saarin warbixin. Sida uu qabo Qodobka 46<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Sharci Lr. 17.

##### Talo soojeedin

Maamulka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waa in ay ka dhigaan waaxda baarista gudaha mid wax ku ool ah oo shaqeyneysa inta lagu gudajiro sanada 2023.

#### Jawaabta maamulka

*Hannaanka hubinta gudaha (Internal control system) ee Xafiiska waa uu dhisan yahay waxaana lagu tala jiraa sarkaal ku shaqeeya.*

## 3.5. MARXALADDA BAARISTII SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 3.5.1. Khaladdaadka baarista sannadihii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ee la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin 2021;

Khaladdaadka	Marxaladda
4.2.1. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha	wali lama fulin
4.2.2. Maqnaanshaha u hoggaansanaanta xaddiga wax soo iibsiga	wali lama fulin
4.2.3. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangelin Xafiiska Hanti Dhowrka Guud	wali lama fulin
4.3.1. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita	wali lama fulin
4.4.1. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda	wali lama fulin
4.5.1. Deeqaha dibadda oo aan lagu darin Nidaamka maaliyadeed ee SFMIS.	wali lama fulin

## 4. WASAARADDA MAALIYADDA (WM)

### 4.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

#### 4.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee libka Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska iibsiga-waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$6,399,836,00**, iyada oo aan laheyn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga libka Qaranka 2016. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
2211	Kharashaadka Safarka iyo Shirarka	\$1,231,056.00
2221	Hawlaha Guud	\$654,398.00
2223	Shidaalka iyo Saliida	\$272,769.00
2224	Agabka iyo Alaabaha	\$998,473.00
2225	Dayactirka iyo Hagaajinta	\$298,719.00
2231	Kirada	\$204,715.00
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	\$1,636,713.00
2261	Kharashyada Guud Agabka iyo Adeegga Kale	\$1,102,993.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$6,399,836.00</b>

#### Talo soojeedin

Sida uu dhigayo Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka, maamulka Wasaaradda waa in uu maga-caabo guddiga wax soo iibsiga si ay u diyaariyaan qorshe sannadeedka 2023 iyo sanadaha xiga. Qorshe sannadeedku waa in uu ku saleysanaadaa miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay, mudnaantana siiyaa hawlaha ugu muhiimsan ee adeeg bixinta hufan.

#### Jawaabta maamulka

*Iyadoo ay jiraan darufo kala duwan oo adag taas oo aanan kuu ogolaaneyn in qiyaasta saxda ah ee iibka sanadki aad hesho, taas oo sabab u ah inaad ogaato baahida saxda ah ee qeybaha kala duwan ee baaxadda weyn oo ay Wasaaraddu ku shaqeeeyso hadii ay ahaan laheyd gudaha & banaanka Wasaaradda, hase yeeshee qandaraasle kastawaxa uuleeyahay heshiis u gaar ah oo laga diiwaan geliyay Hantidhowrka guud ee Qaranka, heshiiskaas oo aan ka baxsaneyn xeyndaabka dukaameysiga \$2001-\$50,000.*

## 4.1.2. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1 & 2) ee Sharci Lr. 22 ee libka Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

69(1) Qandaraaska libka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.

69 (2) Heshiisyada Qandaraasyada libka lama kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeeridaamiyaha Sharcigan.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xayeysiin hufan ee iibka agabka iyo adeegga

Intii baaristu socotay, ayaa waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu ay soo iibiyeen alaab iyo adeeg qiima ahaan dhan US **\$1,256,026.47** xayeysiin la'aan. Taasoo xadgudub ku ah Qodobka 69 (1) ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka. Faahfaahinta shaxda hoose ayaa lagu muujiyay:

Magaca shirkadda	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-055	libinta gaari dhagax ah (Wasiirka Maaliyadda)	\$180,000.00
GG-055	libinta gaari dhagax ah (Wasiirka Ku-xigeenka Maaliyadda)	\$76,000.00
GG-055	libinta gaari dhagax ah (Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo ku-xigeennadiisa)	\$420,000.00
GG-055	libinta gaari TOYOTA ah (Maareeyaha Amniga Garoonka Aaden Cadde)	\$80,000.00
GG-055	libinta gaari dhagax ah (Agasimaha Garoonka Diyaaraaha Aadan Cadde)	\$125,000.00
GG-056	libinta Matoorka Madaxtooyadda	\$76,710.00
GG-057	libinta Agab hubin iyo Baarid Madaxtooyadda Soomaaliyeed.	\$72,576.47
GG-139	Dayactirka Guriga Hooyooyinka	\$105,740.00
GG-140	libinta gaari dhagax ah (Gudd. Ku-xigeenka Aqalka Sare)	\$120,000.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$1,256,026.47</b>

### B. Kala qaybin iib qiimihiisu dhan yahay US \$291,191.60

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyadda ay kala qeybiyeen alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$291,191.60** iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimahoodu ka badan yahay xaddiga lacageed ee lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Qodobka 69<sup>aad</sup> (1 & 2) ee Sharci Lr 22. Faahfaahinta kala qeybinta iibka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Shirkadda	Nuuca agabka	Lacagta US \$	Faahfaahin
GG-058	Agab xafiiseed	\$167,608.50	U kala qaybinta qaybo yaryar oo kala duwan si looga fogaado xadka (thresholds) lana siiyey qandaraaslayaal isku mid ah.
GG-059	Agab xafiiseed	\$123,583.10	
<b>Wadarta</b>		<b>\$291,191.60</b>	

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa in uu sameyaa xayeesiin tartan ka qaybgal furan iyo mid caalami ah meeshii ku habboon si loo xaqiijiyo inay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma.

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa in aysan kala qaybin qandaraasyada si looga fogaado tartan furan, Talo soojeedintan waa in la fuliyaa inta lagu gudda jiro sannadka 2023 iyo sanadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Jawaab: Daruufaha jiro oo ay ku shaqeyso DFS uma saamaxeyso gawaarida dhagaxa ah ee hadda dalkeyna looga isticmaalo ilaalinta amniga madaxdeyna in si sahal ah looga heli karo vendorada ka shaqeeya gawaaridaas, waxaana sabab u ah:*

*Ku kalsoonaashaha amniga gawaaridaas*

*Qiimaha gawaarida oo aad u sareeya isla markaana ay adag tahay in vendor weliba kugu siiyo si fudud oo amaah ah taas oo ay awood u leeyihiin ineey sameeyaan vendorada qaar oo ay lacagta damaanadaas qadayaan isla madaxda loo iibinaayo.*

*Inta badan kharashaadka ku baxa gaadiidka & adeegga kale ee lacagaha badan ku baxa waxay nooga yimaadaan hay'adaha kale ee dowladda oo naga soo dalbado in laga bixiyo kharashkaas oo wata faahfaahin dhameystirana sida: nuuca waxa la iibinaayo, cida laga iibinaayo & qiimaha la siinaayo iyadoo ay la socdaan codsi & amar wada jira.*

*Kala qeybinta qandaraasyada waxaa sababaya daruufaha qandaraaslayaasha ay kula shaqeeyaan Dowladda Soomaaliya taas oo ah inla siiyo qandaraasle walba damaanad shakhsiyadeed oo buuxda oo ku aadan cidda qaadeyso alaabtaas, hadii la waayo ama ay dib u dhacdo xiligii lagu bixin lahaa lacagtaas.*

*Qandaraasle walbawaxa uuleeyahay xad isaga u gaar ah oo uu ugu talo galay deynta uu bixinaayo inta ay la egtahay si uu uga badbaado luminta ganacsigiisa hadii la waayo lacagtaas.*

*Haddaba, taas ayaa sababeysa in Wasaaradda ay adeeg isku mid ah kasoo qaadato qandaraaslayaal kala duwan oo ay horay u marsiisay nidaamka iibka, si aysan uga joogsan adeegga ay u baahan yihiin xafiisyada kala duwan oo aysan gaabis ugu imaan habsami u socodka shaqada ay u heyso shacabka & dowladda Soomaaliyeed, sida uruurinta dakhliga, socodsiinta hawlaha kale ee Wasaaradda oo aad u balaaran iyadoo wasaaraddu ku shaqeyso saddex dhismo oo waa weyn, degmooyinka Gobolka Banaadir oo dhan & xarumaha hay'adaha ku shaqada leh qabashada dakhliga dowladda, goobahaas oo looga baahan yahay qalab lagu socod siiyo shaqada ka socoto.*



### 4.1.3. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidaan:

19 (1) Habraacyada xulashada horudhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqoonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- a) Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- b) Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaaran

19 (2) Casumaadda xulidda horudhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiyaa Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan tilmaamaha Maamulka.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo faafinta tartameyasha iibka agabka, iyo adeegga

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu ay sameeyeen iib xad-digiisu (thresholds) ka sarreeyo \$2,001 kana hooseeyo \$50,000, kaasoo 14 adeeg bixiyayaal loo oggolaa-day in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$2,291,329.37**, iyada oo aan la sameyn xulasho hordhac ah (prequalification) sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg inta aan loo dirin warqadda qiimeynta ee adeeg bixiyayaasha. Arrintaas ayaa lid ku ah Qodobka 19. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca shirkadda	Bilaha	Lacagta US \$
GG-060	12 Bilood	\$392085.00
GG-061	10 Bilood	\$151,335.80
GG-062	1 Bil	149,286.47
GG-063	9 Bilood	\$232,091.00
GG-064	3 Bilood	\$66,067.00
GG-065	7 Bilood	\$89,460.00
GG-066	5 Bilood	\$219,731.00
GG-067	4 Bilood	\$268032.10
GG-068	1 Bil	\$9,000.00
GG-069	12 Bilood	\$281,164.00
GG-070	1 Bil	\$52,800.00
GG-071	12 Bilood	\$285,840.00
GG-072	2 Bilood	\$73,677.00
GG-073	1 Bil	\$20,760.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$2,291,329.37</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa in uu sameeyo xulasho hordhac ah (prequalification) adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeya US \$50,000 inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Waxaa jira habraac ay marsiiso Wasaaradda Maaliyadda qandaraaslayaasha bixiya adeegga kala duwan ee bilaha ah kaas oo lagu magacaabo Commitment Control & Procurement iyadoo la raacaayo sharciga wax soo iibsiga ee ku dhax jira hannaanka SFMIS.*

*Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah in kharash walba oo la siinaayo qandaraasle la marsiiyo habraaca iibka, hadii ay dhici weyso in uu mari waayo qandaraaslaha habraaca iibka uusan heli doonin wax lacag ah, sidaa daraadeed, waxaa waajib ah inla marsiiyo qandaraasle walba shuruudaha iibka si looga hortago gaabis ku yimaado habsami u socodka nidaamka maaliyadeed ee dalka u yaal.*

**FG:** *qandaraasle kasta waxa aan la galnaa heshiis gaar ah oo sanadle ah iyadoo laga soo diiwaab geliyo hantidhowrka guud dibna loo qiimeeyo bil walba si loo ogaado inuu kasoo baxay heshiiskii lala galay laguna hubinaayo bixinta adeegyadi lagula balamay, iyadoo heshiiskan uusan ka baxsanayn xeendaabka iibsiga una dhaxeeyo qiimo lacageed gaaraya \$2001-\$50,000.*

## 4.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 4.2.1. Sharciga

Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliyada, Cutubkiisa Saddexaad: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka, Qodobkisa 43<sup>aad</sup>. Dhulka (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, wax-soo-saar waarana leh.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha dukumintiyada lahaanshiyaha

Waxaan baarista ku ogaaday hal (7) dhul iyo boqol soddon iyo seddex (133) dhismo oo la sheegay in ay leedahay Wasaaradda Maaliyadda balse aan loo hayn warqaaha lahaanshiyaha, taasoo ka dhigan in aan loo maamulin si wax tar leh. Faafahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca hantida	Tirada	Nuuca hantida	Faahfaahin
Bacadle Hamar-Weyne	1	Suuq	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Xafis	17	Dhisme	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Guryo/Xafis	78	Dhisme	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Guryo	9	Dhisme	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Furdo	20	Dhisme iyo dhulal	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Dhulal banana	7	Dhulal	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Garoon	7	Dhisme iyo dhulal	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
Baqaar	1	Dhisme	Ma jiro dukumintiga lahaanshiyaha
<b>Wadarta</b>	<b>140</b>		

### Talo soojeedin

Dhulka iyo dhismayaasha Wasaaradda Maaliyadda waa in loo sameeyo dukumiintiyada lahaanshiyaha loona isticmaalaa, si waxtar iyo hab waara leh inta lagu gudda jiro sannad maaliyadeedka 2023.

### Jawaabta maamulka

*Waxda Hantida Qaranka ee wasaaradda Maaliyadda Waxa ay si Xog ah u diiwaangelisay Hantida Maguur-tada sida; Nooca Hantida, Goobta, Cidda leh iyo xaaladda ay ku sugantahay.*

*Sidaas awgeed, WM waxa ay Qorsheyneysaa dhameystirka Dhammaan Macluumaadka Hantida Maguur-tada sida Qiimaha iyo Lahaanshiyaha Hantida Maguurtada ah.*

### 4.2.2. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Hannaanka la isku waafaqsan yahay ayaa jidaynaya in maamulka hay'adaha dowladdu ay sameeyaan diiwaangalinta hantida oo leh xilli joogta ah oo la cusboonaysiiyo, waa in macluumaadka la diiwaangalinayo uu noqda sida nooca hantida, xaaladda, qiimaha, goobta lagu isticmaalo, cidda mas'uulka uga ah iyo wixi la mid ah.

## Khaladka

### A. Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo cusboonaysiin

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyadda aysan cusboonaysiin diiwaanka hantida. Waxaa intaas dheer, hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in qaar ka mid ah hantida aysan lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number).

### B. Maqnaanshaha dukumiintiga lahaanshaha gaadiidka

Muddadii lagu gudajiray baarista ayaa waxaa kooxda baarayaasha lala wadaagay liis gaadiid oo la sheegay inay leedahay Wasaaradda Maaliyadda, inkastoo gaadiidkaas dukumitiigiisa lahaanshiyaha ee Wasaaradda Maaliyadda aan baarista lala wadaagin. Dhammaan gaadiidka Wasaaraddu ma lahan taargada Gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda. Liiska gaadiidka ka eeg shaxda hoose:

Nuuca gaadiidka	Caqaayad lambar	Faahfaahin
TOYOTA Landcruiser, (Abdi bile)	JTELV71J007401162	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Land Cruiser	JTGE73J5F9016523	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROHB8CD2G0471444	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser (B/Broof)	JTMHV01J6H5038746	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser (B/Broof)	JTMHV09J7C4084573	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up	MROHB8CD0G0472138	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up	MRODB9CD6L5143283	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up	MROFR22G9E0718144	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up (Bullet proof)	MRODB9CDXM5150948	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser	MRODX9CD2L2638602	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser	JTEBX9FJXKK312838	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Noah 4wd	SR50-0093919	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROHB8CD2C0600234	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROBB9CD7L5147066	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROBB9CD3L5147047	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROHS8CD900722143	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.

Nuuca gaadiidka	Caqaayad lambar	Faahfaahin
TOYOTA Hilux	MROFR2291CO74931	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROHX8C-D5H0920036	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	FR2201C067	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Fortuner	MR1DX8FS5G0003648	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Carib	AE115-0053114	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA PRADO	JTEBX9FJ9DK112570	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA PRADO	TRJ150-0001067	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROBB9CD8L5146850	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up (Bullet proof)	MR0HX8CD2G0897703	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Revo4	MR0HA3CDX00713232	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up	MROFR22GXF0739442	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux (2020) Pick Up	MR0DB9CD8L5147058	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux Pick Up (Bullet Proof)	MROBX8CD4N2843391	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser Prado	JTEJU9FJXBK033524	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Hilux	MROHB8CDXG0471014	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.
TOYOTA Landcruiser (Bullet Proof)	JTMHX01J7L5103333	Ma jiro taargada gaadiidka Dowladda (GD) iyo buugaagta lahaanshiyaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda.

## Talo soo jeedin

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa inuu si joogto ah u cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida inta lagu guda jiro sannadka 2023.

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa inuu u sameeyso gaadiidka wasaaradu leedahay buugaagta lahaanshiyaha iyo taargada gaadiidka Dowladda (GD).

## Jawaabta maamulka

*Waaxda Hantida Qaranka waxa ay si joogta ah u cusbooneysiisaa Dhammaan Hantida guurtada (Gaadiidka iyo Agab xafiiseedka) kaas oo leh Summad (Tag Number) taxane ah iyada oo aan tayeyneyno Tayada Summada Hantida guurtada (Tag Number).*

*Si lamid ah, Waaxdu waxa ay ku guda jirtaa Dhameystirka Sugidda Mulkiyadda Gaadiidka Dowladda.*

### 4.2.3. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Hannaanka la isku-waafaqsan yahay waxa uu qabaa in maamulka hey'addu uu sameeyo siyaasadda iyo habraca lagu maaraynayo hantida si loo ilaaliyo hantida dadweynaha iyadoo la fulinayo baarista gudaha hay'adda, sida uu qabo ISSAIs 5260.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha siyaasadda maamulka hantida

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu uusan lahayn habraac iyo siyaasad lagu maamulo hantida sida uu qabo hannaanka la isku-waafaqsan yahay.

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waa inuu diyaariyaa siyaasad iyo hanaan lagu maamulo dhammaan hantida Qaranka inta lagu guda jiro sannadkan 2023.

## Jawaabta maamulka

*Waxaa heer gabogabo ah maraya dhameystirka iyo ansixinta siyaasadda Maamulka Hantida qaranka iyadoo aan rajeyno in la dhaqangeliyo kahor rubaca Seddexaad ee sanadkaan.*

### 4.2.4. Hannaanka la isku-waafaqsan yahay

Dhamaan hantida dowladda ee duuga ah iyo midda aan la isticmaalin waa in aan la xaraashin. Marka la doonayo in la xaraasho waa in loo maraa hanaan ay masuuliyad ku dheehantahay si waxtarka hantida iyo qiimaha dhaqan ka baxa ay u noqdaan kuwo isu dhigmi kara.

## Khaladka

### A. Hanti maqan

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan ka codsannay maamulka wasaaradda Maaliyadda in ay keenaan liiska hantida wasaaradda. Intaa kadib, waxa aan ku ogaanay hubinta muuqaaleed in ay maqanyihiin qaar ka mid ah. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nuuca	Aqoonsiga	S/Lr.	Diiwaanka Hantida (2020/22)	Faahfaahin
<b>Waaxda Shaqaalaha</b>				
Kumbutar (Desktop HP)	MOF/00270	MP15P7QL	2020	Maqan
Kumbutar (Desktop HP)	MOF/00289	V8P48AA#ABAA	2020	Maqan
Kumbultar (Desktop HP)	MOF/00290	8CC6441KF9	2020	Maqan
Kumbutar (Desktop HP)	MOF/00291	8CC6431HLO	2020	Maqan
<b>Xafiiska Agasimaha Guud</b>				
Kumbutar (Desktop HP)	MOF/0388	8CQ7903C1	2020	Maqan
Kumbutar (Desktop Lenovo)	MOF/0389	SIHO5KPS	2020	Maqan
Kumbutar (Desktop HP)	MOF0392	6CM41725MS	2020	Maqan
<b>Waaxda "ICT"</b>				
SWICH Optical	MOF 0387	98FAT26451/001	2020	Maqan
<b>Waaxada Baarista Gudaha</b>				
Birintar (Printer Epson)	MOF 0300		2020	Maqan

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaraddu waa inuu soo celiyaa hantida ka maqan Wasaaradda inta lagu gudajiro sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Majiraan Qalab xafiiseed si khaldan kumaqan marka laga reebo Agab xafiiseed Dhaqan kabax noqday.*

*F.G: Agabyada Qaarkood ee aad xusteen waxay yaaliin Xafiisyada WM.*

## Jawaabta XHG

Caddeymaha la soo wadaaga XHG.

### 4.3. KHALADKA BAARISTA SANNADKII HORE

#### 4.3.1. Khaladka baarista sannadkii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin. 2021

Khaladdaadka	Marxaladda
6.2.1. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha 2021	Lama fulin
6.2.1. Qandaarsyo la siiyay tartamayaal aan canshuurta bixin (TCC, TIN)	Waa la fuliyay
6.2.2. Heshiisyadda laga soo diiwaangalin XHG	Waa la fuliyay
6.3.1. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida	Lama fulin
6.3.1. Hantida Wasaaradda Maaliyadda oo aan diiwaangelinteda la cusbooneysin	Lama fulin
6.3.1. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita	Lama fulin



# 5. WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIB U HESHIISIINTA

## 5.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 5.1.1. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) & (2) ee Sharciga libka Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidan:

Qodobka 69(1) Qandaraaska libka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.

Qodobka 69(2) Heshiisyada Qandaraasyada libka lama la kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeerndaamiyaha Sharcigan.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

### Khaladka

#### A. Kala qaybin iib qiimihiisu dhan yahay US \$430,305.00

Intii lagu gudajiray baarista ayaa waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha uu kala qaybiyay ama jajabiyay wax soo iibsi qiimihiisu dhan yahay US **\$430,305.00**, iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay xaddiga lacageed ee lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Qodobka 69aad (1 & 2) ee Sharci Lr 22. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca adeeg bixiyaha	Madax-xige	Bilaha	Faah-faahin	Caddadka US \$
GG-074	2211	Jan. – Dec. 2022	Sahay safar	\$53,380.00
GG-075	2223	Jan. – Dec. 2022	Shidaal iyo Saliid	\$65,300.00
GG-076	2261	April – June 2022	Shirar iyo cunto fudud	\$79,925.00
GG-077	2261	Jan. – May 2022	Shirar iyo cunto fudud	\$103,840.00
GG-078	2261	April – June 2022	Qado, cunto fudud iyo kharashaad gaadiid	\$127,860.00
<b>Wadarta</b>				<b>\$430,305.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha waan in uu u hoggaansamaa qodobada sharciga libka iyo tilmaamaha habraaca xakameyta, gaar ahaan xayeysiinta furan iyo heshiisyada ka badan xaddiga (Thresholds) lagu sheegay.

## Jawaabta maamulka

*libka Adeegga, agabka iyo howlaha sare ku xusan ma ahan kuwo halmar iyo halgoob lagu iibiyay, waxeyna ku saleysanyihiin hadba baahida markaa jirto iyo Dhakhliga lagu ogolaaday, Dhammaan iibka aad soo sheegteen waa mid la galay Xiliyo kala duwan midkastana waxaa loo maray habraaca tartaran u gaar ah ayadoo loo eegayo (thresholds) sida aad ku arakteen dukumiintiyadii horay la idinla wadaagay.*

### 5.1.2. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

19 (1) Habraacyada xulashada hordhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran

19 (2) Casumaadda xulidda hordhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiya Faafinta Rasmi-ga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo faafinta tartameyasha iibka agabka, adeegga iyo hawlaha

Intii baarista lagu guda jiray waxa aan oggaanay in maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ay 12 adeeg bixiye u ogolaadeen iib alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$574,745.00**, iyadoo aan la sameyn xulasho hordhac ah (Prequalification) sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg (website) inta aan loo dirin warqadda qiimeynta adeeg bixiyayaasha. Taasoo lid ku ah Qodobka 19. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca adeeg bixiyaha	Bilaha	Caddadka US \$	Faahfaahin
GG-075	Jan. – Dec. 2022	\$53,380.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-076	Mar. – June 2022	\$27,460.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-077	Jan. – Dec. 2022	\$18,036.00	Maleh xulasho hordhac ah

Magaca adeeg bixiyaha	Bilaha	Caddadka US \$	Faahfaahin
GG-078	Jan. – Dec. 2022	\$25,944.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-079	Jan. – Dec. 2022	\$65,300.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-080	Jan. – Dec. 2022	\$18,128.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-081	Jan. – June 2022	\$16,500.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-082	July – Dec. 2022	\$16,500.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-083	April – June 2022	\$79,925.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-084	Jan. – May 2022	\$103,840.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-085	April – June 2022	\$127,860.00	Maleh xulasho hordhac ah
GG-086	Jan. – Dec. 2022	\$21,872.00	Maleh xulasho hordhac ah
<b>Wadarta</b>		<b>\$574,745.00</b>	

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa in ay sameeyaan xulasho hordhac ah (Prequalification) iib kasta oo xaddiga wax soo iibsigiisu ka sarreeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 inta lagu guda jiro sannadka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Sidii aad ku arakteen document-yada iibka ee la idinla wadaagay, wasaaraddu waxey leedahay adeeg bixiyayaal xulasho hordhac ah (prequalification suppliers) kuwaas oo loo diro Qiimeynta baahiyaha iibka sida Agabyada, Adeega iyo Howlaha si looga sii xusho midkii ugu qiima jaban adeegiisuna ugu tayo sareeyo, wixii ka gaabis ah oo kale waxey wasaaraddu diyaar u tahay iney ku sameeyso hormar la taaban karo.*

## Jawaabta XHGQ

Maamulka hay'addu waxa uubaarista la soo wadaagay magacyada shirkado kala duwan balse sharcigu waxa uudhigayaa in la sameeyo habraac tartansiin.

### 5.1.3. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiye aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

## Khaladka

### A. Adeeg bixiye ayaa la siiyay in ka badan labo madax-xige iib dhan US \$185,896.00

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha uu siiyay hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige oo qiimo ahaan dhan US **\$185,896.00**, taasoo lid ku ah Habraaca xakameynta (Commitment control) shardiga 2aad ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca adeeg bixiyaha	Madax-xige	Caddadka US \$
GG-089	2261	\$127,860.00
GG-089	2225	\$18,128.00
GG-089	2224	\$21,872.00
GG-089	2221	\$18,036.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$185,896.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa in aysan oggolaan in wax ka badan labo madax-xige ay siiyaan hal adeeg bixiye, waana in ay u hoggaansamaan habraaca xakamaynta wax soo iibsiga ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

## Jawaabta Maamulka

*Xadiga lacagaha ku jiro Madaxyada qaar oo bil kasto ka yar \$2000 (Thresholds) ayaa sababay in aan Adeeg bixiyaha sare ku xusan u ogolaanay inuu bixiyo adeega loo baahanyahay, waxaana marsiinay Xafiiska (Commitment Control) ee Xisaabiyaha Guud. wixii Talo soojeedin ah wasaaraddu waxey diyaar u tahay iney dh-aqan geliso kuna sameyso hormar la taaban karo.*

## 5.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIGA

### 5.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda 2019 ayaa dhigaya sida soo socota:

(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladka

#### A. Deeq dhan US \$343,480.8 ayaan lagu darin miisaaniyadda (off-budget)

Intii baaristu socotay waxan ogaaday in maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ay fuliyeen Afar (4) mashruuc oo qiimahoodu dhan yahay US **\$343,480.80**. Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha ma qaadin tillaabooyinka ku habboonaa si loo xaqiijiyo in deeqahaas lagu daro miisaaniyadda qaranka ee la ansixiyay laguna maamulo khasnadda midaysan ee DFS. Faahfaahinta ayaa ku xusan shaxda hoose:

Magaca mashruuca	Deeq bixiyaha	Ku talagalka Lacageed US \$	Caddadka lacageed ee la isticmaalay US \$
UNICEF JPLG rolling work plan 2021-2022	UNICEF	\$94,460.00	\$108,778.00
UNICEF- Civil registration Annual work plan 2021 - 2022	UNICEF	\$142,548.00	\$115,013.00
UNHCR - Statelessness	UNHCR	\$100,000.00	\$90,000.00
UNDP	UNDP	\$6,472.80	0
<b>Wadarta</b>		<b>\$343,480.80</b>	<b>\$313,791.00</b>

### Talo soojeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho sannadka 2023 iyo sannadada xiga lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadda dalka.

### Jawaabta maamulka

*Caqabadaha hoos ku qoran ayaa noo suuragelin waayay inaan miisaaniyadda Qaranka ee 2022 lagu darin Miisaaniyadda Qorshe-howleedyada kor ku xusan:*

*Maadama Xiligii la diyaarinayay Miisaaniyadda 2022 uuna Wadanku lahayn Hay'ado Sharci ah oo ansaxiyo Miisaaniyadda waxaa laguna dhaqmay Miisaaniyaddii 2021 waxey sababtay inaan ku dari weyno Miisaaniyadda 2022.*

*Xiliyada la diyaarinayo Qorshe howleedyada oo inta badan kusoo aad xili ka duwan marka miisaaniyadda qaranka la diyaarinayo ayaa sidoo kale sabab u ah inaan miisaaniyadda qaranka lagu darin*

*Miisaaniyadda Qorshe howleedyada Mashruucayada oo ku saleysan in la qabto shaqo (Activity based) ayaa sidoo kale sabab u ah inaan ku dari weyno miisaaniyadda qaranka.*

*Deeq bixiyayaasha oo aan laga helin balan qaad miisaaniyadeed oo dhameystiran iyo kasoo jawaabidda baahiyaha loo diro oo xili dambe ah.*

## 5.2.2. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda 2019 ayaa dhigaya sida soo socota:

(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lr. 17, ayaa dhigaya: Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid shirkad ama wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Wasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

### Khaladdaada

#### A. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyada ee heshiisyada deeqaha

Intii lagu guda jiray baarista, waxa aan ogaaday in Wasiirka Maaliyaddu aanu dhinac ka saxiixin (co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha ee shaxda sare lagu soo xusay taas oo lid ku ah Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda 2019.

### Talo soojeedin

Waa in maamulka wasaaraddu uu dhammaan heshiisyada hay'addu gasho ee la xariira deeqaha uu dhinac ka saxiixo (co-sign) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, inta lagu guda jiro sannadka 2023 iyo sannadada xiga.

### Jawaabta maamulka

*Wasaaraddu waa aqbashay Talo soojeedinta XHGQ*

## 5.2.3. Sharciga

Qodobbada 9<sup>aad</sup> (7) iyo 42<sup>aad</sup> (3) ee sharci Lr. 17 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019 waxa uusheegayaa sida soo socota:

9 (7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.

### Khaladka

#### A. Koonto bangi la furay iyada oo aan oggolaansho iyo ansixin loo haysan

Intii baaristu socotay waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha uu furay koonto bangi oo laga furay bangiga Amal, koonto Lr. (1013789391), iyada oo aan oggolaansho qoraal ah looga haysan Xisaabiyaha Guud sidoo kalena uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Arintaas ayaa lid ku ah Qodobbada 9<sup>aad</sup> (7) iyo 42<sup>aad</sup> (3) ee sharci Lr. 17. Faafaahinta ku cad shaxda hoose:

Magaca bangiga	Koonto lambar	Lacagta la dhigay US \$	Haraaga US \$
Amal Bank	1013789391	\$345,988.80	\$92,498.00

## Talo soojeedin

Waa in maamulka hay'addu uu oggolaansho iyo ansixin ka helo Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda marka ay doonayaan in ay furtaan koonto bangi oo maxalli ah ama mid caalami ah iyo sidoo kale koontada kor lagu xusay.

## Jawaabta maamulka

---

*Koontada bangi ee sare ku xusan waxaa la furan 2021, waxa aan ogolasho u weydiinay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda balse waxey noo sheegeen in aysan koonto ka furin Bank-yada private oo ay awood u leeyihiin kaliya in ay bank ga dhexe ka furan Akoon.*

*Haddii Wasaaraddu u baahato koonto dheeri ah waxa aan ogolaasho u weydiin doonaa Xafiisyada ay quseyso sidoo wasaaraddu waxey aqbashay Talo soojeedinta Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka.*

---

## Jawaabta XHG

Waa in la xiro koontada ku furan habraaca sharciga baalmarsan.

### 5.3. KHALADDAADKA BAARISTA SANNADKII HORE

#### 5.3.1. Khaladka baarista sannadkii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

Khaladdadka	Marxaladda
1.1.1 Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka	La fuliyay
1.1.2 Xafiiska iibka iyo guddiga qiimeynta oo aan dhisneyn	La fuliyay
2.3.1 Koonto bangi la furay iyada oo aan oggolaansho iyo ansixin loo haysan	Lama fulin
2.1.1 Deeqaha oo ay hay'addu ka heshay deeq-bixiye oo aan lagu darin miisaaniyadda	Lama fulin
3.3.1 Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo cusboonaysiin	La fuliyay fulin
2.4.1 Baaraha Gudaha	Lama fulin



# 6. WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB-U-DHISKA IYO GURYEYNTA

## 6.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 6.1.1. Sharciga

Qodobka 27 (1) & (4), Sharci Lr. 22, Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016, ayaawaxa uddhigayaa sida hoos ku xusan:

27 (1) Dhamaan Hay'adaha qandaraaska libka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sanadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaa kale ee sharcigan. Qorshaha Qandaraaska libsigawaxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay Hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska libka waxaa lagu daabacayaa websaytka quseeya kaddib markii la ansixiyo. Daabacaadda Qorshaha Qandaraaska.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan aan ogaaday in Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$163,215.00**, iyada oo aan laheyn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah Qodobka 27<sup>aad</sup> (1), (4) ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016; faafaahinta ku cad shaxda hoose:

Magaca qandaraaslaha	Madax xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-091	2221	Qarashaadka kale ee Wasaaradda	\$25,000.00
GG-092	2223	Gaas iyo saliid	\$25,000.00
GG-093	2224	Qalab xafiiseed iyo cunto	\$25,000.00
GG-094	2225	Dayactir	\$10,000.00
GG-095	2221	Qarashaadka kale ee Wasaaradda	\$12,470.00
GG-096	2223	Gaas iyo saliid	\$20,000.00
GG-097	2224	Qalab xafiiseed	\$9,785.00
GG-098	2225	Dayactir	\$24,960.00
GG-099	2211	Sahay Safar	\$11,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$163,215.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulka wasaaradda waa in uu diyaariyaa oo ansixiyaa qorshe sannadeedka wax soo iibsiga 2023 kaasoo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee Wasaaradda. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaanta siinayaa hawlaha ugu muhiimsan adeeg bixinta hufan.

## Jawaabta maamulka

*Qorshaha libka Wasaaradda*

*Maadama aysan jirin kharash miisaniyadeed loo qorsheeyay in lagu fuliyo adeeg dad weyne oo dhanka hor-marinta iyo dib u dhiska ah sidoo kalena uusan jirin kharash xafiiseedka Wasaaradda oo sida miisaniyadda lagu ansixiyay lagu bixiyo taas oo ay suurto gal tahay in 4 biloodba 1 bil la bixiyo ayadoo weliba aan la ogeyn xiliga lagu siinayo sidaas awgeed wasaaradda ma'aysan diyaarin qorshe iib oo sanadle ah maadama uusan jirin kharash ama daqli fadhiya oo lagu xisaabtami Karin.*

*FG: - Balse si eedani uga horto wasaaradda waanu diyaarinay qorshe lib sanadeedka 2023 oo aad arki doontaan baarista xigta.*

### 6.1.2. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiye aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

## Khaladka

### A. Adeeg bixiye la siiyay in ka badan labo madax-xige oo qiimahoodu yahay US \$47,215.00

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in Maamulka Wasaaraddu uu siiyay hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige wadarta qiimahooduna dhan yahay US **\$47,215.00**, taasoo lid ku ah Habraaca Xakameynta (Commitment Control) bogga 1aad shardiga 2aad ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xigaha	Magaca Qandaraaslaha	Lacagta US \$
2221	GG-090	\$12,470.00
2224	GG-090	\$9,785.00
2225	GG-090	\$24,960.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$47,215.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda waa in aanu u oggolaan hal adeeg bixiye in ka badan labo madax-xige, waana in ay raacaan Habraaca Xakameynta Xafiiska Xisaabiyaha Guud inta lagu guda jiro xulashada adeeg bixiyaha sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

*Seddex Madax-xige looga libsaday hal Qandaraasle*

*Maamulka Wakaaladda dhismaha oo uu ka dhacay qaladaadka libka sare ku xusan waxay inoo cadeeyeen in ay u hogaansamaan talada kooxda barista ee Hanti Dhowka, oo ahayn in uusan qaladkani markale dhac-eynin ayna ka taxadarayaan.*

### 6.1.3. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

(1) Habraacyada xulashada horudhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- a) Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- b) Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran

(2) Casumaadda xulidda horudhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiyaa Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Xeerka/hagaha Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4, xadka qaddarka ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

### Khaladka

#### A. Maqnaashaha xulasho hordhac ah iyo baahin la'aanta adeeg bixiyayaasha laga soo iibiyay alaabaha iyo adeegga

Intii aan ku guda jiray baarista Wasaaradda, ayaa waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Hawlaha Guud uu sameeyay wax soo iibsasho ay ku baxday kharash u dhexeeya \$2,001 iyo \$50,000, kaasoo lix (6) adeeg bixiye loo oggolaaday in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$163,215.00** iyadoo aan la sameyn xulasho hordhac ah (Prequalification) sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg inta aan loo dirin warqadda qiimeynta ee adeeg bixiyayaasha. Arrintaas ayaa lid ku ah Qodobka 19 iyo sidoo kale Xeerka/hagaha Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Qandaraaslaha	Madax-xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-100	2221	Hawlaha guud	\$25,000.00
GG-100	2225	Shidaal iyo saliid	\$10,000.00
GG-101	2223	Agabka iyo alaabaha	\$25,000.00
GG-102	2224	Dayactir iyo hagaajin	\$25,000.00
GG-103	2211	Sahay safar	\$11,000.00
GG-104	2223	Hawlaha guud	\$20,000.00
GG-090	2221	Shidaal iyo saliid	\$12,470.00
GG-090	2224	Agabka iyo alaabaha	\$9,785.00
GG-090	2225	Dayactir iyo hagaajin	\$24,960.00
GG-090	2225	Dayactir iyo hagaajin	\$24,960.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$163,215.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka libka Wasaaraddu waa in ay sameeyaan xulasho hordhac ah (Prequalification) ee adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023.

## Jawaabta maamulka

---

*Maqnaashaha Xulasho Horudhac ah*

*Maamulka Wasaaradda hawlaha guud, waxay halkaan idinku cadeynayaan in shirkadaha hoos ku xusan aanu lagalnay heshiis sanadeed (1 year agreement) ee sanadka 2022 taas oo xiligii baarista idinla wadaagnay dhamaan documents-kii aan ku xulanay iyo heshiiskii aan lagalnay (Procurement process)*

*Arab Construction & General Service*

*Active Electronics*

*Shidaalka Maalin*

*Royal Tour & Travel*

*FG:- hadii aad xulashada horudhaca ah (prequalification) aad ula jeedan in bilowgiiba aan sameyno Request for Expression of Interest (REOI) waa talo wanaagsan waana dhaqan gelineynaa hadeer wixii ka dambeeya, balse maadama kharashku ahaa 2,500 iyo wixii ka yar oo noqonaya Single Sourcing waxaanu islaheyn looma baahan Request for Expression of Interest (REOI).*

*Sirmaqabe General Trading Company,*

*Maamulka Wakaaladda Dhismaha oo ah hay'adda sida gaarka ah u isticmaasha Shirkadda sare ku xusan waxay inoo cadeeyen in hadeer ka dib ay ku dadaali doonan in ay si dhameystiran u raaci doonan habraaca Xafiiska Xisaabiyaha Guud*

---

## 6.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 6.2.1. Sharciga

Dastuurka ku-meel gaarka Cutubka 3<sup>aad</sup> Qodobka 43<sup>aad</sup>(2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh.

#### Khaladka

#### A. Hannaanka maamulka dhulka iyo guryaha Wasaaradda oo liita

Intii lagu gudajiray baarista, Maamulka Wasaaraddawaxa uunala wadaagay liiska lix (6) dhul oo bannaan iyo Toban iyo Siddeed (18) guri kuwaas oo sida la sheegay ay leedahay Wasaaraddu, in kastoo aysan nala wadaagin dukumiintiyada lahaanshiyaha dhulalka iyo guryaha. Guryaha iyo dhulalka liiskooda baarayaasha XHG lala wadaagay waxay kala yihiin; qeyb bannaan, qeyb gacan shaqsiyaad gaar ah ku jirta iyo qeyb kireeysan, iyada oo aysan jirin hannaan iyo habraac ku aaddan maamulkooda guud. Arrintaas ayaa lid ku ah Qodobka 43(2) ee Dastuurka ku-meel gaarka. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nuuca hantida	Goobta	Cidda maamusha	Faahfaahin
Guri	Xamer-weyne	DFS	Kireysan
Hotel	Abdil-asis	DFS	Kireysan
Dhismo weyn	Shangaani	DFS	Kireysan
Guri	Xamer-weyne	DFS	Kireysan
Guri	Xamer-weyne	DFS	Kireysan
Dhul bannaan	Hodan	Waa cidlo	Kireysan
Guri	Abdil-asis	DFS	Kireysan
Dhul bannaan	Yaqaashid	DFS	Kireysan
Dhul bannaan	Hoden District	DFS	Kireysan
Guri	Abdil-asis	DFS	Kireysan
Guri	Hodan	DFS	Kireysan
Guri	Hodan	DFS	Kireysan
Dhul bannaan	Hodan	DFS	Kireysan
Dhismo weyn	Shangaani	Wasaaradda	Kiro la'aan
Guri	Abdil-asis	Lama oga	Kiro la'aan
Guri	Abdil-asis	Lama oga	Kiro la'aan
Guri	Shangaani	Lama oga	Kiro la'aan
Guri	Shangaani	Lama oga	Kiro la'aan
Guri	Shangaani	Lama oga	Kiro la'aan
Guri	Shibis	Agaasime (MGB)	Kiro la'aan
Guri	Shibis	Xildhibaan	Kiro la'aan
Dhul bannaan	Yaaqashid	Lama oga	Lama oga
Dhul bannaan	Yaaqashid	Lama oga	Lama oga
Iskuul iyo Guri	Yaaqshiid	Lama oga	Lama oga

## Talo soojeedin

Waa in maamulka Wasaaradda oo kaashanaya Wasaaradda Maaliyadda, uu sameeyaa siyaasad lagu maamulo hantida maguurtada ah, waana inay ku dadaalaan in ay dib u soo celiyaan dhammaan hantida maguurtada ah ee sida shaqsiga ah loo haysto. Maamulka Wasaaraddu waa inay sameeyaan dukumintiyada lahaanshaha hantida Wasaaradda. Talooyinkan waa in la fuliyaa laga billaabo sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Hannaanka maamulka dhulka iyo Guryaha*

*Wasaaradda hawlaha Guud, waxay qaadatay taladda kooxda baarista oo ah in lasameeyo siyaasad lagu maamulo hanti ma guurtada sida dhulalka iyo guryaha waxayna maamulka wasaaradda guddi u saari doonan diyaarinta siyaasadda sare ku xusan iyo dib u eegista sharuucdii horay u jirtay ee lagu maamulayay hanti maguurtada guud ee qaranka iyo gaar ahaan tan wasaaradda, maadama masuuliyad ka saaran tahay.*

### 6.2.2. Hannaanka la iskuwaafaqsan yahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aadan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa.

## Khaladka

### A. Hannaanka maamulka gaadiidka oo liita

Waxaan baarista ku ogaannay in ay jiraan todoba (7) gaari oo ay leedahay Wasaaradda Hawlaha Guud oo dhammantood aan lagu diiwaangelin magaca Wasaaradda, halka shan (5) kamid ah ay ka maqanyihiin gacanta wasaaradda oo ay ku jiraan gacanta shaqsiyaad gaar ah taasoo sababta in aan si muuqaal ahan ah u xaqiijin weyno. Faahfaahinta gaadiidkaas ka eeg shaxda hoose:

Nuuca Gaariga	Cidda libisay	Caqaayad Lr.	Cidda isticmaasha
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD900676806	Agaasimaha Isxilqaan
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD900676708	Wasaaradda
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD800676750	W. ku-xigeen hore
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD900676773	W. Dowlo hore
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD200676730	Wasiir hore
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD600676794	Agaasime hore
Toyota Hilux Double Cabin	GIZ	AHTKK8CD700676805	Mashruuca RIP

## Talo soojeedin

Dhammaan gaadiidka Wasaaraddu waa inay lahaadaan buuggaagta lahaanshaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda. Gaadiidka waa in lagu diiwaangeliyaa diiwaanka hantida oo ay ku jiraan faahfaahinta sida nooca gaadiidka, lambarka caqaayadda, goobta, qiimaha, iyo sarkaalka mas'uulka ah. Sidoo kale, diiwaanka hantida waa in loo cusboonaysiiyaa si waqtiyeysan. Talooyinka waa in la fuliyaa inta lagu jiro sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Hannaanka Maamulka Gaadiidka*

*Sidaan horay xiligii baarista idinla wadaagnay qoraal aanu uga codsanay Wasaaradda Gaadiidka in ladii-wangeliyo loona yeelo buuggaagta lahaanshaha Ayaan horay u dhaqan gelin, balse anagoo raaceyana talada hanti dhowrka waxa aan u sameynaynaa buuggaagta lahaanshaha labada gaari ee hadeer gacateyna ku jirta, inta kalena waxa aan hawshooda lahaanshaha dhameystireynaa markii lagu soo celiyo gacanta wasaaradda oo dadka haya ay u hogaansamaan awaamirta hanti-dhowrka.*

### 6.3. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

#### HUBINTA GUDAHA

##### 6.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adhooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyaasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha Waaxda Baarista Gudaha iyo shaqadeeda

Intii lagu gudajiray baarista Wasaaradda Hawlaha Guud waxaa la ogaaday in maamulka hay'adda gaar ahaan Sarkaalka Idman uusan dhisin waaxda baarista gudaha iyo shaqada baaraha gudaha oo waqtiyaysan si dib u eegis loogu sameeyo waxqabadka hay'adda gaar ahaan maamulka maaliyadda iyo guud ahaan waxtarka hawlaha hay'adda. Dhisid la'aanta baaraha gudaha waxay baalmarsantahay Qodobka 46<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

#### Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda, iyagoo si dhow ula tashanaya maamulka Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale oo ay khusayso waa in ay abuuraan waaxda baarista gudaha oo madax-banaan si ay u soo saaraan warbixin tayo sare leh oo waqtiyaysan taasoo sare u qaadeysa daahfurnaanta iyo sumcadda hay'adda. Sarkaalka Idman waa in uu hawl-geliyaa waaxda baarista gudaha inta lagu guda jiro sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

---

### *Hubinta Gudaha*

*Maadama uusan jirin dhaqaale aan ku qorano baaraha gudaha (Internal Audit) waxa aan ku dadaaleynaa in mid ka mid ah mashaariicda Wasaaradda hoos yimaada aanu ka qorano baaraha gudaha (Internal Audit) kaas oo naga caawin doono lasocodka hannaanka maaliyadeed ee wasaaradda, talada hanti-dhowrkuna waa mid aan hadeer ku baraarugnay oo wax ku ool ah.*

---



## 6.4. MARXALADDA TALOYINKII SANNADKII HORE

### 6.4.1. khaladdaalkii sanadkii hore ee aan wali la xalin

Jaaruska hoose waxa uu ku saabsan yahay marxaladda khaladdaalkii lagu ogaaday baaristii sannadkii 2020 sida in la fuliyay iyo in kale.

Khaladdaalka	Marxaladda
20.2. Qorshaha iibka sannadka oo aan la sameyn	Lama fulin
20.1. Kharash aan lahayn caddeymo ku filan	Waa la fuliyay
20.2.2. Qandaraasyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ-ka	Lama fulin
20.2.3. Qandaraasyo Maxali ah oo lagu qoray af-qallaad	Lama fulin
20.3 Gaadiidka oo aan ku diiwaangashanayn magaca hay'adda	Lama fulin
20.3 Siyaasadda Maamulka Hantida oo aan jirin	Lama fulin
20.4. Koono bangi la furay ansixin la'aan	Waa la fuliyay
20.4.1. Daaqaha Dibedda oo aan lagu darin miisaaniyadda DFS	Waa la fuliyay



## II. HAY'DAHA AMNIGA

# 7. HAY'ADDA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA

## 7.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 7.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee libka Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska iibsiga-waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Hay'adda Nabadsugidda & Sirdoonka Qaranku uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$3,680,806.00**, iyadoon lahayn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah Qodobka 27<sup>aad</sup> (1 & 4) ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016. Faahfaahinta ka eeg jaantuska hoose:

Madax-xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
2211	Kharashaadka safarka iyo shirarka	\$372,000.00
2221	Howlaha Guud	\$209,770.00
2223	Shidaal iyo Saliid	\$1,024,788.00
2224	Agabka iyo Alaabaha	\$192,792.00
2225	Dayactirka iyo Hagaajinta	\$300,000.00
2261	Kharash kale - Guud: Agabka iyo Adeeg	\$1,581,456.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$3,680,806.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulka hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranku waa in uu diyaariyo oo ansixiyo qorshe sannadeedka wax soo iibsiga oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee hay'adda inta lagu gudasjiro sannadka 2023. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaanta siinayo hawlaha ugu muhiimsan iyo adeeg bixinta hufan.

## Jawaabta maamulka

*Ayadoo la fiirinayo dabeecada hay'dda oo ah hay'ad ka shaqaysa arrimaha amniga iyo sirdoonka waxa aan inta badan suurta gal ahayn in lasameeyo qorshe, sababtoo ah hay'adda waxay kujirtaa dagaal iyo dib uxurayn waxaana hawlaha qaar lagu fuliyaa amar madaxwayne oo degdeg ah.*

*Sidoo kale arrimaha safarada iyo sahayda ma fududa inaan u samayno qorshe, sababtoo ah mararka qaar waxaa dhaca safaro shirar dagdag ah iyo dhaawacyo dagdag ah oo loo qaado caafimaad ahaan dalka dibadiisa kajawaabistooduna waa degdeg.*

*Balse adeegga qaar sida shidaalka, agabka & alaabaha, dayactir waxa aan u samayn doonaa qorshe.*

### 7.1.2. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidaan:

19 (1) Habraacyada xulashada hordhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaaran

19 (2) Casumaadda xulidda hordhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiyaa Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan tilmaamaha Maamulka.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo faafinta tartameyasha iibka agabka, adeegga iyo hawlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka hay'addu uu sameeyay wax soo iibsi xaddigiisu (thresholds) ka sarreeyo \$2,001 kana hooseyo \$50,000, kaasoo afar (4) adeeg bixiye loogu oggolaaday in looga soo iibsado alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$626,255.00**, iyadoon la sameyn xulasho hordhac ah (Prequalification) sida in lagu baahiyo ugu yaraan hal mareeg inta aan loo dirin warqadda qiimeynta ee adeeg bixiyayaasha, arrintaas ayaa lid ku ah Qodobka 19<sup>aad</sup> Sharci Lr. 22. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca shirkadda	Bilaha	Lacagta/Bille US \$	Wadar US \$
GG-105	7 Bilood	\$31,000.00	\$217,000.00
GG-106	7 Bilood	\$16,066.00	\$112,462.00
GG-107	7 Bilood	\$17,399.00	\$121,793.00
GG-108	7 Bilood	\$25,000.00	\$175,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$626,255.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Hay'adda Nabadsugidda & Sirdoonka Qaranku waa in ay sameeyaan xulasho hordhac ah (prequalification) ee adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga wax soo iibkisiigiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka 2023.

Waa in la xayeesiiya iibka agabka, addeegyada iyo howlaha lana sameeyo liiska xulashada hordhaca ah si waafaqsan Qodobka 19<sup>aad</sup> (1 & 2) iyo in la baahiyo liiska sida uu qabo sharciga, lana fuliyaa sannadka 2023 iyo sannadaha xigga.

## Jawaabta maamulka

---

*Bilaawgi sanadka 2019 hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-Sugidda iyo Qaranka HSNQ waxa ay samaysay tartan xulasho oo ay u samaysay shirkadaha waxaana ku guuleestay oo laga xushay shirkadaha kor ku xusan magacyadooda, intaa kadib hay'adda ayada oo ka eegeesa xaga amniga maadama aan marwalbo laqadan Karin shirkado cusub. Ayadoo taas laga duulayo waxa aan samaynay heshiis cusbooneysiin ah oo sanadle ah shirkad walbo waxaana lawadaagnay baarayashii u xilsaarnaa howshaas.*

---

### 7.1.3. Sharciga

Qodobka 58<sup>aad</sup> (1) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka ee 2016, ayaa dhigaya sidaan:

58 (1) Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi Iib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha sida soo socota:

- a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda libinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha sameynta guddi iib qandaraas

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka ha'addu sameeyay wax soo iibsi qiimahiis dhan yahay US **\$626,255.00**, iyagoon magacaabin guddiga iibka qandaraaska arrintaas oo lid ku ah Qodobka 58<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016.

## Talo soojeedin

Maamulka Hay'addu waa inuu magacaabo guddiga iibka qandaraaska oo wax ku ool ah inta lagu guda jiro sannadka 2023, sida uu qabo Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016.

## Jawaabta maamulka

---

*HSNQ soo jeedinta qodobkaas waa ay qaadatay, waxa ayna diyaar u tahay inay fuliso.*

---

### 7.1.4. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badanyahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

### Khaladka

#### A. Wasaaradda Maaliyadda ayaan loo wareejin soo iibsi la'eg ama ka badan \$50,000.00

Intii baaristu soctay, waxa aan ogaaday in maamulka hay'addu uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$1,520,309.00**, taasoo aysan u wareejin kalana tashan Wasaaradda Maaliyadda iyadoo xaddiga iibku ka badan yahay \$50,000, taasoo lid ku ah habraaca iibka uu dajiyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee DFS. Faahfaahinta ka eeg shaxda hoose:

Magaca shirkadda	Bilaha	Lacagta/Bille US \$	Wadar US \$
GG-109	7 Billood	69,043.00	\$483,301.00
GG-110	7 Billood	85,399.00	\$597,793.00
GG-111	7 Billood	62,745.00	\$439,215.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$1,520,309.00</b>

### Talo soojeedin

Qaybta iibka ee hay'addu waa in iibka xadiga qiimahiisu la'eg yahay ama ka badan yahay US \$50,000 uu u wareejiyo maamulka waaxda iibka ee Wasaaradda Maaliyadda inta lagu guda jiro sannadka 2023 iyo sanadaha xiga, sida uu qabo habraaca iibka ee Xisaabiyaha Guud.

### Jawaabta maamulka

*Shirkada EXPRESS LOGISTICS AND CAR SALE sanadi lasoo dhaafay 2022 dhamadkiisi ayaa loo sameeyay xayeysiin mar kale tartan ayay gashay ayadoo hay'adda ay magacaawday guddi qiimayn ah, waxaana dib ugu guuleestay shirkada express logistics sidaa darted qodobkaas sanadka 2023 waan fulinay.*

*Shirkada DEH waa shirkad waqti dheer lasoo shaqaysay hay'adda ayadoo bixinaysay adeega shidaalka, ayada oo laga eegayo dhanka amniga ayna tahay in aad looga feejignado shidaalka ay isticmaalan ciidanka hay'adda. HSNQ iyo wasaarada waxa ay isla garteen in shirkadaan ay sii wado adeeg bixinta. Sidaas darted ayaana loo xayeysiin adeega shidaalka iyo saliida ee shirkada DEH.*

*Shirkada TA'MEER waa shirkad ka shaqaysa arrimaha dhismaha iyo dayactirka hay'dda, waxaana heshiis lala galay sanadki 2019 ayada oo ku guuleesatay tartan xayeysiin daahfuran. Waxaana u cosbooneesiinaa sanad walba heshiiska.*

*Shirkadaan hay'dda waxa ay u qabataa dhismayaal xasaasi ah sida:- xafiisyada hay'adda, dhismayaasha goobaha ciidanka, dhismayaasha Towerada mashruuca cctv iyo qaybo kale oo aad muhiim u ah oo ay adagtahay in cid walbo dhismayaashaas lagu aamino.*

*F.G: - Waxaa hada ka hor dhacday in shirkad dhismo oo ka shaqaynaysay dhismaha hay'dda ay shaqalaaheedi ka mid noqdeen dad ka tirsan ururada argagaxisada. Sidaa darteed shirkad kasta laguma aamini karo dhismaha xarumaha hay'adda.*

## 7.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 7.2.1. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Hannaanka la isku waafaqsan yahay ayaa jidaynaya in maamulka hay'adaha dowladda ay sameeyaan diiwaangalinta hantida oo leh xilli joogta ah oo la cusboonaysiiyo, waa in macluumaadka la diiwaangalinayo uu noqda sida nooca hantida, xaaladda, qiimaha, goobta lagu isticmaalo, iyo cidda mas'uulka uga ah Hay'adda.

#### Khaladka

##### A. Hantida hay'adda oo aan ka diiwaangashneyn Wasaaradda Maaliyadda

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan ogaaday in dhammaan hantida hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranku aysan ka diiwaangeshanayn Wasaaradda Maaliyadda.

#### Talo soojeedin

Maamulka hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranku waa inuu ka diiwaangaliyaa Wasaaradda Maaliyadda dhammaan hantida loona sameeyaa lambarka aqoonsiga inta lagu guda jiro sannadka 2023.

#### Jawaabta maamulka

---

*HSNQ waxa ay ku dhajisay dhamaan hantideeda TAG NO oo ay ayada leedahay. Waxaana lawadaagnay muqaal ahaan iyo qoraal ahaanba barayashi baarayay. sidoo kale HSNQ dhamaan liiska hantida waxa ay lawadaagtay wasaarada maaliyada waaxda hantida.*

*Soo jeedinta qodobkaan hay'adda horay uma aysan ogayn in wasaarada TAG No ay samayso, balse marki aan ogaanay waxa aan laxiriirnay wasaarada si ay u diiwaangaliyaan hantida arintaasna waan wadna howsheeda.*

---

## 7.3. KHALADKA BAARISTA SANNADKII HORE

### 7.3.1. Khaladka baarista sannadkii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin:

Khaladdaadka	Marxaladda
20.1 Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha 2021	Lama fulin
20.1 Qeybta Maamulka lib iyo Qandaraasyada oo aan la sameyn	Waa la fuliyay
20.1 Maqnaanshaha Guddi lib Qandaraas	Lama fulin
20.2 Maamulka gaadiidka oo liita	Qeyb ayaa la fuliyay



# 8. CIIDANKA BOOLISKA SOOMAALIYEED (CBS)

## 8.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 8.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii lagu gudajiray baarista ayaan ogaaday in Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$7,834,252.00** iyadoon laheyn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah sida uu qabo Qodobka 27aad (1), (4) ee Sharciga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada 2016. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xige	Faah-faahin	Lacagta US \$
2261	Kharashaad kale - agabka iyo adeegga	\$6,503,448.00
2313	Hantida kale ee maguurtada ah	\$14,500.00
2224	Agabka	\$429,756.00
2223	Shidaalka iyo saliidda	\$766,548.00
2251	Agab iyo adeegga booliska	\$120,000.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$7,834,252.00</b>

### Talo soojeedin

Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waa inuu sameeyaa qorshe iib sannadle ah inta lagu guda jiro 2023, kaas oo mudnaanta siinaya hawlaha ugu muhiimsan kuna saleysan miisaaniyadda loo ansixiyay hay'adda.

### Jawaabta maamulka

*Dhamaam iibka uu sameeyey Taliska Ciidanka Booliska, waa mid Waafasan Sharuucda Soonamaray Shurrcda Kharash Bixinta Waxaana Isticmaalnay Kharashaadka anaga oo Soomarnay Habraacyada sida Waasaradda Maaliyadda, Xisaabiyaha Guud & Hantishowka qaranka, Kuna Saleysneysan Qoondada Miisaaniyadda 2022<sup>da</sup>.*

### 8.1.2. Sharciga

Qodobka 58<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi lib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha (Taliyaha Ciidanka BS) sida soo socota:

- a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda.

61<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin waa in ay dhistaa Waax lib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

62<sup>aad</sup> (2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska libka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska libka.

### Khaladka

#### A. Waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaan baarista ku ogaaday in Taliska Ciidanka Boolisku uu sameeyay wax soo iibsasho agab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$7,834,252.00** iyagoon dhisin waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta, taasoo aan waafaqsanayn Sharciga libka iyo Qandaraasyada qaranka 2016.

### Talo soojeedin

Waa in Taliska Ciidanka boolisku uu abuura waaxda iibka sidoo kalena uu magacaabaa guddiga iibka iyo qandaraasyada sannad maaliyadeedka 2023, si ay u gutaan waajibaadkooda ayada oo la waafajinayo sida uu qabo Sharciga libka.

### Jawaabta maamulka

*Inkastoo Taliska Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed u Hoggaansanyahy Shuruucda & Nidaamka Dalka u degsan hadana Waxuu diyaar u yahay in uu Sixid ku sameeyo hadba Khaladdaadka soo baxa, iyadoo aan Rajeynaayo In hadii Allaha Awooda leh Idmo in Sanadka 2023da ah aan buuxin Doono dhamaan khalaadka jira.*

### 8.1.3. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (2) ee sharciga iibka: Heshiisyada Qandaraasyada libka lama kala qaybin karo iyadoo ujeedku yahay si looga leexo xayeysinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeernidaamiyaha Sharcigan.

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badan yahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyaa Wasaaradda Maaliyadda.

## Khaladka

### A. Kala qaybin lib dhan US \$4,902,954.70

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in maamulka Ciidanka Boolisku uu kala qaybiyay wax soo iibsi qiimihiisu dhan yahay US **\$4,902,954.70**, taasoo lid ku ah Sharciga libka Qodobkiisa 69<sup>aad</sup> (2) iyo Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4aad. Faahfaahinta ayaa ku cad shaxda hoose:

Magaca shirkadda	Ujeedka	Muddada	Lacagta US \$
GG-112	Raashin iyo lidaan	Jan. – Dec. 2022	\$3,875,070.20
GG-113	Shidaal iyo Saliid	Jan. – Dec. 2022	\$ 766,547.50
GG-114	Raashin iyo lidaan	April – Dec. 2022	\$ 261,337.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$4,902,954.70</b>

### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waa in aysan kala qeybin iibka, iyadoo ujeedku yahay in laga leexo xaddiga lagu sheegay habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud inta lagu gufajiro sanadka 2023 iyo sanadaha xiga.

### Jawaabta maamulka

---

*Heshiyyada waxaa gala Wasaaradda Amiga Qaranka oo Mataleysa Taliska Ciidanka Boliiska & Shirkadaha ku Guuleysta Qandaraska, Taliska Ciidanka Boliiskana waxaa uu ka yahay Goobjoog.*

---

## 8.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 8.2.1. Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aaddan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa. Sidoo kale waa in diiwaanka hantida loo cusbooneysiyo si waqtiyeysan.

### Khaladdaadka

#### A. Maamulka gaadiidka oo liita

Intii aan ku guda jiray baarista, Taliska CBS ayaa waxaa layla wadaagay liiska (21) gaari oo ay sheegteen in ay leeyihiin Ciidanka Booliska, balse ku jiro gacmo mas'uuliyiin hore iyo shaqsiyaad kale. Hadaba, gawaaridaas iima suuragelin in aan si muuqaal ahaan ah u xaqiijiyo. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay jaantuska hoose:

Nuuca Gaadiidka	Caqaayad Lr.	Faah-faahin
Gaari Hilux	Lama hayo	W. Ku-xigenkii hore Arr. Gudaha
Gaari Hilux	Lama hayo	W. Dowlihii hore W. Amniga
Gaari Hilux	Lama hayo	Xildhiban
Gaari Hilux	Lama hayo	R.Waasarihi hore
Gaari Hilux	Lama hayo	W. Amniga hore
Ford	Lama hayo	Madaxweynihii hore
Ford	Lama hayo	W. Amniga hore
Ford	Lama hayo	Taliyihii hore Hog. hay'adda Socdaalka
Bullet proof	Lama hayo	W. Amniga hore
Bullet proof	Lama hayo	W. Amniga hore
Gaari Hilux	Lama hayo	AG. Hore Madaxtooyda
Cabdibile	Lama hayo	Ra'iisulwasaare hore
Cabdibile	Lama hayo	W. Hore Amniga
Cabdibile	Lama hayo	Ra'iisulwasare hore
Gaari Hilux	Lama hayo	Agaasimihii hore ee madaxtooyada
Cabdibile	Lama hayo	W. Amniga hore
Cabdibile	Lama hayo	W. Amniga hore
Landcruiser	Lama hayo	W.Ku-xigeenkii hore ee W. Amniga
Landcruiser	Lama hayo	W.Dowlihii hore Aminga
Cabdibile	Lama hayo	Ra'iisulwasaare ku-xigeen hore
Ford	Lama hayo	W.Ku-xigeen hore Amniga

## B. Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo cusboonaysiin

Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliya ayaan cusboonaysiin diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Waxaa intaas dheer, hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in qaar ka mid ah hantida aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (Tag Number), si tixraac fudud ay ugu noqoto halka uu yaalo. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay jaantuska hoose:

Magaca	Aqoonsi Tr.	Tixraac lambar	Diiwaanka	Faallo
Computer Desktop HP	Lama sheegin	3CQ53937H3	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar.
Computer Desktop HP	Lama sheegin	6CM4300NM7	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
Computer Desktop HP	Lama sheegin	3CQ120BQDK	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
Computer Desktop HP	Lama sheegin	3CQ122B178	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
3UBS	Lama sheegin	E1908075058 E1805058359 E1805058690	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
Printer MFB 277	Lama sheegin	VNB8J30FHR	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
Printer hp deskjet 2130	Lama sheegin	F552880099	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar
17 Executive chair	Lama sheegin	Lama hayo	Lama hayo	ma lahan aqoonsi lambar

## Talo soojeedin

Waa in Maamulka Ciidanka Booliska uu soo celiyaa dhammaan gaadiidka ka maqan gacanta hay'adda.

Taliska Ciidanka Booliska waa in uu sameeyaa diiwaan dhammaystiran ee la xariira hantida oo faahfaahin dhameystiran leh.

## Jawaabta Maamulka

*Diyaar ayaan u nahay inaan qaadano Talo soojeedinta.*

## 8.2.2. Sharciga

Dastuurka ku meel-gaarka, cutubka Saddexaad Dhulka, Hantida iyo Deegaanka

Qodobkiisa 43<sup>aad</sup> (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh.

## Khaladka

### A. Maamulka dhulalka iyo dhismayaasha Ciidanka Booliska oo liita

Intii lagu gudajiray baarista, Taliska Ciidanka Booliska ayaa nalala wadaagay liis ay ku qoranyihiin sid-deetan iyo labo (82) xarumood oo ay sheegeen in Ciidanka Boolisku leeyahay. Baarista waxa aan ku ogaanay in labatan iyo sadex (23) kamid ah in ay ku jiraan gacmo gaar ah (private control), taasoo lid ku ah Qodobka 43<sup>aad</sup> (2) ee Dastuurka Ku Meel-gaarka. Faahfaahinta ka eeg shaxda hoose:

Magaca xarunta	Goobta	Gacanta Booliska inta ku jirta	Maamulka Booliisku gacanta kuma hayo
Xarunta fardaha booliska	Degmada xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Xarunta debdemiska booliska	Degmada Wadajir	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Xarunta hogaanka dhis-maha booliska	Degmada Wadajir	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Xarunta agoonta booliska ee hore	Degmada Wadajir	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Xarunta shilkolaha booliska	Degmada Abdiasis	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Kaambada gaadiidka 23 guri	Degmada Abdiasis	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Kaambada hiliwaa 28 guri	Degmada Hiliwaa	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Kaambada booliska sar-endi 71 guri	Degmada Xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Kaambada booliska sheelare 51 guri	Degmada Xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka kaawada booliska	Degmada Kaaran	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka ku dhagan laanta socotada	Degmada Howlwadag	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka fardaha lagu ciyaari jiray	Degmada Xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka sarandi iyo af-isyoni u dhaxeeya	Degmada Xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka buurka & badda ka xigo Ak/ jen kaahiya	Degmada Xamar jajab	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Dhulka u dhaxeeyo isbi-taal madiina & bangiga dhiiga	Degmada Wadajir	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Guryaha generalada 38 guri	Meelo kala duwan	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Garaashka iskaraabka booliska (Mayongale)	Degmada Warta Nabadda	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Rugta booliska kaniisada taliyaaniga	Degmada shangani	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Rugta qeybta N-galyada wadooyinka warsh	Degmada Warta nabadda	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Baqaaradda raashika fardaha	Degmada Howlwadag	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Beerta darawiishta ee sayidka	Degmada Howlwadag	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Beeraha daraawiishta booliska	Degmada Balad	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab
Beerta booliska mareerey	Mareerey	Kuma jiro	Waxaa deggan shacab

## Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waa inuu xoojiyaa hanaankooda maamulka hantida si uu dib ugu soo celiyo hantida ka maqan gacantooda ee isticmaalka gaarka ah ku jirta waana in ay u ho-gaansmaan shuruucda ku habboon.

## Jawaabta maamulka

*Fiiri L 6 Kaambada Gaadiidka waa 23 guri, Hal ka mid ah Waxaa deggan shacab*

*L 7 Kaambada hiliwaa 28 guri waa laga saaray shacabkii Boliiska aa gacanta ku haya*

*L 8 Kaambada booliska sarendi 71 guri, Labo ka mid ah waxaa haysta shacab*

*L 9 Kaambada booliska Sheelare 51 guri, Shanko mid ah waxaa deggan Waaxda Jen-Daauid*

*ee Degmada X/Jajab iyo Saraakiil Hay,adda NISA iyo Ciidanka Xooga ka kala tirsan*

*L 16 Guryaha generalada 38 guri, Todob ka mid ah waxa deggan Masuliyiin aan Boliiska*

*Ogolaasho uga haysan iyo shacab*

*Waxaan raadin doonaa dhamaan hantida maguurtada Boliiska leeyahay lahaanshiyahooda, waxa aan idinka codsaneynaa inaad nagala shaqeysaan sida ay noogu fududaan laheyd inaan helno dukomintigaas lahaanshaha inaan helno.*

## Jawaabta XHG

Maamulka Taliska Boolisku ma keenin wax caddeymo ah dhulalka iyo guryaha ay sheegin ay gacanta maamulka ku jiraan.

### 8.3. ARRIMAHA KALE AHMEDYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

#### HUBINTA GUDAHA

##### 8.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adahooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyahooda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyahooda; iyo

- b) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

## Khaladka

### A. Hubinta gudaha oo ah mid liita

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan oggaanay in maamulka CBS uusan sameeyn qeybta baaraha gudaha sida uu faryo sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019. Taasina waxay sababtay islaxisaabtan la'aan iyo in aan la soo saarin warbixita baaraha gudaha oo waqtiyeysan.

## Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Booliska waa in ay sameeyaan qeybta baaraha gudaha oo wax ku ool ah, si kor loogu qaado hubinta iyo islaxisaabtanka gudaha iyo in la soo saaro warbixin baariseed waqtiyeysan.

## Jawaabta maamulka

---

*Taliska Ciidan Booliisku jawaab qoraal ah kama soo bixin.*

---



## 8.4. MARXALADDA BAARISTA SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 8.4.1. Khaladdaadka baarista sannadkii 2021

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Ciidanka Booliska in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

Khaladdaadka	Marxaladda
14.1.1 Kharashaad aan lahayn caddeymo dhammaystiran	Waa la fuliyay
14.2.1 B Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka raashinka	Lama fulinin
14.2.1T Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka shidaalka	Lama fulinin
14.3.1 Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka	Lama fulin
14.3.2 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ	Waa la fuliyay
14.3.3 Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga	Waa la fuliyay
14.4.1 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin	Lama fulin
14.4.1 B Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida	Lama fulin`
14.4.1 J Maamulka gaadiidka oo ah mid liita	Lama fulin
14.5.1 Kala duwanaansho ka jirta nidaamka keydka xogta	Waa la fuliyay

## 9. CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYA (CXDS)

### 9.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

#### 9.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in Taliska Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$15,037,797.00** iyadoon laheyn qorshe iib sannadle ah oo la ansixiyay, taasoo lid ku ah Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharciga Iibka Qaranka 2016. Faahfaahinta ka eeg shaxda hoose:

Madax-xige	Faah-faahin	Lacagta US \$
2261	kharashyada kale ee guud ee agabka iyo adeegga	\$10,417,811.00
2225	Dayactir iyo hagaajin	\$1,035,992.00
2224	Agabka iyo alaabaha	\$794,050.00
2223	Shidaal & saliid	\$1,829,944.00
2211	Sahay safarka iyo shirar	\$360,000.00
2221	Hawlaha guud	\$60,000.00
2253	Qalabka agabka iyo adeegga millatariga	\$540,000.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$15,037,797.00</b>

#### Talo soojeedin

Taliska Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya waa inuu sameeyaa qorshe iib sannadle ah inta lagu guda jiro 2023, kaasoo mudnaanta siinaya hawlaha ugu muhiimsan kuna saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

## Jawaabta maamulka

Sannadka 2022 ka guud ahaan Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed waxaa ay ku jireen dagaal dib u xureyn oo ka socday inta badan gobalada soomaaliya sidaa darteed suurto gal ma aheen in aan diyaarino qorshe hannaanka iibka Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed,

Waxaa jiray in is badal xarumo cusub oo la xooreeyay oo ciidanka la wareegay taasoo aan qorshaha ku jirin laguna qasbanaa in saanad la gaarsiiyo.

haddaba Hogaanka maamulka Lacagta ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed CXDS waxaa uu diyaar u yahay in uu sameeyo qorshe iib sannadka 2023<sup>da</sup>.

### 9.1.2. Sharciga

Qodobada 58<sup>aad</sup> (1), 61<sup>aad</sup> (1) iyo 62<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga libka Qaranka iyo Qandaraasyadda waxay dhi-gayaan;

Qodobka 58aad (1) Hay'ad kasta oo libin waa inay abuurtaa Guddi Iib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha (Taliyaha Ciidanka XDS) sida soo socota:

- a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda.

Qodobka 61<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharciga.

Qodobka 62<sup>aad</sup> (1) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska libka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska libka.

## Khaladka

### A. Waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaan baarista ku ogaaday in Ciidanka Xoogga Dalka uu sameeyay wax soo iibsasho alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$15,037,797.00** iyagoon dhisin waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta, taasoo aan waafaqsanayn Sharciga libka iyo Qandaraasyada qaranka 2016.

### Talo soojeedin

Waa in CXD uu abuuraa waaxda iibka sidoo kalena uu magacaabaa guddiga iibka iyo qandaraasyada sannad maaliyadeedka 2023, si ay u gutaan waajibaadkooda ayada oo la waafajinayo sida uu qabo Sharciga libka.

### Talo soojeedin

Waa in maamulka Ciidanka XDS uu abuuraa waaxda iibka sidoo kalena uu magacaabaa guddiga iibka iyo qandaraaska sannad maaliyadeedka 2023, si ay u gutaan waajibaadkooda ayada oo la waafajinayo sida uu qabo Sharciga libka.

## Jawaabta maamulka

Hogaanka maamulka Lacagta waxaa uu diyaar u yahay in sameeyo hannaanka iyo habraaca waaxda iibka oo tayo leh iyo qaybaheeda kala duwan waxaana u diyaarin doonaa sannadkaan 2023 gudahiisa.

### 9.1.3. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (2) ee sharciga iibka: Heshiisyada Qandaraasyada libka lama la kala qaybin karo iya-doo ujeedku yahay si looga leexdo xayeynsinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeernidaamiyaha Sharcigan.

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badan yahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyaa Wasaaradda Maaliyadda.

## Khaladka

### A. Kala qaybin lib dhan US \$1,728,217.95

Intii aan ku gudajiray baarista waxa aan ogaaday in maamulka Ciidanka Xoogga Dalka uu kala qaybiyay wax soo iibsi qiimihiiisu dhan yahay US **\$1,728,217.95** si uu uga fogaado xadka loo oggolyahay (thresholds), taasoo lid ku ah Sharciga libka Qodobkiisa 69<sup>aad</sup> (2). Sida ku cad shaxda hoose:

Magaca shirkadda	Ujeedka	Muddada	Lacagta US \$
GG-115	Raashin iyo lidaan	Feb - Dec 2022	\$283,722.50
GG-116	Shidaal iyo Saliid	Jan - Dec 2022	\$390,765.00
GG-117	Raashin iyo lidaan	Jan - Dec 2022	\$137,821.10
GG-118	Raashin iyo lidaan	Jan - Dec 2022	\$ 522,519.15
GG-119	Raashin iyo lidaan	Jan - Dec 2022	\$393,390.20
<b>Wadarta</b>			<b>\$1,728,217.95</b>

## Talo soojeedin

Maamulka CXD waa in aysan kala qeybin iibka, iyadoo ujeedku yahay in laga leexdo xaddiga lagu sheegay sharciga libka iyo habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud inta lagu gufajiro sanadka 2023 iyo sanadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed waxaa ay u kala qaybsan yihiin xarumo kala duwan oo ku kala yaalo wadanka, waxaa ay ku shaqeeyaan daruufo kala duwan, waxaa waajib ah in askariga gudanaayo waajibbaadkiisa shaqo uu helo raashiin si u buuxiyo waajibbaadkiisa.

Ciidamada jooga gobalda ka fog caasimada Soomaaliya waxaa ay dhib ku qabeen in ay helaan raashinka sidaa darteed waxaa hogaanka ku qasbanaaday in col kaste meesha uu joogo looga iibiyo waxa aan badneen oo ay kusii sugtaan raashinka la qorsheeyay.

Hogaanka waxaa uu dib ugu dadaali doonaa in uu saxo, dhameystiro baahiyda ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed ayadoo aan ilaalin doono sharciga wadanka u yaalo.

## 9.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 9.2.1. Sharciga

Dastuurka ku meel-gaarka, cutubka Saddexaad Dhulka, Hantida iyo Deegaanka, Qodobkiisa 43<sup>aad</sup> (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh.

### Khaladka

#### A. Maamulka dhulalka iyo dhismayaasha Ciidanka XDS oo liita

Intii lagu gudajiray baarista, Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (CXDS) waxay ila wadaageen liis ay ku qoranyihiin labo boqol iyo labo (202) xarumood oo iskugu jira xerooyin ciidan, guryaha saraakiisha, talisyada qeybaha & dhulal kale ay leeyihiin Ciidanka Xoogga Dalka. Boqol sodon iyo todoba (137) kamid ah waxa aan u aqoonsanay in ay ku jiraan gacmo gaar ah (Private Control) taas oo ka hor imaanaysa qodobka 43<sup>aad</sup> (2). Faafaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca xerada Ciidanka XDS	Tr.	Gacanta Ciidanka XDS	Gacmo gaar ah & xaalad aan la aqoon
Wasaaradda gaashaandhiga (Muqdishu)	61	14 xero	47 xero
Qeybta 77aad	19	6 xero	13 xero
Ciidanka badda	10	1 xero	9 xero
Kismayo Base	12	4 xero	8 xero
Berbera Base	8	0	8 xero
Ciidanka Cirka	18	3 xero	15 xero
Qeybta 21aad	17	10 xero	7 xero
Qeybta 60 aad	14	7 xero	7 xero
Qeybta 43 aad	10	7 xero	3 xero
Qeybta 54 aad	13	13 xero	0
Qeybta 26 aad	15	0	15 xero
Qeybta 27 aad	5	0	5 xero
<b>Wadarta</b>	<b>202</b>	<b>65</b>	<b>137</b>

### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waa inuu xoojiyaa hanaankooda maamulka hantida si uu dib ugu soo celiyo hantida ka maqan gacantooda ee isticmaalka gaarka ah ku jirta waana in ay u hoogaansmaan shuruucda ku habboon.

### Jawaabta maamulka

*Dhulalka CXDS ay leeyihiin malaheyn Document saxiixan oo horay looga diyaariyay, Sanadkii 2022dii waxa aan ku mashquul saneyn in aan kadiyaarino Document saxiixan oo file gareysan. Sidaas darteed sanadka 2023da waxa aan qorsheynay kuna dadaali doonaa in ay gacanta CXDS ku soo laabtaan Xerooyinka, Guryaha iyo dhulalka ku jira gacanta shacabka Soomaaliyeed.*

### 9.3. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

#### 9.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adhooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

#### Khaladka

##### A. Hubinta gudaha oo ah mid liita

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan oggaaday in maamulka CXDS uusan sameeyn qeybta baaraha gudaha sida uu faryo Qodobka 46<sup>aad</sup> ee sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019. Taasina waxay sababtay islaxisaabtan la'aan iyo in aan la soosaarin warbixita baaraha gudaha oo waqtiyeysan.

#### Talo soojeedin

Maamulka CXDS waa in ay sameeyaan qeybta baaraha gudaha oo wax ku ool ah, si kor loogu qaado hubinta iyo islaxisaabtanka gudaha iyo in la soo saaro warbixin baariseed waqtiyeysan.

#### Jawaabta maamulka

*Hantidhowrka Ciidanka XDS waxa uu Sameeyay baaris 2021dii & 2022 dii, balse hantidhowrka qaranka ayaa imaanayay anagoo weli baaristii kuguda jirna waxa aan katanaasuleynay markasta shaqadii aan kujirnay waxa aan xoogga saareynay sida aan ula fududeyn leheyn barista hantidhowrka guud ee qaranka.*

*Sidaas darteed 2023da waxa aan qorsheynay in aan baaris kusameyno xili hore lana wadaagi doono warbixinta Hantidhowrka Guud ee qaranka.*

### 9.3.2. Hannaanka la isku-waafaqsan yahay

Hannaanka la isku-waafaqsan yahay ayaa dhigaya: hantida DFS waa mid leh beeqaamin, ammaan-no sugan, lehna mas'uuliyad cayiman iyo isla-xisaabtan hufan.

#### Khaladka

##### A. Shidaal si joogta ah u daadanaya

Intii ay socotay baarista Taliska Ciidanka Xoogga Dalka waxa aan aragnay shidaal badan oo si joogto ah u daadanaya, kaas oo ay sababtay dayacaad ka jirta xagga tubooyinka marka lagu shubayo haanta keydka shidaalka iyo marka uu qaadanayo gaadiidku.

##### B. Xarunta shidaalka Ciidanka XDS ma lahan qalabka dab-damiska

Intii aan ku guda jiray baarista waxa aan ogaaday in xarunta keydka iyo bixinta shidaalka Ciidanka Xoogga Dalka aysan lahayn wax agab dab-damis ah.

#### Talo soojeedin

Waa in la sameeyaa lana diyaariyaa agabka ka hortagga gubashada. Waa in shidaalka daadanaya xal waara loo helo inta lagu guda jiro sannadka 2023.

#### Jawaabta maamulka

*Hoggaanka Saadkawaxa uusi qadarin leh oga jawaabayaa su'aasha ku saabsaneyd xaalada xun oo kaalinta shidaalka ku sugan yahay.*

*Waxaa sababay dhismo la'aan iyo dayac anaga naga weyn oo hadii gacan nalagu siin waxaba anan ka qaban karin.*

*Codsi badan ayaan dirsanay anagoo ku baaqeyno in maalgelin lagu sameeyo barta shidaalka si looga gudbo dhibaatooyinka taagan oo kala ah: -*

- 1. Khatar ka dhalan karta keyd xumada shidaalka oo waxaa loo baahan yahay in haamo dhulka looga qodo.*
- 2. In bambada shidaalka laga shaqeysiiyo si looga gudbo shidaalka khasaara oo dhulka kudaata.*
- 3. In caafimaadka shubayaasha la daryeelo oo laga bixiyo xaalada xun oo shidaalka tubo lagu dhuuqo.*

## 9.4. MARXALADDA BAARISTA SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 9.4.1. Khaladdaadka baarista sannadkii hore 2021

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda Khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Ciidanka XDS in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin:

Khaladdaadka	Marxaladda
12.3.1 Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka	Lama fulinin
12.3.3 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ	Lama fulin
12.4.1. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin	Lama fulin



# 10. CIIDANKA ASLUUBTA SOOMAALIYEED (CAS)

## 10.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 10.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka 2022

Intii baaristu socotay, waxa aan ogaaday in maamulka Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed uu sameeyay wax soo iibsi dhan US **\$2,596,416.00** iyadoon laheyn qorshe iib sannadle ah taasoo lid ku ah Qodobka 27aad ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016, Qodobkiisa 27<sup>aad</sup> (1 & 4). Sida lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xige	Faah-faahin	Lacagta US \$
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	\$ 10,944.00
2221	Hawlaha Guud	\$ 33,000.00
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	\$ 286,000.00
2224	Agabka iyo Alaabaha	\$ 164,996.00
2225	Dayactir iyo Hagaajin	\$ 87,996.00
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo adegyada	\$ 2,013,480.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$ 2,596,416.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed waa inuu sameeyaa qorshe iib sannadle ah inta lagu guda jiro sannadka 2023, kaas oo mudnaanta siinaya hawlaha ugu muhiimsan kuna saleysan miisaaniyadda loo ansixiyay Taliska Ciidanka Asluubta.

### Jawaabta maamulka

*Waan aqbalnay talo soojeedinta xafiiska hanti dhowrka qaranka, waxa aan ku diyaarin doonaa sanadka gudihiisa 2023, haddi Alle idmo.*

### 10.1.2. Sharciga

Qodobka 58<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi lib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha (Taliyaha Ciidanka AS) sida soo socota:

- a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda.

61<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin waa in ay dhistaa Waax lib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

62<sup>aad</sup> (2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska libka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska libka.

## Khaladka

### A. Waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed uu sameeyay wax soo iibsho agab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$2,596,416.00** iyagoon dhisin waaxda iibka iyo guddiga qiimaynta, taasoo aan waafaqsanayn Sharciga libka iyo Qandaraasyada qaranka 2016.

## Talo soojeedin

Waa in Maamulka Ciidanka Asluubta uu abuura waaxda iibka sidoo kalena uu magacaabaa guddiga iibka iyo qandaraaska inta lagu guda jiro sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Waan Aqbalnay Talo Soojeedinta Xafiiska Hanti Dhowrka Qaranka, waxa aan Ku Diyaarin Doonaa wixii Qorsha Ah Anadka Gudihisa 2023, Haddi Alle Idmo.*

## 10.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 10.2.1. Hannaanka la isku waafaqsanyahay

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aadan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa.

#### Khaladka

##### A. Maamulka Gaadiidka oo ah mid liita

Muddadii lagu gudajiray baarista waxaa baarista XHG lala wadaagay liiska soddon iyo seddexda (33) gaari oo la sheegay in ay leeyihiin Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, kuwaas oo aan wadan dukumiintiyo muujinaya lahaanshiyaha Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

Intaa waxaa dheer, labo iyo toban (12) gaari oo ka mid ah soddon iyo seddexda (33) ayaan muuqaal ahaan loo xaqiijin. Faafaahinta liiska 12 gaari ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nuuca Gaariga	Caqaayad Lr.	Faah-faahin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Cabdi bile	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Qooqan	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Qooqan ford	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Qooqan ford	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Haartoob	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Iska roge	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin
Ambalaas	Lama diiwaangelin	Muuqaal ahaan looma xaqiijin

#### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed waa inuu sameeyaa diiwaan dhammaystiran oo faahfaahinaya macluumaadka la xariira gaadiidka hay'adda.

#### Jawaabta Maamulka

*Waan Aqbalnay Talo Soojeedinta Xafiiska Hanti Dhowrka Qaranka, waxa aan Ku Diyaarin Doonaa wixii Qorsha Ah Sanadka Gudahiisa 2023, Haddi Alle Idmo.*

## 10.2.2.Sharciga

Dastuurka ku meel-gaarka,cutubka Saddexaad Dhulka, Hantida iyo Deegaanka Qodobkiisa 43<sup>aad</sup> (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, wax soosaar waarana leh.

### Khaladka

#### A. Maamulka dhulalka iyo dhismayaasha Ciidanka Asluubta ayaa ah mid liita

Intii lagu gudajiray baarista, Taliska Ciidanka Asluubta waxaa baarista lala wadaagay liiska shan iyo taban (15) xarumood oo iskugu jira beero iyo ceelal ay leeyihiin Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, kuwaas oo aan lahayn dukumiintiga lahaanshiyahooda. Saddex iyo toban (13) ka mid ah xarumahaas ayaa ka maqan gacanta maamulka Taliska Ciidanka Asluubta, taasoo lid ku ah Qodobkiisa 43 ee Dastuurka Ku Meel-gaarka. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay jaantuska hoosse:

Magaca Xarunta	Goobta	Cida maamusha
Beeraha Jahaweyn	Laanta Buure	Waxaa degan shacab
Beerta Waayo Arag	laanta Buure	Asluub
Beerta Mudulka Afgooye	Af-gooye	Asluub
Beerta Carbiska ilaa Itop	Afgooye	Waxaa degan shacab
Beerta Jambaluul	Af gooye	Waxaa degan shacab
Beerta Beled Amiin	Af gooye	Waxaa degan shacab
Beerta Sabiib iyo Caanoole	Af gooye	Waxaa degan shacab
Beera Janaale Marko	Buufow	Waxaa degan shacab
Beerta Canabka	Baydhabo	Waxaa degan shacab
Ceelka Biyaha Waayo Arag	Laanta Buure	Waxaa degan shacab
Laba beerood Garaash Borogaraam	Hiiraan	Waxaa degan shacab
Beerta inbigaati	Afgooye	Waxaa degan shacab
Beerta Mijacaseey	Mijaciseey	Waxaa degan shacab
Beerta Alwaaxa	Laas qoray	Waxaa degan shacab
3 beerood jowhar	Jowhar	Waxaa degan shacab

### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed waa inuu soo sameeyo dukumiintiyada lahaanshiyaha dhulalka iyo dhismayaasha una maamulo si waxtar waara u leh Ciidanka Asluubta inta lagu guda jiro sannadka 2023.

### Jawaabta maamulka

*Waan Aqbalnay Talo Soojeedinta Xafiiska Hanti Dhowrka Qaranka, waxa aan Ku Diyaarin Doonaa wixii Qorsha Ah Anadka Gudahiisa 2023, Haddi Alle Idmo.*

## 10.3. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

### 10.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adhooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyaasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

### Khaladka

#### A. Hubinta gudaha oo ah mid liita

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan oggaanay in maamulka Ciidanka Asluubta uusan sameeyn qeybta baaraha gudaha sida uu farayo Qodobka 46<sup>aad</sup> ee sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019. Taasina waxay sababtay islaxisaabtan la'aan iyo in aan la soosaarin warbixinta baaraha gudaha oo waqtiyeysan.

#### Talo soojeedin

Maamulka Ciidanka Asluubta waa in ay sameeyaan qeybta baaraha gudaha oo wax ku ool ah, si kor loogu qaado hubinta iyo islaxisaabtanka gudaha iyo in la soo saaro warbixin baariseed 2023 oo waqtiyeysan.

### Jawaabta maamulka

---

*Waan Aqbalnay Talo Soojeedinta Xafiiska Hanti Dhowrka Qaranka, waxa aan Ku Diyaarin Doonaa wixii Qorsha Ah Anadka Gudihisa 2023, Haddi Alle Idmo.*

---

## 10.4. MARXALADDA BAARISTA SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 10.4.1. Khaladdaadka baarista sannadkii hore 2021

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda Khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Ciidanka Asluubta in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.:

Khaladdaadka	Marxaladda
10.2.1 Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka	Lama fulinin
10.2.2 Heshiisyo ayaan laga soo diiwaangalin XHGQ	Waa la fuliyay
10.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida	Lama fulinin





### III. HAY'DAHA DHAQAALAHA



# 11. WASAARADDA TAMARTA IYO KHEYRAADKA BIYAHA (WTKHB)

## 11.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 11.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) & (4), Sharci Lr. 22, Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016, ayaawaxa uudhigayaa sida hoos ku xusan:

27(1) Dhamaan Hay'adaha qandaraaska libka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sanadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaa kale ee sharcigan. Qorshaha Qandaraaska libsigawaxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay Hay'adda qandaraaska iibka.

27(4) Qorshaha qandaraaska libka waxaa lagu daabacayaa websaytka quseeya kaddib markii la ansixiyo. Daabacaadda Qorshaha Qandaraaska.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$32,472.00**, iyadoon laheyn qorshe iib sannadle ah, taasoo lid ku ah sida uu qabo Qodobka 27<sup>aad</sup> (1), (4) ee Sharciga libka Qaranka iyo Qandaraasyada 2016; faahfaahinta ayaa ku cad shaxda hoose:

Magaca qandaraaslaha	Madax-xige	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-120	2221	Howlaha Guud	\$12,491.00
GG-121	2224	Agabka iyo Alaabaha	\$7,491.00
GG-122	2225	Dayactir iyo Hagajin	\$4,990.00
GG-123	2223	Shidaal iyo saliid	\$7,500.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$32,472.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulku waa in uu diyaariyo oo ansixiyaa qorshe sannadeedka wax soo iibsiga oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee Wasaaradda.

Sarkaalka Idman waa in uu diyaariyaa qorshaha iibka sannadka 2023. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaan siiyaa hawlaha ugu muhiimsan ee adeeg bixinta hufan.

### Jawaabta maamulka

*Wasaaradda waxay sameysan doontaa qorshe iib ee sanadle ah inta lagu guda jiro sanadka 2023, waan dhaqan galineynaa soo jeedinta hantidhowrka guud ee Qaranka sida ugu dhaqsiiyaha badan.*

## 11.1.2. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

1. Habraacyada xulashada hordhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqoonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

a) Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo

b) Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran

2. Casumaadda xulidda hordhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiya Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo baahin la'aanta adeeg bixiyayaasha laga soo iibiyay agabka iyo adeegga

Intii aan ku guda jirnay baaristan waxa aan ogaannay in maamulka Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ay sameeyeen wax soo iibsasho ay ku baxday kharash u dhexeeya \$2,001 iyo \$50,000, kaasoo afar (4) adeeg bixiyayaal loo oggolaaday in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay **\$32,472.00** iyadoon la sameyn xulasho hordhac ah (prequalification), taasoo lid ku Qodobka 19 iyo Xeerka Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca qandaraaslaha	Madax-xige	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-120	2221	Howlaha Guud	\$12,491.00
GG-121	2224	Agabka iyo Alaabaha	\$7,491.00
GG-122	2225	Dayactir iyo Hagajin	\$4,990.00
GG-123	2223	Shidaal iyo saliid	\$7,500.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$32,472.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaraddu waa in ay sameeyaan xulasho hordhac ah (Prequalification) ee adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023.

## Jawaabta maamulka

Wasaaraddu waxay dhaqan gelin doontaa xulasho hordhac ah (Prequalification) ee adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sareeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023. Si waafqsan sharciga iibka Qaranka.

## 11.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIDA

### 11.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup>(1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci Lr 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

Qodobka 38<sup>aad</sup>(1). Dhammaan deeqaha ay Hay'ad Dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka.

Qodobka 38<sup>aad</sup>(2) Looma ogola hay'ad Dawladeed iyo mid Sharikad/Wakaalad Dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

### Khaladdaadka

#### A. Wadar lacageed oo dhan US \$2,218,672.16 ayaan ku jirin miisaaniyadda dowladda

Intii lagu guda jirey baarista waxa aan ogaaday in Wasaaraddu fulisay afar (4) mashruuc oo aan ku jirin miisaaniyadda DFS kuwaas oo qiimahoodu dhan yahay US **\$2,218,672.16**. Wasaarada Tamarta & Kheyraadka Biyaha ma qaadin talaabbooyinka ku habboon oo lagu hubinayo deeqaha si loogu daro miisaaniyadda iyo khasnadda dowladda Federaalka ah ee Somaaliya. Faahfaahintaa ayaa ku xusan shaxda hoose:

Magaca mashruuca	Magaca deeq bixiyaha	Muddada heshiiska	Kutalagalka lacageed US \$	Caddadka la isticmaalay US \$
MOEWR /UNICEF MICRO PLAN	UNICEF / FAO	Jan - Dec 2022	\$1,858,968.65	\$1,703,744.56
GIZ Sustainable Water Resource Management in Somalia	GIZ	Jan - Dec 2022	\$91,323.51	\$35,480.00
Integrated Water Resource Management Project	UNDP	Jan - Dec 2022	\$67,600.00	\$67,600.00
Integrated Water Resource Management UNDP SIDA Project	UNDP	Jan - Dec 2022	\$200,780.00	\$200,780.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$2,218,672.16</b>	<b>\$2,007,604.56</b>

#### B. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyadda ee heshiis deeq

Inta lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in Wasiirka Maaliyaddu aanu dhinac ka saxiixin (Co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha taas oo lid ku ah Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

## Talo soojeedin

Waa in Maamulka Wasaaradda uu dhammaan deeqaha hay'addu hesho ku daraa miisaaniyadda DFS laguna maamulaa Khasnadda Middaysan (TSA).

Hadii ay jiraan waxyaabo si gaar ah loogula heshiiyay hay'adaha Hay'adaha Qaramada Midoobay waa in dukumiintiyada heshiisyada iyo miisaaniyadda DFS lagu caddeeyo.

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee hay'addu gasho uu dhinac ka saxiixo (Co-sign) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023 iyo sannaddada xiga.

## Jawaabta maamulka

*Wasaaradda waxay hirgelin doontaa Talo soojeedinta hantidhowrka Guud ee Qaranka.*

### 11.2.2. Sharciga

Qodobadda 9<sup>aad</sup> (7) iyo 42<sup>aad</sup> (3) ee Sharci Lr.17 Maamulka iyo Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 waxa uu sheegayaa sida soo socota:

9 (7), Wasiirka Maaliyaddawaxa uuansaxin doonaa furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha dowladda 42 (3), Looma furi doono Xisaab bangi ha ahaato mid dalka gudihiisa ah ama dibeddiisa Hay'adaha Dowladda iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud.

## Khaladka

### A. Koonto xisaab bangi ayaa la furey, ansixin iyo oggolaansho la'aan

Intii lagu guda jirey baaristan ayaa waxa aan ogaaday in maamulka Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ay fureen ayna howlgaliyeen afar (4) koonto xisaabeed, oo laga kala furay Amal Bank iyo Dahabshiil Bank iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud sidoo kalena uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Faahfaahinnada koontooyinka ayaa ka muuqda shaxda hoose:

Magaca bangiga	Kooto Lr.	Lacagta la helay US \$	Wadarta la isticmaalay US \$
Dahab Shiil	104102804	\$1,858,968.65	\$1,703,744.56
Dahab Shiil	104112497	\$91,323.51	\$35,480.00
Amal Bank	1013106109	\$67,600.00	\$67,600.00
Amal Bank	1014007645	\$200,780.00	\$200,780.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$2,218,672.16</b>	<b>\$2,007,604.56</b>

## Talo soojeedin

Waa in Wasaaraddu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka

Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontooyinka bangi ee sare ku xusan.

Furitaanka koonto bangi ee Sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannada xiga waa in lagu sameeyaa kaliya markii loo helo oggolaansho iyo ansixin.

## Jawaabta maamulka

*Wasaaraddu waxay ku dadaalaysaa inay ogeysiiso isla markaasna ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda koontooyinka bangi ee Wasaaradda u furan bangiyada gaarka loo leeyahay.*

### 11.3. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

#### 11.3.1. Sharciga

Qodobka 43<sup>aad</sup> (2) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah (DKMG) ah ee DFS ayaa dhigaya in Dhulka lagu hayo, loo isticmaalo, laguna maamulo si siman, hufan, lehna wax-soo-saar, iyo hab waara.

#### Khaladdaadka

#### A. Guryaha iyo dhulalka Wasaaradda oo aan loo hayn dukumiintiyada lahaanshiyaha

Intii aan ku gudajiray baarista, ayaa Maamulka Wasaaraddu waxa uuila wadaagay liiska shan iyo toban (15) dhulal bannaan iyo kuwo ay dad shacab ah deganyihiin kuwaas oo sida la sheegay ay leedahay Wasaaraddu, in kastoo maamulku aysan nala wadaagin dukumiintiyada lahaanshiyaha dhulalka. Liiska guryaha iyo dhulalka waxay kala yihiin; qeyb bannaan, qeyb gacan shaqsiyaad gaar ah ku jirta iyo qeyb maamulka wasaaraddu kireeyay, iyada oo aysan jirin hanaan iyo habraac ku aaddan maamulka guud ee hantida. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nuuca hantida	Goobta	Faahfaahin
Dhismaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha	Dagmada Hodan	Malahan dukumiintiga lahaanshiyaha kana maqan gacanta maamulka wasaaradda
Dhismaha Wakaaladda hormarinta Biyaha Soomaaliyeed	Dagmada wadajir	
Xarunta Ceelasha-biyaha ee Afgooye	Ceelasha-biyaha)	
Xarunta Ceelasha-biyaha (Ceel Carfiid ee Balcad)	Dagmada Balcad	
Xarumaha keydinta biyaha (7A&7B)	Hodan Agagaarka Warshada Caanaha	
Haanta Sanca	Dagmada Kaaraan	
Xarunta buusaka	Dagmada Warta-nabadda	
Xarunta biyaha ee Ceel Tuba-weyne	Dagmada Yaaqshiid	
Xarunta Dab-dhalinta	Dagmada Howl-wadaag	
Xarunta xafiisyadda wakaaladaha (Devicenza)	Dagmada Xamar-weyne	
Xaruntii Jaziira	Dagmada Wadajir	
Xaruntii 21-Oktoober	Dagmada Howl-wadaag	
170 Sub-stations	Goobo kala gedisan	

Nuuga hantida	Goobta	Faahfaahin
Garaashka Dhismaha Wakaaladda Horumarinta Biyaha Soomaaliya	Dagmada Wadajir	Malahan dukumi-intiyada lahaanshiyaha balse gacanta maamulka wasaaradda ayay ku jiraan
Dhismaha Wakaaladda Biyaha Xamar	Dagmada Wadajir	

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Tamarta waa in ay ku dadaallaan dib-u-soo celinta dhammaan guryaha iyo dhulalka ay leedahay ee ka maqan gacanta Wasaaradda laga billaabo sannadka 2023. Maamulka Wasaaraddu waa inay sameeyaan dukumentiyada lahaanshaha.

## Jawaabta maamulka

*Maamulka Wasaaradda Tamarta waxay ku dadaalayaan dib-u-soo celinta dhammaan guryaha iyo dhulalka Wasaaraddu leedahay ee ka maqan gacanta Wasaaradda.*

### 11.3.2. Hannaanka la iskuwaafaqsan yahay (Best Practice)

Dhammaan gaadiidka hay'addu waa in ay leeyihiin buugga lahaanshiyaha iyo sidoo kalana ay ku diiwaan gashan yihiin magaca hay'adda. Si loo hirgaliyo isla xisaabtan ku aaddan xaaladda, isticmaalka iyo waxtarka hantida iyo in go'aanka dhaqan-ka-baxa hantida lagu saleeyo habraaca ugu habboon ee dib looga heli karo qiimihiisa.

## Khaladka

### A. Hannaanka maamulka gaadiidka oo liita

Waxaan baarista ku ogaaday in ay jiraan afar (4) gaari oo ay leedahay Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (WTKHB) oo dhammantood aan lagu diiwaangelin magaca Wasaaradda, halka Saddex (3) ka mid ah ay ka maqan yihiin gacanta maamulka Wasaaradda, sidoo kalana looma keenin baarayaasha si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo. Liiska baabuurta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Nuuga Gaadiidka	Cidda libisay	Chassis Lr.	Cidda isticmaasha
Toyota Hilux Double Cabin pickup	AFDB	MR0DB8CD900172554	Ex- Wasiir dowlahii hore
Toyota Hilux Double Cabin	UNDP	LAW1251-DNMXEN	Ex- Wasiir hore
Toyota Hilux Double Cabin	IOM	GUN1251-DTFHLV/ AO241RH	Ex- Wasiir hore
Toyota Hilux Double Cabin	African Development Bank	MR0DB8CD100172774	Wasiir ku xigeenka hadda

## Talo soojeedin

Dhammaan gaadiidka Wasaaraddu waa inay lahaadaan buuggaagta lahaanshaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda loona asteeyaa sarkaal sare oo mas'uul ka ah la socodka iyo maamulka gaadiidka.

Dhammaan gaadiidka waa in lagu diiwaangeliyaa diiwaanka hantida oo ay ku jiraan faahfaahinta sida nooca gaadiidka, lambarka caqaayadda, goobta iyo qiimaha, sidoo kale waa inta lagu guda jiro sanadka 2023 lagu soo celiyaa gaadiidka ka maqan gacanta wasaaradda. Diiwaanka hantida waa in loo cusboonaysiiyaa si waqtiyeysan.

## **Jawaabta maamulka**

---

*Dhammaan gaadiidka Wasaaraddu waxaa loo sameynayaa buuggaagta lahaanshaha oo ku diiwaan gashan magaca Wasaaradda waxaana loo asteeyn doonaa sarkaal sare oo mas'uul ka ah la socodka iyo maamulka gaadiidka.*

*Dhammaan gaadiidka waxa aan ku diiwaangelin doonaa diiwaanka hantida oo ay ku jiraan faahfaahinta sida nooca gaadiidka, lambarka caqaayadda, goobta iyo qiimaha.*

*Sidoo kale inta lagu guda jiro sanadka 2023, waxa aan ku dadaalaynaa anagoo kaashanayno Hantidhowrka qaranka inaan so celino gaadiidka ka maqan gacanta wasaaradda.*

*Waxaan dib u cusbooneysiineynaan Diiwaanka hantida si waqtiyeysan.*

---

## 11.4. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

### 11.4.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adahooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

### Khaladka

#### A. Hubinta gudaha iyo warbixinta baaraha oo liita

Inta lagu gudajiray baarista, waxa aan ogaaday in hubinta gudaha ee WTKHB ay liidato maadaama aysan Waaxda Baarista Gudaha sameyn baaris soona saarin warbixinno. Taasoo lid ku ah Qodobka 46aad (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Lr. 17.

### Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Tamarta iyo Kheeyraadka Biyaha waa in ay fuliyaan baarista gudaha oo madax-bannaan, isla markaana baaraha gudaha uu soo saaro warbixino baariseed tayo sare leh oo waqtiyeysan (Periodic Internal Audit Report) laga billabo sannadka 2023.

### Jawaabta maamulka

*Waxaan baaraha gudaha u hergelin waynay waxay ahayd miisaaniyad (Budget) la'aan. Maamulka Wasaaradda isagoo la kaashanaayo madaxda Wasaaradda waxa aan hergelin doonaa sida ugu dhaqsiiyaha badan Baaraha Gudaha.*



## 11.5. MARXALADDA BAARISTII SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 11.5.1. Khaladdaadka baarista sannadkii 2021

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda Khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Wasaaradda Tamarta iyo kheyraadka biyaha in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

Khaladdaadka	Marxaladda
25.1 Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka 2021	Wali lama fulin
25.2 Qeybta Maamulka lib iyo Qandaraasyada oo aan la sameyn	Wali lama fulin
25.2.2. Heshiisyadda oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ	Wali lama fulin
25.3.A. Koontooyin bangi la furay iyada oo aan oggolaansho iyo ansixin loo haysan	Wali lama fulin
25.4.A. Deeqaha dibadda oo aan lagu darin Nidaamka maaliyadeed ee SFMIS.	Wali lama fulin
25.5.A. Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo cusboonaysiin	Waa la fuliyay
25.5.B. Maamulka Gaadiidka oo ah mid liita	Wali lama fulin

## 12. HAY'ADDA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED

### 12.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

#### 12.1.1. Sharciga

Qodobka 58<sup>aad</sup> (1), (2), iyo (3) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

1. Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi lib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha sida soo socota:
  - a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
  - b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda; Qof wakiila oo hawsha dhamadkeeda kushaqaleh iyo isku duba ridka.
2. Xoghayaha Guddiga Qandaraaska libka ayaa noqonaaya Madaxa Waaxda Qandaraaska libka.
3. Guddiga Qandaraaska libka waxay u adeegsan karaan la taliyeyaal adeegga la tashiyada ama u hawgeliyaan wakiilada macaamisha ugu dambeyn isticmaalaya adeegga, iyo dad u leh xirfad gaar ah iyo waaya aragnimo ku habboon si hufana u gudanaaya hawlaha.

#### Khaladka

##### A. Maqnaanshaha Guddiga Qandaraaska libka ee sannadka

Waxaan baarista ku ogaaday in maamulka Hay'adda Duulista Rayidka uu sameeyay wax soo iibsasho dhan US **\$4,411,694.00**, iyadoon la dhiso guddiga iibka qandaraasyada, arrintaas oo lid ku ah Qodobka 58<sup>aad</sup> (1), (2), iyo (3) ee Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyey jaantus ka hoose:

Madax-xige miisaaniyad	Faahfaahin	Lacagta US \$
2261	Kharashaadka Guud ee kale ee Aggabka iyo Adeegga	\$1,239,480.00
2225	Hagaajin iyo dayactir	\$544,520.00
2224	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	\$241,740.00
2223	Saliid iyo shidaal	\$34,319.00
2211	Sahay safar	\$200,772.00
2221	Hawlaha Guud	\$689,690.00
2312	Qalabka iyo aaldaha	\$375,780.00
2313	Hantida kale ee go'an	\$1,000,176.00
2243	Kharashaadka Maalgalinta	\$2,960.00
2311	Dhismayaasha	\$27,195.00
2241	Kharashaadka waxbarasha iyo tobobarada	\$55,062.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$4,411,694.00</b>

## Tala soo jeedin

Maamulka hay'addu waa in uu sameeyo guddi qandaraas iib sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta Maamulka

*Sida laga arki karo Dukumiintiyada iibka ee hay'ada, hay'ada duulista rayidka somaliyeed waxay leedahay guddi iib kaas go'aan ka gaara qandaraasyada ay hay'adu bixiso. sida kucad lifaaqa 1aad iyo lifaaqa 2<sup>aad</sup>.*

## Jawaabta XHGQ

Maamulka HDRS ma raacin hanaankii saxda ahaa ee dhismaha guddiga iibka sida uu qorayo Sharciga iibka iyo Qandaraasyada Qaranka Lr. 22 ee 2016 qodobkiisa 58aad (1) a & b:

58<sup>aad</sup> (1) Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi iib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha sida soo socota:

- a) Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- b) Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda.

### 12.1.2. Sharciga

Qodobka 69<sup>aad</sup> (1) iyo 88<sup>aad</sup> (1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci Lr 17, 2016 oo sheegaya sida soo socota:

69 (1) Qandaraaska libka Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.

88 (1) Codsiga habraaca qiimo-sheegta waxaa la sameeynayaa marka qiimaha qandaraaska ee loogu talagalay badeecadaha, hawlaha iyo adeegga uu ka hooseeyo qiimaha lagu xusay Xeer ni-daamiyaha.

88 (2) Marka codsiga habraaca qiimo-sheegta loo adeegsanaayo asbaabaha lagu xusay Faqradda 1aad ee Qodobkan awgeed, Hay'adda libku waxay ka dalbaneysaa qiimo-sheegta tiro kooban oo ugu yaraan saddex tartamayaal dalab oo u qalma laguna xushay qaab aan takoorid lahayn.

## Khaladka

### A. Waxaa lagu guuldarraystay in la qabto tartan furan ee qandaraasyada

Maamulka HDRS waxuu ku guuldarraystay in uu qandaraasyada ku bixiyo hab tartan furan, iyadoo isticmaalay xulasho tartan la'aan ah wax soo iibsasho wadarta qiimahoodu dhan tahay US **\$462,120.37**, taasoo ka hor imanaysa Qodobka 69 ee Sharciga iibka iyo Qandaraasyada Qaranka ee 2016. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca shirkada	Faahfaahin	Muddada	Lacagta US \$
GG-132	Telefoon iyo Internet	8 Billood	\$152,756.75
GG-133	Koronto	11 Billood	\$264,277.34
GG-134	Agab	1 Bil	\$5,819.89
GG-135	Adeegga Satellite iyo UPS	1 Bil	\$39,266.39
<b>Wadarta</b>			<b>\$462,120.37</b>

## Tala soo jeedin

Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed waa in ay u hoggaansantaa sharciga iibka iyo qandaraasyada, ayna ka codsato saddex shirkadood oo kala duwan warqadda qiimeynta (quotation) si loo xaqiijiyo sinnaanta hannaanka iibka laga billabo sannadka 2023 iyo sannadaha xiga.

## Jawaabta maamulka

### 1-Hormuud:

Hormuud waxay hishiis kula jirtay projectigii ICAO FISS ee si kumeel gaar ah logu maamulaayay hawada somaliya waxaana nalagu soo wareejiyay ayadoo ay rakibteen qalab sidoo kalana ay dhigteen Fiber kaybalo dhamaan xarumaha hay'ada , anakoo arinkaas tix galinayna ayaa waxa lagu xushay siyaabahan hoos ku xusan:

1-Hormuud waxa ay bixinaysay adeeg internet oo taya sare leh isla markaana la isku halayn karo marka labar bardhigo adeegga internet ee wadanka kajira

2- waxa kale oo aynu ka helnaa adeega taleefoonka kaasi oo ah kan kaliya ay sifudud isku heli karaan hawl wadeenada ka shaqeeya hagista diyaaradaha, taawarada iyo garoomada.

3- Marka lagasoo tago qodobada kore, hormuud waa shirkada ugu way ee haysata macaamiisha ugu badan dhanka adeega taleefoonada taasna waxay inoo sahlayaa inaan sifudud ay ku xariiraan shaqalaha hawada kashaqaynayah iyo ciday adeega siinayaan.

### 2-BECO

Shirkada BECO ayadana waxay hishiis kula jirtay projectigii ICAO FISS ee si kumeel gaar ah logu maamulaayay hawada somaliya waxaana nalagu soo wareejiyay ayadoo ay rakibteen qalab ay kamid yihiin Dabxoojiyayaal waa wayn, dhigtana Kaybalo qaada qaybiyana korantada.

Markii lafiiriyo Qalabka inoo yaal oo ubaahan koronto la isku halayn karo, islar kaasina la fiiriyo awooda korontada uu ubaahan yahay system yada inoo yaal, si joogta ahna loo heli koro, ayaa waxa aan doorbidnay inaan lasii wadno heshiiskii hore ee ay hay'da kula jirtay.

### 3- Hirmieu international supply

Shirkadaan si lamid ah shirkadihii hore waxaa hishiiskii kobaad lagalay projectigii ICAO FISS, ayagoo dhib badan kamaray markii uhoraysay maadama ay Somaliya ay saarantahay xayiraado caalimi ah, wada hadalo dheer kadib ayay usuurta gashay in ay ka yeelaan in ay wax kagadaan somaliya. Sidaas ayaana anakuna kusii wadnay kagadashada warqadaha loo yaqaan stribes ka

Sababaha ugu waa way nee aan shirkadaan ugu xiranahay waa :

1-Alaabteeda oo si fudud ayaa lagu heli karaa logistic ahaan

2- shirkadaha adeegaan bixiyaha way adagtahay inaan in ay waxka gadaan Somaliya, sidaasi darteed wax-

aa dadaal badan galinay sidii wadashaqaynta kambanigaan iyo dawlada somaliya usii socon lahayd una wanaagsanaan lahayd.

4-DELCOM:

Shirkadaaan waxay iskuugu kaaya xirtay seddex xarumood oo kala ah xarunta dhexe ee HDRS ee Muqdisho iyo xarumaha kale ee hay'ada kuleedahay gobolada dalka sida bosaso iyo garawe ayadoo isticmaalaysa adeega satellite ka,

Sababta aan ku dooranay waxa aan oganay inay tahay shirkada Kaliyah ee awood buuxda uleh in ay isku xirto xarumaha hay'ada ee gobolada dalka siisana adeeg la isku halayn karo, aana go,ayn, haday cilad ti-maadana ay ku xalin karaan wakhti kooban.

Sidoo kale waxa intaasi dheer marka laga fiiriyo cidhiidhiga maaliyadeed ee waddanku ku jiro waa shirkadda kaliya ee inaga sugi karta ama ogolaan karta in ay adeeg ina siiso iyada oo aan helin lacagtii addeegaasi , waxaana tusaale inoogu filan in Bishan aynu hadda ku jirno ay wali inagu leedahay addeegii sannadkii hore ee tagay 2022 halka aynu bixinay lacagta qalabka iyo kharashaadka rikibstiisa halka ay baaqi inagu tahay lacagtii khidmada ee "satellite capacity service".

---

## Jawaabta XHG

Maamulka Ha'adda Duulista Rayidka iskuday ayuu sameeyay balse waa in ay u fuliyaan sifo sharciga waafaqsan.

## 12.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 12.2.1. 12.2.1. Sharciga

Cutubka Saddexaad ee Dastuurka JFS: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka

Qodobka 43aad. Dhulka (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, wax soo saar waarana leh.

### Khaladka

#### A. waxa aan la hayn dukumintiyada diiwaanka iyo lahaanshiyaha dhismayaasha hay'adda

Intii lagu guda jiray baarista, maamulka hay'addawaxa uumaamulka ila wadaagay email xaqiijinaysa in aysan haysan dukumiintiyada diiwaanka iyo lahaanshaha xarumaha Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed. Faafaahinnadda ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca xarunta	Shaqada lagu fuliyo	Degmada	Xaaladda
Xarunta HDRS	Xarunta Kontoroolka Hawada & Maamulka	Wadajir	Ma lahan dukumiinti lahaansho
Xarunta HDRS	Degaanka iyo Iskuulka hay'adda Duulista Rayidka	Waaberi	Ma lahan dukumiinti lahaansho

### Tala soo jeedin

Maamulka HDRS waa in uu sameeyaa dukumentiyada lahaanshaha iyo diiwaannada ee dhammaan xarumaha ay ku shaqeeyaan, ayna hubiyaan in dukumentiyadaasi ay ku soo baxaan magaca hay'adda.

### Jawaabta maamulka

*Hay'ada duulista rayidka somaliyeed wali waxay diyaar utahay inay qaadato isla markaasna fuliso Talo soojeedinta xafiiska hanti dhawrka guud ee qaranka.*

## 12.3. MARXALADDA BAARISTII SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 12.3.1. Khaladdaadka baarista sannadkii hore 2021

Shaxda hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Hay'adda Duulista Rayidka Saadaasha Hawada in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin. 2021

Khaladdaadka	Marxaladda
Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ	Lama fulin
Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga	Lama fulin



## IV. HAY'DAHA ARRIMAHA BULSHADA



# 13. JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED (JUS)

## 13.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 13.1.1. Sharciga

Qodobka 58<sup>aad</sup> (1), (2), iyo (3) ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

58 (1) Hay'ad kasta oo libin, waa inay abuurtaa Guddi Iib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha sida soo socota:

- Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda libinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
- Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda; Qof wakiila oo hawsha dhamadkeeda kushaqaleh iyo isku duba ridka.

58 (2) Xoghayaha Guddiga Qandaraaska libka ayaa noqonaaya Madaxa Waaxda Qandaraaska libka.

58 (3) Guddiga Qandaraaska libka waxay u adeegsan karaan la taliyeyaal adeegga la tashiyada ama u hawgeliyaan wakiilada macaamisha ugu dambeyn isticmaalaya adeegga, iyo dad u leh xirfad gaar ah iyo waaya aragnimo ku habboon si hufana u gudanaaya hawlahiisa.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha guddiga qandaraaska iibka

Waxaa baarista ku ogaaday in Maamulka libka JUS uu sameeyay wax soo iibsasho dhan **\$48,577.00**, iyada oo aan la dhisin guddiga iibka qandaraasyada, arrintaas oo lid ku ah Qodobka 58aad (1), (2), iyo (3) ee Sharci Lr. 22 Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyey jaantus ka hoose:

Madax-xige	Faahfaahin	Iacagta US \$
2261	Kharashaadka guud ee kale, agabka iyo adeegga	\$8,710.00
2225	Hagaajin iyo dayactir	\$3,573.00
2224	Agabka iyo alaabaha	\$11,982.00
2223	Saliid iyo shidaal	\$4,940.00
2211	Sahay safar	\$10,000.00
2221	Hawlaha guud	\$9,372.00
<b>Total</b>		<b>\$48,577.00</b>

### Talo soojeedin

Jaamacadda waa in ay abuurto guddi qandaraas iib sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadaha xiga, si sare loogu qaado daahfurnaanta, hufnaanta iyo beeqaaminta iibka jaamacadda.

## Jawaabta maamulka

Jaamacadda Ummaddu, haddii laga billaabo marki dib loo furay, waa hay'ad da'yar (2014 - ilaa hada). Hadda la joogo, Maamulka Jaamacaddu waxa uuku howlanyahay dhismaha Guddiga libka iyo Qandaraasyada ee JUS; dhismihiisunawaxa uuku salaysnaadoonaa habraaca iyo shuruucda qaranka.

Maadaama sanadihii la soo dhaafay (2021-2022) uu yaraa, ama uusan jirin, Qarashaad Adeeg oo la siiyay Jaamacadda, dhismaha Guddigu hortebin nooma lahayn. Beddelkiisa, waxa aan adeegsanaynay Guddiga Qiimeynta.

Waxaan rajaynaynaa in aan mudda gaaban ku soo dhisno Guddiga, sida ugu dhaqsiiyaha badana aan idin kugu soo gudbino.

## 13.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIGA

### 13.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup>(1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci Lr 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

Qodobka 38 (1). Dhammaan deeqaha ay hay'ad dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa miisaaniyadda Qaranka.

Qodobka 38 (2) Looma oggola hay'ad dawladeed iyo mid sharikad/wakaalad dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

## Khaladka

### A. Deeq dhan US \$550,957.06 ayaan lagu maamulin Nidaamka Maareynta Maaliyadda Guud (SFMIS)

Intii lagu guda jirey baarista Jaamacadda, waxaa kooxda baarayaasha lala wadaagay diiwaanka todobo (7) mashruuc kuwaas oo la fuliyay intii lagu gudajiray sannadkii 2022. Sarkaalka Idman (Guddoomiyaha Jaamacadda) ma qaadin tillaabbooyinka ku habboon oo lagu hubinayo deeqaha si loogu daro miisaaniyadda iyo khasnadda Dowladda Federaalka Soomaaliya sida uu qabo Qodobka 38<sup>aad</sup> (1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci Lr 17, 2019. Faah-faahfaahinta ayaa lagu muujiyay jaantuska hoose:

Magaca Mashruuca	Magaca deeq bixiyaha	Muddada heshiiska	Lacagta la helay US \$	Inta la isticmaalay US \$
Sahan cilmibaaris oo ku saabsan kaydka quudka iyo nidaamka digniinta xilliga hore xoolaha ee Galmudug, Hirshabeelle, Jubaland, KGS iyo Banaadir.	FAO	22 June 2021 - 31 May 2022	\$63,504.17	\$63,504.17
Shahaadada u diyaarinta Jaamacada	IMS	May - April 2022	\$38,315.00	\$38,315.00
Tababar macalinimo	ADRA	1April 2021 - 30 Oct 2022	\$34,157.89	\$34,157.89

Magaca Mashruuca	Magaca deeq bixiyaha	Muddada heshiiska	Lacagta la helay US \$	Inta la isticmaalay US \$
Tababar macalinimo	ALIGHT	1June 2021 - 31 Aug 2022	\$28,800.00	\$28,800.00
Tababar Macalinimo	SAVE THE CHILDREN	1 April 2021 - 31 Dec 2022	\$13,580.00	\$13,580.00
Adeeg la talin si loo joogteyo hawlaha beeraha ee JUS iyo SOMREP	WORLD VISION	1 July 2022 - 31 Dec 2022	\$3,000.00	\$3,000.00
Adeegga bulshada	MWHRD	1Sep 2018 - 30 Sep 2022	\$369,600.00	\$369,600.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$550,957.06</b>	<b>\$550,957.06</b>

## B. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyada ee dhammaan heshiisyada deeqaha

Intii lagu gudajiray baarista waxaa la ogaaday in Wasiirka Maaliyada aanu dhinac ka saxiixin (Co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha, taas oo lid ku ah Qodobka 38aad (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud.

### Talo soojeedin

Waa in Sarkaalka Idman uu dhammaan deeqaha Jaamacaddu hesho ku daro miisaaniyadda DFS laguna maamula Khasnadda Middaysan (TSA).

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee Jaamacaddu gasho uu dhinac ka saxiixo (Co-sign) Wasiirka Wasaaradda Maaliyada sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadyada xiga.

### Jawaabta maamulka

*Sida ku cad warqadda ka soo baxday Wasaaradda Maaliyada, Waaxda Miisaaniyadda, summadeeduna tahay WM/XAM/11/2022 kuna taariikhaysan 11/Sebtember/2022, u jeedadeeduna tahay, "Tababar Ku saabsan Hirgalinta Sharciga Maamulka Maaliyada ee Dowladda (PFM Compliance)," sharcigaan waxuu dhaqan galayaa 2023 (eeg lifaaqa), waxaana rajaynaynaa in aan ugu dhaqano sida uu yahay.*

*Waxaa kaloo xusid mudan in ay dhammaan heshiisyada aad soo xigateen ka horeeyeen waqtiga la soo saaray wareegtada, "Hirgalinta Sharciga Maamulka Maaliyada ee Dowladda (PFM Compliance)."*

### Jawaabta XHG

Maamulka hay'adda waa in uu tixgaliyo Talo soojeedinta XHGQ.

## 13.3. 1HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 13.3.1. Sharciga

Cutubka Saddexaad ee Dastuurka JFS: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka. Qodobka 43<sup>aad</sup>. Dhulka (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, wax soo saar waarana leh.

### Khaladka

#### A. Maqnaashaha dukumiintiga lahaanshiyaha iyo habka maamulka hantida oo liita

Intii lagu gudajiray baarista, waxa aan maamulka Jaamacadda ka codsanay in uu nala wadaago liiska dhulalka iyo dhismayaasha jaamacadda ay leedahay. Maamulkuwaxa uunala wadaagay liis ka kooban laba iyo toban (12) oo isugu jira dhulal iyo dhismayaal la sheegay in ay leedahay JUS. Si kastaba ha ahaatee, maamulka jaamacaddu uma hayaan dukumintiyada lahaanshiyaha dhismayaasha iyo dhulalka ay nala wadagen. Waxaa intaa dheer, todobo (7) ka mid ah labo iyo tobanka (12) dhulalka iyo dhismayaasha waxaa ku jiraan gacmo gaar ah oo jaamacadu ma maamusho, taasoo lid ku ah Qodobka 43<sup>aad</sup> Dastuurka KMG. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca	Nooca Goobta	Degmada	Xaaladda
Xaruntii Gahayr	Qayb ka mid ah goobta waxbaridda ee Gahayr	Wadajir	Ma lahan dukumiintiyada lahaansha balse maamulka jaamacadda ayaa gacanta heya
Kulliyaddii Farsamada Macallimiinta (KM4)	Goob waxbarid & maamul	Waaberi	
Xarunta Shabeelle	Goob waxbarid & maamul	Xamarweyne	
Faraca Galmudug	Goob waxbarid & maamul	Caabudwaq	
Faraca Puntland	Goob waxbarid & maamul	Badhan	

Magaca	Nooca Goobta	Degmada	Xaaladda
Xaruntii Gahayr	Qeyb waxbarida ka mid ah sida; Kull. Xannaanadda Xoolaha iyo Kull. Injineeriyadda	Wadajir	Ma lahan dukumiintiyada lahaansha maamulka jaamacadduna gacanta kuma hayo
Xaruntii Gahayr	Deegaankii Barayaasha JUS	Wadajir	
Xaruntii Gahayr	Deegaankii Ardayda iyo Dhul Bannaan	Hodan	
Xaruntii Gahayr	Guriga Raktarka	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Siyaasadda	Goob Waxbaraid	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Siyaasadda	Deegaanka Ardayda	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Siyaasadda	Deegaanka Barayaasha	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Siyaasadda	Garoon	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Caafimaadka	Goob waxbarid sida: Fasallo, shaybaarada, laybareeriga, dhulkii banaanaa iyo Xafiisyaddii maamulka IWM	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Caafimaadka	Students' Hostels	Hodan	
Xaruntii Kulliyadda Waxbarashada (Lafoole)	Goob waxbarid: Fasallo, laybareeriga, & Xafiisyaddii Maamulka IWM	Afgooye	
Xaruntii Kulliyadda Beeraha	Goob waxbarid sida: Fasallo, laybareeriga, & Xafiisyaddii maamulka	Afgooye	
Beertii Tijaabada	Oo bedkeedu dhan yahay 1000 Hektaar	Balcad	

## Talo soojeedin

Maamulka Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waa in uu sameeyaa dukumiintiyada lahaanshiyaha dhulalka iyo xarumaha Jaamacadda iyagoo xaqiijinaya in dukumiintiyadaasi ay ku qoran yihiin magaca Jaamacadda.

Dhulalka iyo dhisamayasha aan maamulka Jaamacadda gacantooda ku jirin waa in dib loogu soo celiyaa gacanta maamulka Jaamacadda si ay u noqdaan kuwa loogu adeego danta guud ee bulshada Soomaaliyeed laga billaabo sannadka 2023.

## Jawaabta maamulka

*Burburkii dowladii dhexe ka dib (1991) waxaa gacanta ka baxay dhammaan hantidii maguurtada aheyd ee Dowladda. Sida caadiga ahayd, dhammaan dhulka dowladdu wuxu ku soo bixi jiray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda (Bolettino Ufficiale); waxaana ilaalintiisa mas'uul ka ahaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka. Inta aan ognahay, cidna lama siin jirin dukumeentiga dhulka Dowladda.*

*Maamulka Jaamacaddu waxa uuxukuumadda ku guubaabaanayaa in ay xil mug leh iska saarto gacan ku soo celinta hantida maguurtada ah ee ka maqan JUS, dhul iyo dhismooyin intaba.*

# 14. HAY'ADDA TIRAKOOBKA QARANKA

## 14.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 14.1.1. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) & (4), Sharci Lr. 22, Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016, ayaawaxa uudhigayaa sida hoos ku xusan:

(1) Dhamaan Hay'adaha qandaraaska Iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sanadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaa kale ee sharcigan. Qorshaha Qandaraaska Iibsigawaxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay Hay'adda qandaraaska Iibka.

(4) Qorshaha qandaraaska Iibka waxaa lagu daabacayaa websaytka quseeya kaddib markii la ansixiyo. Daabacaadda Qorshaha Qandaraaska.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha Iibka sannadlaha

Intii lagu gudajiray baarista waxaa la ogaaday in Sarkaalka Idman ee Hay'adda Tirakoobka Qaranka uu sameeyay wax soo iibsasho dhan **\$58,307.00**, iyada oo aan laheyn qorshe Iib sannadlaha ah, taasoo lid ku ah sida uu qabo Qodobka 27<sup>aad</sup> (1), (4) ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016; Sida ku cad shaxda hoose:

Magaca qandaraaslaha	Madax-xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-136	2221	Howlaha Guud	\$12,500.00
GG-136	2224	Agabka iyo Alaabaha	\$10,000.00
GG-136	2225	Dayactir iyo Hagaajin	\$4,000.00
GG-136	2261	Kharashaadka kale	\$21,807.00
GG-137	2223	Shidaal iyo saliid	\$10,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$58,307.00</b>

### Talo soojeedin

Sida uu dhigayo sharciga Iibka, maamulka hay'addu waa in uu diyaariyaa oo ansixiyaa qorshe sannadeedka 2023 ee wax soo iibsiga oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee Hay'adda. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaanta siiyaa hawlaha ugu muhiimsan ee adeeg bixinta hufan.

### Jawaabta maamulka

*Waxaa maamulka hay'adda Istaatistikada hirgeliyeen qorshaha Iibka sanad xisaabeedka 2023 oo ku saleysan miisaaniyad sannadeedka la ansixiyay ee hay'adda Istaatistikada Qaranka.*

### Jawaabta XHG

Maamulka hay'addu waa in uu tixgaliyo Talo soojeedinta XHG.

## 14.1.2. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 1<sup>aad</sup>, shardiga 2<sup>aad</sup> waxa uudhigayaa in hal adeeg bixiye aan loo oggolaan in uu ka sameeyo iib wax ka badan laba madax-xige.

### Khaladdaadka

#### A. Adeeg bixiye la siiyay in ka badan laba madax-xige oo qiimahoodu yahay US \$48,307.00

Intii lagu gudajiray baarista waxa aan ogaaday in Maamulka hay'addu ay siiyeen hal adeeg bixiye (Cawaale Supply Service) Afar (4) madax-xige wadarta qiimahooduna yahay **\$48,307.00**, taa oo lid ku ah Habraaca Xakameynta (Commitment Control) bogga 1<sup>aad</sup> shardiga 2aad ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-xige	Magaca Qandaraaslaha	Lacagta US \$
2221	GG-136	\$12,500.00
2224	GG-136	\$10,000.00
2225	GG-136	\$4,000.00
2261	GG-136	\$21,807.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$48,307.00</b>

### Talo soojeedin

Maamulka hay'adda waa in aanu u oggolaan hal adeeg bixiye in ka badan laba madax-xige, waana in ay raacaan Habraaca Xakameynta inta lagu guda jiro xulashada adeeg bixiyaha sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadyada xiga.

### Jawaabta maamulka

*Waxaa xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka bilowga sanadka Janaayo 2023 dib eegis ku sameysay Habraaca xulista qandaraasleyda sannadka 2023. Sida uu dhiggayo Habraaca libka Xafiiska Xisaabiyaha Guud, bogga 1aad, mabaa'didiisa 2aad, hal qandaraasle/shirkad waa in aan la siin kharash/miisaaniyad in ka badan labo madax-xige.*

## 14.1.3. Sharciga

Qodobka 19<sup>aad</sup> (1) iyo (2) Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka Sharci Lr.22, ayaa dhigaya:

(1) Habraacyada xulashada hordhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.

- Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
- Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaaran

(2) Casumaadda xulidda hordhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiya Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan Maamulka.

Sidoo kale Xeerka Xafiiska Xisaabiyaha Guud bogga 4<sup>aad</sup>, xadka qiimaha ka sarreeya \$2001, kana hooseeya US \$50,000 ayaa tilmaamaha dhigaya in cidda wax soo iibsanaaya ay tahay inay ugu yaraan saddex qandaraasle tartansiiso.

## Khaladka

### A. Maqnaanshaha xulasho hordhac ah iyo faafinta tartameyasha iibka agabka, adeegga iyo hawlaha

Intii aan ku guda jirnay baarista, ayaa waxa aan ogaaday in maamulka hay'addu ay sameeyeen wax soo iibsasho ay ku baxday kharash u dhexeeya \$2,001 iyo \$50,000, kaasoo 2 adeeg bixiyayaal loo oggolaaday in ay soo iibiyaan alaab iyo adeeg qiimahoodu dhanyahay US **\$58,307.00** iyada oo aan la sameyn xulasho horudhac ah (Prequalification). Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Qandaraas-laha	Madax-xigaha	Faahfaahin	Lacagta US \$
GG-136	2221	Howlaha Guud	\$12,500.00
GG-136	2224	Agabka iyo Alaabaha	\$10,000.00
GG-136	2225	Dayactir iyo Hagajin	\$4,000.00
GG-136	2261	Kharashaadka kale guud ee agabka	\$21,807.00
GG-137	2223	Shidaal iyo saliid	\$10,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$58,307.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Hay'adda waa in ay sameeyaan xulasho horudhac ah (Prequalification) ee adeeg bixiye kasta kaasoo xaddiga iibkiisu ka sarreeyo \$2,001 kana hooseeyo US \$50,000 ugu dambayn dhammaadka sanad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023

## Jawaabta maamulka

*libka la xariira qandaraasleyda xulasho hordhac ah ayaa la sameeyay bilowga Sanadka 2023 taas oo dhamaan dib u eegis lagu sameyay qaabka xulashada qandaraasleyda Hay'adda Istaatistikada Qaranka, iib kasta oo ka sarreeya xadka \$2,001 balse ka hooseeya \$50,000.*



## 14.2. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA IYO MAAMULKA KOONTOOYINKA BANGIGA

### 14.2.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup>(1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci L.r 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

Qodobka 38 (1). Dhammaan deeqaha ay Hay'ad Dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka.

Qodobka 38 (2) Looma ogola hay'ad Dawladeed iyo mid Sharikad/Wakaalad Dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

### Khaladka

#### A. Wadar lacageed oo dhan US \$1,919,905.55 oo aan lagu darin miisaaniyadda

Inta lagu guda jirey baarista HTQS, waxaa la diiwaan galiyay fulinta afar (4) mashruuc oo aan ku jirin miisaaniyadda dowladda, Mashaariicdaas oo wadarta miisaaniyadooda ahayd US \$1,919,905.55. Sarkaalka Idman ee Hay'adda Tirakoobka Qaranka ma qaadin talaabbooyin ku habboon oo lagu hubinayo deeqaha si loogu daro miisaaniyadda iyo khasnadda dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Faafaahinnadda ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Mashruuca	Magaca deeq bixiyaha	Muddada heshiiska	Miisaaniyadda la qoondeeyay US \$	Wadarta la isticmaalay 2022 US \$
Social sector capacity building	UNICEF	2021- 2022	\$760,000.00	\$510,000.00
Strategic Planning in Somalia	UNDP	2022	\$449,476.00	\$382,738.00
Somalia Population and housing census	UNFPA	2021-2025	\$685,469.55	\$685,469.55
African Statistics Day	FAO	2022	\$24,960.00	\$4,000.00
<b>Wadarta</b>			<b>\$1,919,905.55</b>	<b>\$1,582,207.55</b>

#### B. Maqnaanshiyaha saxiixa Wasiirka Maaliyada ee heshiis deeq oo dhan \$1,919,905.55

Intii lagu guda jirey baarista, waxaa la ogaaday in Wasiirka Maaliyaddu uusan daraf ka saxiixin heshiisyadda deeqaha kor lagu soo xusay, taasoo lid ku ah Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019 qodobkiisa 38<sup>aad</sup> (2).

### Talo soojeedin

Waa in Sarkaalka Idman ee HTQS uu dhammaan deeqaha hay'addu hesho ku daro miisaaniyadda DFS laguna maamulo Khasnadda Midaysan (TSA).

Haddii ay jiraan waxyaabo si gaar ah loogula heshiyyay hay'adaha Hay'adaha Qaramada Midoobay waa in dukumiintiyada heshiisyada iyo miisaaniyadda DFS lagu caddeeyaa.

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee hay'addu gasho uu dhinac ka saxiixo (Co-sign) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sannad maaliyadeedka 2023 iyo sannadyada xiga.

## Jawaabta Maamulka Hay'adda

*Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2020 waxuu qeexaya qodobka 32 faqradiisa 2aad in wasiirku amri karo fullinta habraca lacag bixinta markii laga reebo qodobka 32 oo aan ka hayn kuwa ku xusan jumlada ku qoraneyn faqrada 1aad.*

*Lacagaha Mashaariicda UNFPA, UNDP, UNICEF, FAO, ETC, Qeyb kama aha Miisaaniyada Qaranka sidaa Xisaab celinteeda waxaa jira hanti dhowrayaal gudaha ee ay soo dirsadaan dhamaan hay'adaha sare ku xusan iyo mid dibada (external Auditor ) lagu sameyo sanad kasto dhamadkisa ama bilowga rubaca ugu horeeyo sanadka xiga si qoto dheer oo waafaqsan sharciga caalamiga ee hantidhowrka.*

*Majirin wargelin ka timid Wasaarada Maaliyada ama Xisaabiyaha Guud oo nagula faraayo in aanan ka furan Karin Koontooyin bangiyada gaarka loo leeyahay.*

*Majirin wax diidmo ah oo aan kala kulanay bangiyada gaarka loo leeyahay markaan furanaynay koontooyinka logu maamulayay mashaariicda UNka.*

*Waxan cadeyneynaa Koontooyinka Mashaariicda sida UNDP, UNICEF, FAO, ETC UNFPA in la furay xili hore waxaana oggolaasho buuxda laga helay darafna ka ahaa saxiixa heshiisyadda deeqaha sare ku xusan wasiirka xiligaas jiray.*

*Waxaa heshiiska qayb ka ah in la furo Koonto ay Hantidhowre calami ah baarikaro (International Audit) ka baxsan hay'adda. Si ay deeqbixiyaasha (Donors) u helaan xisaab celin hufan.*

*Waxaa heshiiska UNDP, UNICEF, FAO, ETC UNFPA qaybka ah in la isticmaali Karin qarash aysan ogolaan hadii ay dhacdana ay dib u celinayaan hay'adda isticmaalka qaranka (Refund Cost).*

*Waxaa jiro Hishiis ka dhaxeeyo Hay'adda Istaatistkada Qaranka iyo Hay'adaha UNka ee Deeqbixiyaasha kaasoo tilmaamaya in Mashruucyadaas sare ku xusan lagu maamulo koonto gaar ah ay mashruuc walbo gar u ah sida ku cad hishiiska (Letter of Agreement).*

*Howlaha ay hay'adda Istaatistkada Qaranka la qabato ee hay'adaha deeqbixiyaasha ee sare ku xusan waxay inta badan ka shaqeyaan sahama farabadan oo kharashaadkooda lagu bixiyo maalinle Ex: Community guide.*

## 14.2.2. Sharciga

Qodobadda 9<sup>aad</sup> (7) iyo 42<sup>aad</sup> (3) ee Sharci L.r 17 Maareynta Maaliyadda Guud 2019 waxa uu sheegaya sida soo socota:

9 (7), Wasiirka Maaliyaddu waxa uu ansaxin doonaa furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha dowladda

42 (3), Looma furi doono Xisaab bangi ha ahaato mid dalka gudahiisa ah ama dibeddiisa Hay'adaha Dowladda iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud.

### Khaladka

#### A. Koonto xisaab bangi ayaa la furey, ansixin iyo oggolaansho la'aan

Intii lagu guda jirey baarista, maamulka Hay'adda Tirokoobka Qaranka waxaa lagu ogaaday in ay fureen ayna howlgaliyeen Afar koonto xisaabeed oo laga furay Amal Bank iyadoo aan laga haysan oggolaansho qoraal ah Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Faahfaahinnadda ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca bangiga	Koonto Lr.	Lacagta la dhigay US \$	Haraaga xiisaabta US \$
Amal Bank	1014079230	\$4,000.00	\$0.00
Amal Bank	1013558689	\$382,214.00	\$5.00
Amal Bank	1013670963	\$685,469.55.00	\$11,947.14
Amal Bank	1014355937	\$58,369.00	0.00

### Talo soojeedin

Sargaalka Idman ee Hay'adda Tirokoobka Qaranka waa in uu oggolaanshiyo ka helo Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda kahor inta uusan furin koonto xisaab bangi.

### Jawaabta maamulka

*Koontooyinka Hay'adda Istaatistikada iyo hay'adaha UNKa looma isticmaali karo wax aan waafaqsaneyn heshiisyada iyo qorshe howleedka sanadka waxa intaa sii dheer lama isticmaali karo wax aan waafaqsaneen miisaaniyada loo ogolaaday.*

*Koontooyinka hay'adda istaatistikada iyo kuwa gaarka ah ee UNKa waxaa lagu bixiyaa kharashaadkooda Nidaam maaliyadeed ayaga u gaar ah sidaa awgeed looma isticmaali karo dano gaar ah.*

### Jawaabta XHG

Maamulku waa in uu tixgaliyo Talo soojeedinta XHG.

## 14.3. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

### HUBINTA GUDAHA

#### 14.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adaha, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyeyasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

### Khaladka

#### A. Lama sameyn waaxda baarista gudaha (Internal Audit)

Intii lagu gudajiray baarista hay'adda Tirakoobka Qaranka waxaa la ogaaday in maamulka hay'addu uusan sameyn baaraha gudaha iyo shaqada baarista gudaha oo waqtiyaysan si dib u eegis loogu sameeyo waxqabadka hay'adda gaar ahaan maamulka maaliyadda iyo guud ahaan wixii hawlaha hay'adda. In aan la dhiso baaraha gudaha waxay baalmarsantahay Qodobka 46<sup>aad</sup> (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Lr. 17.

### Talo soojeedin

Maamulka hay'adda, iyadoo si dhow ula tashanaya Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale ee ay khusayso waa in ay abuuraan waaxda baarista gudaha oo madax-bannaan iyo hubbinta gudaha si ay u soo saaraan warbixino xisaabeed tayo sare leh oo waqtiyeysan.

### Jawaabta maamulka hay'adda

*Hay'adda istaatiistikda qorsheysay in 2023 abuuran waaxda baarista gudaha oo madax-bannaan iyo hubbinta gudaha si ay u soo saaraan warbixino xisaabeed tayo sare leh oo waqtiyeysan waafaqsanna heerka hantidhawrada gudaha ee caalamiga.*

*Agaasimaha Guud waxa ka go'an wax kasto oo lagu saxayo habraaca maaliyadeed ee dowlada iyado lagu saleynaayo sharciga maaliyadeed ee dalka u yaalo.*

# 15. WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO ADEEGGA AADANAHA

## 15.3.1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA, IYO HAWLAHA

### 15.3.2. Sharciga

Qodobka 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4), ee Sharci Lr. 22 ee libka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27 (1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska libka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga waxa uutaageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27 (4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

#### A. Maqnaanshaha diyaarinta iyo ansixinta qorshaha iibka sannadlaha

Intii lagu guda jiray baarista waxa aan ogaaday in maamulka Wasaarada Caafimaddku uu sameeyay wax soo iibsi dhan US **\$7,404,937.00** iyada oo aan laheyn qorshe iib sannadle ah taasoo lid ku ah Sharci-ga libka iyo Qandaraasyada Qaranka 2016, Qodobkiisa 27<sup>aad</sup> (1) iyo (4). Sida lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax-Xige	Faah-Faahin	Wadar US \$
2261	Kharashaadka Guud ee kale ee Aggabka iyo Adeegga	\$ 466,816.00
2225	Hagaajin iyo dayactir	\$67,007.00
2224	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	\$422,526.00
2231	Kiro guryo deegaan ah	\$66,728.00
2223	Saliid iyo shidaal	\$131,328.00
2211	Sahay safar	\$135,574.00
2241	Kharash Ka La-talinta iyo Xirfadaha	\$520,720.00
2221	Hawlaha Guud	\$308,963.00
3112	Qalab iyo Mashiino	\$ 689,430.00
2222	Isgaarsiin	\$2,400.00
2242	Adeeg La-Talin iyo Xirfadaha (RCRF)	\$4,593,445.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$7,404,937.00</b>

### Talo soojeedin

Sida uu dhigayo Sharciga libku, maamulku waa in uu diyaariyo oo ansixiyo qorshe sannadeedka wax soo iibsiga oo ku saleysan miisaaniyada sannadeedka la ansixiyay ee Wasaaradda Caafimaadka. Sarkaalka Idman (DG) waa in uu magacaabo guddiga wax soo iibsiga si ay u diyaariyaan qorshe sannadeedka 2023. Qorshe sannadeedku waa in uu mudnaanta siiyaa hawlaha ugu muhiimsan ee adeeg bixinta hufan.

## Jawaabta maamulka

Wasaaradda Caafimaadka way leedahay Qorshe howleedka libka oo sanadle ah (Procurement Plan), balse Wasaaradda Caafimaadka waxay u shaqeysaa qaab Rubacle ah oo ku salaysan mashaariicda ay fuliso, maadaama loo soo ansixiyo si rubacle ah miisaaniyadda mashaariicda.

Wasaaradda Caafimaadka shaqo aan Qorshe howleedka libka (Procurement Plan) ma soo iibsato. Intii lagu guda jiray baaris sanadeedka hantidhowrka, Wasaaradda Caafimaadka waxay la wadaagtay xafiiska Hanti-dhowraha Qaranka Qorshe howleedka libka oo Rubacle ah.

Hadaba sidaas darteed shaqooyinka intooda badan ee ay Wasaaradda Caafimaadka qabato waxay ay u baahan yihiin Approved Warrant, sidaas darteed Approved Warrant la'aantiis lama samayn karo Qorshe howleedka libka oo sanadle ah (Procurement Plan).

Sidaas darteed Wasaaradda Caafimaadka waxay dhaqan gelinaysaa samaynta Qorshe howleedka libka oo sanadle ah (Procurement Plan), iyada oo ay caqabadaha arintaas la xiriirta ay badan yihiin.

## Jawaabta XHGQ

Maamulka Wasaaradda Caafimaadka waa in uu tixgaliyo Talo soojeedinta XHG.

### 15.3.3. Sharciga

Habraaca xakameynta (Commitment control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud, boggiisa 4<sup>aad</sup>, waxa uu leeyahay iibka xadigiisu ka badanyahay qiimo ahaan US \$50,000 ama la'eg waa in lagala tashado ama loo wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

## Khaladdaadka

### A. Wasaaradda Maaliyadda oo aan loo wareejin iib qimihisu ka badan yahay ama la'eg yahay \$50,000

Intii baarista lagu gudajiray, waxa aan ogaannay in maamulka Wasaaradda Caafimaadka uu sameeyay wax soo iibsi alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay US **\$180,000.00**, taas oo aan loo wareejin Wasaaradda Maaliyadda maadaama qiimuhu ka badan yahay xaddiga uu dajiyay Habraaca Xakameynta (Commitment Control) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Madax Xige	Adeeg Bixiye	Qiimaha US \$
2241	Primo Place & Restaurant	\$91,600.00
2241	Primo Place & Restaurant	\$88,400.00
<b>Wadarta</b>		<b>\$180,000.00</b>

## Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Caafimaadku waa in ay u hoggaansamaan habraaca xakamaynta wax soo iib-siga (Commitment Control) ee Xisaabiyaha Guud.

## Jawaabta maamulka

Arinta ku saabsan Primo Place & Restaurant, sida uu qabo Project Operations Manual (POM) ee Bankiga Aduunka (World Bank) lacagta ka yar ama la'eg \$100,000 waxay noqonaysaa 3 quotations sidaas darteed ayey Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada u fulisay shaqadaas.

## 15.1. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAALIYADDA DALKA (SFMIS) EE KU AADDAN LACAGAHA DEEQAHA DIBEDDA

### 15.1.1. Sharciga

Qodobka 38<sup>aad</sup> (1), (2) ee sharciga Maareynta Maaliyadda Sharci L.r 17, 2019 oo sheegaya sida soo socota:

Qodobka 38 (1) Dhammaan deeqaha ay Hay'ad Dawladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka.

Qodobka 38 (2) Looma ogola hay'ad Dawladeed iyo mid Sharikad/Wakaalad Dawladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku la saxiixin.

### Khaladdaadka

#### A. Deeq dhan US \$31,219,863.64 ayaan lagu darin miisaaniyadda qaranka

Intii lagu guda jirey baarista Wasaaradda Caafimaadka waxa aan ogaanay in la fuliyay Lix iyo Toban (16) mashruuc oo miisaaniyadoodu dhan tahay US **\$31,219,863.64**. Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Caafimaadka ma qaadin talaabbooyin ku habboon oo lagu hubinayo deeqaha si loogu daro miisaaniyadda iyo khasnadda midaysan ee DFS. Faah-faahinnadda ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Magaca Mashruuca	Magaca Deeq-bixiyaha	Ujeeddka Mashruuca	Muddada heshiiska	Miisaaniyadda	Kharashadka La Isticmaalay
Malaria	UNICEF	Malaria	Jan.-Dec. 2021	\$584,544.00	\$473,381.20
HMIS	UNICEF	Health Management Information System	Jan.-Dec. 2021	\$735,998.00	\$408,781.05
PSM	UNICEF	Pharmaceutical and Supply Chain Management	Jan.-Dec. 2021	\$196,731.05	\$192,026.00
RSSH	UNICEF	Resilient and Sustainable Systems for Health	Jan.-Dec. 2021	\$98,263.00	\$86,382.60
HIV	UNICEF	Human Immunodeficiency Virus	Jan.-Dec. 2021	\$351,398.40	\$322,489.60
TB	WORLD Vision	Tuberculosis	Jan.-Dec. 2021	\$589,949.52	\$472,406.52
School Health	UNICEF	School Health Program	Jan.-Dec. 2021	\$28,168.00	\$24,872.00
C4D/SBC	UNICEF	Communication for Development	Jan.-Dec. 2021	\$408,192.00	\$314,370.00

Magaca Mashruuca	Magaca De- eq-bixiyaha	Ujeeddka Mashruuca	Muddada heshiiska	Miisanniyadda	Kharashadka La Isticmaalay
EYE Health	UNICEF	EYE School Program	Jan.-Dec. 2021	\$40,000.00	\$39,134.00
Child Health	UNICEF	Child Health Program	Jan.-Dec. 2021	\$55,443.00	\$17,530.00
Nutrition	UNICEF	Nutrition Program	Jan.-Dec. 2021	\$241,444.67	\$162,352.50
WASH	UNICEF	WASH Program	Jan.-Dec. 2021	\$841,330.00	\$371,214.50
C-19 RM project	UNICEF	Covid-19	Jan.-Dec. 2021	\$26,847,625	N/A
EPI	UNICEF		Jan.-Dec. 2021	\$150,547.00	\$79,154.00
Health Operation	UNICEF	Health Operation Program	Jan.-Dec. 2021	\$40,000.00	\$35,936.00
Emergency	UNICEF	Public Emergency Program	Jan.-Dec. 2021	\$10,230.00	\$8,730.00
Emergency	UNICEF	Public Emergency Program	Jan.-Dec. 2021	\$10,230.00	\$8,730.00
<b>Wadarta</b>				<b>\$31,219,863.64</b>	<b>\$3,008,759.97</b>

## B. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda oo aan daraf ka saxiixin heshiisyada deeqaha

Intii lagu gudajiray baarista maamulka Wasaaradda Caafimaadka ayaan waxa aan ogaanay in Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu uusan daraf ka saxiixin (Co-sign) dhammaan heshiisyada lala saxiixday deeq bixiyayaasha taas oo lid ku ah Qodobka 38<sup>aad</sup> (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Sharci Lr.17.

### Talo soojeedin

Waa in Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Caafimaadka uu dhammaan deeqaha wasaaraddu hesho ku daro miisaaniyadda DFS laguna maamula Khasnadda Middaysan (TSA).

Waa in dhammaan heshiisyada deeqaha ee hay'addu gasho uu dhinac (Co-sign) ka saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sannad maaliyadeedka 31<sup>da</sup> Diseembar 2023 iyo sannadaha xiga.

### Jawaabta maamulka

*Waa in dhammaan deeqaha Wasaaradda Caafimaadka hesho lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.*

*Waa in dhammaan heshiisyada hay'adda ay gasho ee la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.*

### Jawaabta XHGQ

Jawaabta ay bixisay Wasaaradda Caafimaadka waxay u muuqataa mid aan habooneen.



## 15.2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

### 15.2.1. Hanaanka la isku waafaqsan yahay

Hannaanka la isku waafaqsan yahay ayaa jidaynaya in maamulka hay'adaha dowladdu ay sameeyaan diiwaangalinta hantida oo leh xilli joogta ah oo la cusboonaysiiyo, waa in macluumaadka la diiwaangalinayo uu noqda sida nooca hantida, qiimaha hantida taariikhda la soo gaday, xaalad, lambarada aqoonsiga gaarka ah, saraakiisha mas'uul ka ah, goobta, iyo lahaanshiyaha hantida.

#### Khaladka

##### A. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita

Intii lagu guda jiray baarista maamulka Wasaaradda Caafimaadka ayaa waxaa la ogaaday in labo iyo toban (12) gaadiid ah oo la sheegay in ay leedahay Wasaaradda Caafimaadka, inkastoo kow iyo toban (11) kamid ah gaadiidkaas aayaan la hayn dukumitiyo lahaanshiyaha Wasaaradda Caafimaadka. Sida lagu muujiyay faahfaahinta shaxda hoose:

Nooca gaadiidka	Cidda soo iibisay	Taargo Lr.	Caqaayad Lr.	Faallo
Ambulance FIAT	FGS	Ma lahan	JTMHV01JOJ4262770	Ma lahan taargo iyo buugga lahaanshiyaha. Waana cilladeysan yihiin.
Ambulance FIAT	FGS	Ma lahan	JTMHX01JOL5103383	
Ambulance FIAT	FGS	Ma lahan	JTMHX01JXM4224560	
Ambulance HYUNDA	FGS	Ma lahan	MROBX8CDXN2774285	
Land-Cruiser Bulletproof	FGS	Ma lahan	MROHX8CD0L0937741	
TAYOTA PICK UP	FGS	Ma lahan	AHTKK8CD700676805	
V8 Land Cruiser	FGS	AE 3149	MROFR22G3E0723906	
TAYOTA PICK UP	FGS	Ma lahan	AHTKK8CD700676805	Ma lahan taargo iyo buugga lahaanshiyaha
V8 Land Cruiser	FGS	AE 3149	MROFR22G3E0723906	
Ambulance Land-cruiser	FGS	Ma lahan	TRN2-15-0018880	
Prado Ultima	FGS	AJ-0996	MROHX8CD2G0895367	
TAYOTA PICK UP	FGS	Ma lahan	MROKX8CD8J1903981	
Prado Ultima	FGS	AJ4782		

#### Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Caafimaadka waa in uu dayactir ku sameeyaa gaiidka Wasaaradda Caafimaadka ee cilladaysan, loona sameeyaa buuggaagta lahaanshiyaha iyo taargadda gaadiidka DFS inta lagu guda jiro sannadka 2023.

#### Jawaabta Maamulka

*Wasaaradda Caafimaadka waxay cadaynaysaa in ay jiraan gaadiidkaas ayna dayacan yihiin, Wasaaraddu waxay raadinaysaa budget ay ku dayactirto gaadiidkaas.*

## 15.3. ARRIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

### HUBINTA GUDAHA

#### 15.3.1. Sharciga

Qodobka 46<sup>aad</sup> (1), (b, t, j iyo x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud;

Sarkaakiisha idman ee lagu qeexay sharcigan ayaa ugu dambeyntii mas'uul ka ah dhammaan howlaha maaliyadda iyo macaamilka ka dhacaya gudaha hay'adahooda, oo ay ka mid yihiin wixii waaxyo ah ee ay kormeerayaan ama ay masuul ka yihiin. Sarkaalka Idman ee hay'adda waxa kaal-maynaya Baaraha Gudaha (Internal Auditor) oo si toos ah ugu soo gudbinayo warbixinada hawlaha uu qabanayo oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn:

- b) Marka muddo la joogaba in uu dib-u- eegis ku sameeyo nidaamka hay'addu u shaqayso gaar ahaan maamulka maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda.
- t) Waa in uu qiimeeyaa ilaalinta iyo joogteynta dhammaan habraaca maareynta maaliyadda, asluubta iyo habka la raacayo (procedures & processes) ee ku xusan sharcigaan, xeer nidaamiyayaasha kaaba iyo tilmaamayaasha (instructions) Wasiirka.
- j) Qiimeeyo sida ugu habboon ee loo maamulo hubinta, isku dheelitirka (Checks iyo Balances), xakamaynta iyo sida loo maareeyo nidaamka Maaliyadda ee hay'adda iyo waaxyaheeda; iyo
- x) Kula taliyo Sarkaalka idman tallaabayinka wax lagu saxayo meelaha looga baahdo iyo in uu ku wargeliyo Wasiirka sida ay wax u jiraan.

### Khaladka

#### A. waxa aan la sameyn/dhisin baarista gudaha (internal audit)

Intii lagu gudajiray baarista Wasaaradda Caafimaadka waxaa la ogaaday in maamulka Wasaaraddu uusan lahayn baaraha gudaha iyo shaqada baarista gudaha oo wax ku ool ah soona saara warbixinta baarista gudaha oo waqtiyaysan. Maqnaanshaha baaraha gudaha waxay baalmarsan tahay Qodobka 46 (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud Lr. 17.

#### Talo soojeedin

Maamulka Wasaaradda Caafimaadka waa in uu sameeyaa baaraha gudaha oo madaxbannaan, isla markaana baaraha gudaha uu soo saaro warbixin baariseed xillile ah (periodic internal audit report).

#### Jawaabta maamulka

*Wasaaradda Caafimaadku waxay leedahay baaraha gudaha, wuxuuna soo saaray report, kana fiiri lifaaqa. (Hadi).*

#### Jawaabta XHGQ

Maamulka wasaaradda waa in uu u hogaansamaa fulinta talo soojeedinta XHGQ.

## 15.4. MARXALADDA BAARISTII SANNADKII HORE (AUDIT FOLLOW UP)

### 15.4.1. Khaladdaadka baarista sannadkii 2021 ee aan wali la xalin

Jaantuska hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladdaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay Wasaaradda Caafimaadka in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

Khaladdaadka	Marxaladda
4.2.1. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka	Lama fulin
4.2.2. Maqnaanshaha u hoggaansanaanta xaddiga wax soo iibsiga	Lama fulin
4.3.1. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita	Lama fulin
4.5.1. Deeqaha dibadda oo aan lagu darin Nidaamka maaliyadeed ee SFMIS.	Lama fulin

## GUNAAANAD

Sida ku cad Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud, ee 1972 iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019 Xafiiska Hantidhawrka Guudwaxa uuawood buuxda u leeyahay in uu baarista U Hoggaansanaanta sharciga ku fuliyo dhammaan hay'adaha DFS. Sidaas darteed, XHGQwaxa uubaarista u xushay 15 hay'adood; kuwaas oo isugu jira Wasaarado iyo Hay'adaha kale ee qoondada ku leh miisaaniyadda Dowladda, waxaana aanna baaray waxyaabaha hoos ku xusan (Subject Matters):

- 1) Hannaanka maamulka iibka agabka, iyo adeegga;
- 2) Hannaanka maamulka hantida;
- 3) Isticmaalka midaamka maareynta maaliyadda dalka (SFMIS) ee ku aadan lacagaha deeqaha dibedda; iyo
- 4) Arrimaha kale ee ahmiyadda leh (Other Audit Matters).

Waxyaabaha baarista aan ku sameeyay ee kor ku xusan waxa aan ku qiimeeyay u hoggaansanaanta qodobbada shuruucda la xariirta, macluumaadkaas oo faahfaahsanna waxaa laga heli karaa warbixinta guud iyo waxyaabaha aan baaray (Subject Matters). Caddeymaha aan aruuriyay intii baaristu socotay waxay ku filan yihiin kuna habboon yihiin in aan gunaanad ka gaaro waxyaabaha aan baaray in aysan u hoggaansanayn dhammaan qodobbada shuruucda iyo Hannaanka la isku-waafaqsan yahay.

### Qadarin,

Avv. Axmed Ciise Guutaale  
Hantidhawraha Guud, JFS  
Juun, 2023



# XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD EE

Dowladda FEDERAALKA AH EE SOOMAALIYA

Muqdisho, Soomaalyia

[www.oag.gov.so](http://www.oag.gov.so)



[oag@oag.gov.so](mailto:oag@oag.gov.so)